DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD



GO'AAMADA FADHIGA DIB U EEGISTA MAXKAMADDA GUUD EE JDFI

JIGJIGA
2017

DAWLADDA DEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD



GO'AAMADA FADHIGA DIB U EEGISTA

MAXKAMADDA GUUD EE JDFI

Jigjiga

2017

Tusmo

1. **Summadda Galka 181278 Qod.78 & 78 ee Dastuurka JDFI (Awood Garsoorka) ---------- 4**
2. **Summadda Galka 175719 Qod.34(4) & 78(5) ee Dastuurka JDFI & Bayaanka Maxkamadaha Shareecada lagu aasaasay (Awood Garsoorka) ---------- 11**
3. **Summadda Galka 183001 Qod.1195(1) & 1196 ee XMI (Burin la'anta maxkamada cadeynta ay hayád dawli ahi bixiso) ---------- 18**
4. **Summadda Galka 48699 (Qaadasho la'aanta xujadihii ka horeeyay Bayaanka 47/67) ---------- 24**
5. **Summadda Galka 17712 Qod.1195(1) & 1196(1) ee XMI (Caddaynta Xujadda) ---------- 30**
6. **Summadda Galka 168556 Qod. 37 ee Dastuurka JDFI & Qod.3(1) ee bayaanka maamulka & isticmaalka dhulka miyiga 456/97 (Magdhawga Dhulka) ---------- 34**
7. **Summadda Galka 166617 Qod.246-249 & 341(1) ee HXMI (Waajibaadka maxkamada hoose marka dacwada lagu soo celiyo) ---------- 41**
8. **Summadda Galka 162083 Qod.40 ee Dastuurka JDFI (Magdhawga dhulka loola wareego dan guud) ---------- 49**
9. **Summadda Galka 169648 Qod.12 ee bayaanka 456/97 ee maamulka & isticmaalka dhulka miyiga (Khilaafka Dhulka Miyiga iyo Maamulka Qabalaha)---------- 56**
10. **Summadda Galka 22719 Qod. 1195 ee XMI (Caddeynta Mulkiyadda Guryaha---------- 62**
11. **Summadda Galka 37725 (Natiijada Raacis la'aanta Maxkamadda Hoose, Go'aanada iyo tilmaamaha Maxkamadaha Sare) ---------- 66**

12.Summadda Galka: 181206 Qod. 27(1), 23(2) & 58(1) (t) ee Xeerka Danbiyada Itoobiya (Kala soocida falka taxadar daro loo sameeyo iyo isku dayga) ----- 72
13.Summadda Galka 37050 Qod.13(1) ee Dastuurka JDFI (Xuquuqda Qareenka)---------- 80
14.Summadda Galka: 186919 Qod 188(1) and (2) ee xeerka danbiyada iyo qodobka 22/2 ee awaamiirta xadaynta xeerka ciqaabta ee tirsigeedu yahay 02/2006 (Xadaynta ciqaabta ka dhanka ah caadeystaha) ----------85
15.Summadda Galka: 200520 Qodobka 184 ee HXCI iyo qodobka 61(t) iy0 4 (1) ee bayaanka dhawrista markhaatiyada iyo ka faaíideystayaasha ee tirsigiisu yahay 699/2003 (Racfaanka la xidhiidha cadaymo lagu dhagaystay fadhi xidhan) ---------- 93
16.Summadda Galka 164030 Qod.539(1)a) & 556(2)a) ee xeerka danbiyada (Kala soocida falka dilka iyo dhaawaca) ---------- 102
17.Summaddda Galka 189472 Qodobka 78iyo 79aad ee Dasdtuurka JDFI iyo qodobka 106 ee HXCI iyo bayaanka dib u habeynta habka xeerka madaniga 84/1968 (Codsiga Maxkamad Bedelka - Change of Venue) ---------- 118
18.Summadda Galka 160916 Qod. 9(4),13(1)(2) 20 ee dastuurka JDFI & Qod.14 ee ICCPR (Xuquuqda helida turjumaanka iyo qareenka) ----------130
19.Summadda Galka 161062: Qod.3325 ee XMI & Qod.244(2)R) ee HXMI (Ansax-nimada go'aanka odeyaasha) ---------- 137
20.Summadda Galka: 161736 Qod.91(1,2) ee HXMI (Dib u habeynta dacwada---------- 142
21.Summadda Galka: 165775 Qod.445 ee HXMI (Ansaxnimada xaraashka maxkamadu fuliso) ---------- 152
22.Summadda Galka: 166205 Qod. 6 ee HXMI (Dib u eegista Go'aanka) ---- 159

Summad Galka 181278

26 da Tikimti 2013 T.I

Garsoorayaasha 1 Atimut Asafa

2 Sahay Menkir

3 Nuradin Kadir

4 Melaku Kasaye

5 Istiibel Andualem

Codsade: Haftu Kiroos

Jawaab Celiye: Dawlada Hoose ee Magaala hoosadka Hawlte

Galkan Markii la soo baadhay ka bacdi waxaa laga soo saaray Go'aanka hoos ku xussan

XUKUN

Codsiga Asbaabtan Dibu Eegista Codsaduhu keensaday waxaa sabab u ah Codsadaha oo ku dacwooday: Dhulkii aan Miyiga ku lahaa waxaa ku soo fiday Magaalada. dhulka badalka la ii siiyaya wuu ka yaryahay intii sharcigu ii ogolaa. Markaan u dacwooday in la I siiyo dhulka int aiga maqan, Maxakamadu waxay go'aamisay Xaq u ma lihid in dhul kale lagu siiyo. Sidaas daraadeed, waxaan Maxakamada ka codsanayaa in sharciyada loo maray go'aankayga fiiriso dabadeedna go'aan ka gaadho.

Marka la eego geedi socodka Gal-dacwadeekan oo kooban Codsade Dacwada uu kaga dacwoonayo Jawaab Celiyaha uu keensaday Maxakamada Degmada hawltii ee

dawlad Deegaanka Tigrayga oo nuxurkeedu ahaa dhul kakooban 400 oo kaare mitir oo hada kahor si sharciya loosiiyay in Magaaladu ku soofiday kadibna lagu dhahay Dhulkan waxaa looraba horumarinta Aasaasiga ee Magaalada kadibna halkuu kafilayay in lasiiyo dhul badal u dhigma oo 400 kaare mitir ah, la siiyay uun dhul dhan 140 kaare mitir Dhulka sharcidarada loogala hadhay oo dhan 260 kaare mitir in la siiyo

Jawaab Celiyaha oo Is-hortaaga heerka koobad ku dooday oo ka Jawaabaya Codsaduhu Dhulkii badalka loosiiyay oo dhanaa 140 kaare mitir intuu qaatay ayuu Dhulkii kagaday nin ladhaho Kiroos Gebre Meskel wakhti xaadirkan wax cadeeyn ah oo Xafiiska u taala majirto sida daraadeed Xaq ka maqan oo uu nagu dacweeyaa majirto.

Maxakamadiiii loo dacwooday oo dhagaysatay Is-hortaaga iyo dooda labada dhinac fiirinaysay Codsadaha Dhulkii badalka loo siiyay inta uu cidkale kagaday dhaman wixii cadaymo Dhulkaa ku saabsanaana cidii ku wareejiyay inuu ku dacwoodo dhulbaa ii hadhay xaq uma laha. Sidaa daraadeed, sida uu dhigayo qodobka 33/2 ee H/X/M Galka waa la xidhay. Maxakamada Sare ee Codsaduhu Rafcaanka u keensaday Rafcaanka Codsadaha weyxidhay iyado cuskanaysa qodobka 337 ee H/X/M.

Fadhiga Dibu Eegista oo Galka Tirsigisu yahay 114270 dhagaystay, dooda Dibu Eegista labada dhinac dhagaystay Go’aanka uu Gaadhay 9 kii bisha Ginbood 2011 kii oo ahaa in Codsadaha oo dhul dhan 400 kaare mitir lahansha u haysta ay Dhulkas Magaaladu kusoofiday Jawaab Celiyuhuna arintaas diidmo ka muujinin, sido kale in horumarinta Aasaasiga in Dhulkaas looga qaatay badelna 2005 tii T.I. in dhul dhan 140 kaare mitir lasiiyay, wakhtiga dhul badalka lasiiyayna loo cuskaday Awaamiirta arintan kusaabsan ee soobaxday 2003 dii T.I, sida Awaamiirta ku cad cidkasta oo horumarinta Aasasiiga dhul uu lahaa looga qaato hadayna kabadneeyn xadiga u

sareeya ee Dhulka Magaalada ee labixiyo cida dhul lagala wareegay waa in Dhulkii dhul u dhigma lasiiya, maalintaas iyadoy ahaayd in Codsadaha lasiiyo 400 kaare mitir, lanasiiyay Codsadaha 140 kaare mitir Dhulkaasna uu kagaday qof kale, kadib markay kasoowareegtay 5 Sano Codsaduhu codsaday in lasiiyo Dhulkii u hadhay Dhulka mudadaas uu kamaqnaa taas oo muujinaysa in uu ku qancay intii lasiiyay, wakhti xaadirkan xuquuq uma laha inu codsado Dhulkaas waxaa na lagu raacay Go'aanada iyo Amarada Maxakamadaha Hoose.

Codsigan dib u eegistuna wuxuu ka soohorjeeda Go'aannadaas, Codsaduhu 15 kii Sane 2011 codsiga qoraalka uu keensaday uu kaga cabanayo in Go'aanada Maxakamada Hoose sharciga baal marsan yihiin ay oo uu rabo in aritaas la saxo. Codsaduhuu in uu lahaa dhul dhan 400 kaare mitir Dhulka dhul badalka loosiyayna yahay 140 kaare mitir taas oo uu Jawaab Celiyuhu diidmo ka muujinin, maadama uu Dhulkii lasiiyay qofkale ka iibshay dhul baa ii dhiman hala isiiyo madhihikaro. Qofku in uu hatidiisa iibin karo xaquuq Dastuuriya tahay, Dacwada aan keensaday waxay laxidhiidha Dhulkii 260 kaare mitir ee ii dhinaa balse in ladhaho dhulki aan kusiinay iyo cadaaymihiiba waad gaday ee cadaaymo Xafiiska kuuma yaalan in la dhaho maaha, cadaaymaha Dhulka aan ku wareejiyay Kiros Gebre Meskal waxaa kucad in Codsaduhu 400 kaare mitir leeyahay sida daraaded Maxakamadaha Hoose oo arimahaas oo dhan intay baalmartay Dacwadan burisay waa **Khalad Sharci oo Aasaasi ah** ee waa in la saxaa.

Codsigii Dibu Eegista oo dib loo eegay in Codsaduhu isago haysta dhul dhan 400 kaare mitir ay fiditaanka Magaaladu soogadhay, in taarikhtu markay ahaayd 2005 tii T.I. badalka Dhulka oo dhan 140 kaare miti lasiiyay diidmo laga keenin, in Awaamiirta soo baxday 2003 dii arintaan laxidhiidho, Maxakamada Dibu Eegista Deegaanka qaabka ay u qaabishay iyo in Awaamiirta sida kucad cadadka Dhulka badalka ee labixinayo Jawaab Celiyuhu Maxakamada Dibu Eegista Jawaabta uu

bixiyay oo tilmaamaysa in Codsadaha lasiiyay dhul badal 140 kaare mitir Dhulkaas uu kagaday qof kale in uu dhaho Dhulkalaa iidhiman xaq umalaa arinta dhahaysa ee Go'aanka laga gaadhay sharciyadeediisa lafiiriyo, Maxakamada dib u eegistu oo arintaas fiirinaysa waxay Amartay in labada dhinac doododa oo qoraal ah isweydaarsadaan.

Jawaab Celiye 21 kii Tahasaas 2012 kii T.I. Jawaab celinta ay keensatay oo tilmaamaysa in Codsaduhu Dhulka uu lahaa kahor inta ay Magaaladu gaarin uu ahaa 400 kaare mitir wakhti xaadirkaas dadka sida ku cad qodobka 5 aad firqadiisa 5.5 ee Awaamiirta soobaxday 2002 dii dadka Dhulka ay lahaayeen looga qaato horumarka Aasasiga lasiiyo 250 kaare mitir oo kaliya magdhaw kale malaha, balse qofka lasiiyo 140 kaare mitir magdhaw loogu daro markaa Codsadaha 140 kii kaare mitir iyo magdhawgiiba lasiiyay wax diidmo ah uu ka keensadayna majiriin sida lagu siiyay xujadii iyo blanki goobta kadiib 2006 dii T.I uu ka iibshay ninka ladhaho Kiroos Gebre Meskal maadama sharcigu reebay in goob kaliya lagu qaato laba xujadood waa in codsiga Codsadaha laburiyo ayuu ku dooday.

Codsadaha oo Jawaab ceelin ka bixiyay Jawaab celinti Jawaab Celiyaha 23 kii Dir, 2012 kii Awaamiirtii wakhtigaas jirtay waxay dhigaasay goobaha Miyiga ah ay Magaaladu gaadhay in lasiinayay 140 ilaa 500 oo kaare mitir. Qofka 400 kaare mitir haystay ee Magaaladu soogadhay in 400 kaare mitir lasiiyo sharcigu ma dhigayo. Awaamiirta liiska ee soobaxay 2002 dii waxay xeerinayaan qofka Magaalada ku haysta dhul balse kama hadlayaan qofka Dhulkii uu Miyiga ku lahaa Magaaladu soogaadha.y.

Codsadaha arintiisa waxaa xeerinaya Awaamiirta soobaxday 2003 dii Jawaab Celiyuhu Jawaabta uu ku sheegay in qofka 140 kaare mitir lasiiyo magdhaw loo raaciyo qofka 250 kaare mitir lasiiyana bilaa magdhaw ay sharciyad sal ku hayniin maadama sharcigu dhigayo qofka goobta lagala wareego goob lamida lasiiyo hadii

loobahdana magdhaw loogu daro magdhaw bixin la aanta doodii Maxakamadaha Hoose laguma sooqadin. Dhulkii lasiiyay qof kaluu ka gadayd. 140 kaare mitir baan gaday 260 ka iidhiman inaan codsado sharcigu iimadiidayo cabashooyinka inta la ii tixgaliyo hala ii xukumo ayuu ku dooday

Siday wax u dhaceen iyo doodii labada dhinac waa sida kor kucad Fadhiga oo ka duulaya dooda labada dhinac u dhaxaysay iyo shuruucda laxidhiidha ayaa baadhtaankoodu noqday sida hoos ku cad:

Dooda labada dhinac waxaa si cad looga fahmayaa Codsaduhu Dacwada uu keensaday oo ah in Dhulkii horumarinta Aasaasiga looga qaatay oo dhan 400 kaare mitir halkii laga siin lahaa 400 kaare mitir si sharciga baal marsan 260 kii kaare mitir laga dhimay, dooda labada dhinac waxaa laga fahmayaa in Awaamiirta xeerinaysa bixiinta dhul badalka ay labada dhinac ku kala gadisanyihiin Fadhiga Dibu Eegista Deegaanku Awaamiirta arintan la xidhiidha waxay ku sheegtay Awaamiirta soobaxday 2003 dii T.I taas oo ay ku sheegtay sida Awaamiirta ku cad hadii xadka u sareeya ee lahaanshaha Dhulka Magaalada ka hoosayso in qofka dhul lagala wareegay inta lagala wareegay in u dhiganta badal loosiiyo, ma jiirto, cabasho cad oo Jawaab Celiyuhu dhahay Fadhiga dib u eegistu sharciga ay xusheen iyo turjumida sharciga isagoo raacaya habka uu kaga cabanayo amaa dood arintaas ku saabsani majirto. Iyadoo ay taasi jirto inuu Jawaab Celiyuhu dhahay arintayda waxaa ii ogol Awaamiirta kale maadama ay habka waafaqsanayn fadhigu kama ogolaan.

Dibu Eegista Deegaanku dooda u dhaxaaysay labada dhinac oo salka ku haysa Awaamiirta soobaxday 2003 Go'aanka Maxakamada Hoose waxay ku raacday iyadooy Awaamirtu Codsadaha u ogooshahay 400 ee kaare mitir ee hawlaha Aasaasiga looga qaatay badelkeda in lasiiyo uu aayar markii lasiiyay 140 kaare mitir qaatay markay ka soo wareegtay 5 Sano in aad ku dacwooto dhulbaa iidhiman xaq uma lihid.

Hadaba sida ku cad Qodobada 78 iyo 79 ee Dastuurka Fadaraalka awooda garsoore ee lasiiyay Maxakamadaha adeega garsoor ay bixinayaan waa inuu noqdaa mid sharciga salka ku haya, adeeg Maxakamadiieed oo sharci salka ku haya waxay tahay adeegyada Go'aan ee Maxakamaduhu bixiyaan gaar ahaan Go'aanada Xuquuqaha lagu waayi karo waa inay sharcii cad salka ku haysoo Go'aanka sharcigii lagu saleeyay iyadoon si cad loo sheegin Go'aan duuduub lagu gaadho oo xuquuq lagu waayi karo maadaama uu sharci kusalaysnayn lama qaadan karo.

Dhinaca kale Maxakamada Degmada ee Dacwada Codsadaha u burisay asbaab Dacwadeed maleh awgeed, waxaa loo baahan yahay inaan wax yar kadhahno. Sideedaba sida ku cad Qodobka 231/1/b ee H/X/M Dacwada Aan asbaab cad wadan in laburin karo uu kahadlayo hadana Dacwada Maxakamad la keensado in Dacwadaasi ay asbaabti Dacwadu buuxiso laga rabay madhantahay mise waxbaa kadhiman in lafiiriyo cidii cabanaysay haday buuxiso Asbaata garsoorki ay Maxakamada karabtay ay xaqa ulahaayd inay hesho si taxadar leh u baadho, iyo Dacwadu asbaabti inay dhanaato laga rabay oo dhamaystiran Jawaabta Codsaduhu inuu helo ay tahay oo ogolaanshaha Dacwada ku saabsan, Galka Dibu Eegista tirsigisu yahay 45247 ku qasbanaanta turjumka sharci in codsiga Codsadaha lala fiiriyaa haboon.

Xaaladan awgeed Codsaduhu codsiiga uu keensaday wuxuu ahaa in 260 kii kaare mitir ee sida sharci darada ahaayd looga reebay in bedelkeedi lasiiyo. Xaqiiqdii, arintan Codsaduhu Garsoorka codsaday sharci si cad ugu diidayaa majiiro. haday arintu taas noqoto Codsaduhu arintan uu codsaday in marka dooda lagu dagalo cadaymaha la keensado lagu kala saaro mooye majirto sharciyad tilmaamaysa in bilawga Dacwada Dacwadaadani asbaab sharci malaha inta ladhaho Dacwada Codsadaha lagu buriyo. Sidaas daraadeed Maxakamada Degmada oo dhahday Dacwada Codsaduhu asbaab Dacwadeed malaha iyo Maxakamada Deegaanka ee

Dibu Eegista oo intay asbaabo ku kordhisay ansixisay Go'aanki Maxakamada Degmada waxaa kajira **fahan daro iyo fulin qaldan oo asaasi ah** oo sharciga baalmarsan oo u baahan in lasaxo. Waxaana laga soosaray Go'aankahoos kucad.

GO'AAN

1. Iyadoo la cuskanyo Qodobka 348/1 ee X/H/M, waxaa la buriyay Go'aanka iyo Amarada kala ah:

- Go'aanka uu ka gaadhay Fadhiga Dibu Eegista Maxakamada Guud ee Dawlada Deegaanka Tigrayga Galka Tirsigiisu yahay 114270, 9 kii Giboot 2011 kii T.I;
- Amarka ay ka bixisay Maxakamada Sare ee Magaalada Maqale 5 tii Yakaatit 2011 kii T.I, Galka Tirsigiisu yahay 26177 iyo;
- Amarka ay ka bixisay Maxakamada Magaalo Hoosadka Hawltii, 5 tii Tahasaas 2011 kii T.I, Galka Tirsigiisu yahay 26177.

2. Maxakamada Magaalo Hoosadka Hawltii Galkii ay xidhay in dib loodhgaysto oo labda dhinac iyo caddaymo haday jiraan ladhagaysto xukunka ay rabto go aamiso sida uu dhigayo qodobka 341/1 aad ee X/H/M arinta loo ceesho

AMAR

1 Fadhigan Dibu Eegista doodi labada dhinac wixii kharash ah labada dhinac midba dhiniciisa ha baxsho

2 Galka waa laxidhay Xasuus Dhawrka halagu cesho

Waxaa ku yaal Saxeexa shan garsoore oo qarsoon.

Summad Galka 175719

21 kii Tikimti 2013 T.I

Garsooreyaasha: 1. Tafari Gabru (Dr)

2. Qanaca Qitat

3. Faysa Warku

4. Dejene Ayansa

5. Birkinesh Esubalaw

Codsade: Radi Axmed

Jawaab Celiye: Ma Soo Xaadirin

Baadhis ka bacdi Galkan waxaan ka soo saarnay Go'aankan hoos ku xussan

XUKUN

Doodan oo u dhexeeysay labada dhinac oo ahaa Odey iyo Haweenay waxaay ka bilaabantay Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka. Waxay doodu ka dhexaaysay Codsadaha hada oo ahaa Dacwoode iyo Jawaab Celiyaha oo aha Dacwaysane. Sababta keentay in Dacwadu timaado Fadhiga waxay ahayd in Codsadaha oo Go'aanka Galka Tirsigiisu yahay 223910 ee 10/8/2011 T.I ay gaadhay Maxakamada Sare ee Fadaraalka maadaama khalad sharci oo aasaasi ah kajiro in la saxo.

Codsadahu Maxakamadiii Hoose Dacwadi uu geystay Codsadaha iyo Jawaab Celiyaha lamaanaha guurkii u dhexeeyay waxaa kala furtay Maxakamada heerka

Hoose ee Shariicada ee Fadaraalka sida daraadeed Codsadaha iyo Jawaab Celiyuhu hanti maguurto ah Guriga Tirsigiisu yahay 632 sul 2.1 oo ku yaal Magaalada suluulta gaar ahaan goobta ladhaho dire gadaasheda oo ku diiwan gashan magaca Jawaab Celiyaha oo hanti naga dhaxaysa ah in nalooqaybiyo Maxakamada ka codsanayaa

Jawaab Celiyuhu oo Dacwadan ka Jawaabaya Gurigan waa guri Codsadaha iyo Jawaab Celiyuhu markii la kala furay kadib ay Jawaab Celiyuhu lacag uu amaahday ku dhistay sidaas awgeed hanti lawada leeyahay ma aha balse waa hanti aan gaar u leehay ku dooday.

Maxakamadiiii heerka Hoose oo dhagaysatay dooda labada dhinac markhatiyadii iyo baaritaanki cadaymaha Go'aankaay gaadhay oo ahaa in Jawaab Celiyuhu hantidan uu samaystay kadib markay isfuraan Codsadaha mana aha hanti lawada leeyahay ee waxaa iskaleh Jawaab Celiyaha balse lacagta Jawaab Celiyuhu daynsaday Codsadaha ma khusayso Go aamisay. Codsadaha oo ku qancii waayay Go'aankaas ayaa Rafcaan u qaatay Maxakamada Sare ee Fadaraalka, Maxakamada Sare oo dhagaysatay dooda labada dhinac ayaa ku raacday Go'aankii Maxakamada Hoose gaadhay' codsiga dib u eegistuna sidaas buu ku yimid Maxakamada Dibu Eegista.

Codsadaha oo codsiga Dibu Eegista keensaday 15/8/2011 kii T.I codsi ah in guurkii u dhexeeyay Codsadaha iyo Jawaab Celiyaha ay Maxakamada Shariicada ee heerka Hoose Fadaraalku kalafurtay taariikhdu markay ahayd 8/5/2006 dii T.I. Aritan Guriga ee sababta u ah doodana ay tahay mid aan iibsanay intaan furitaanku dhicin hantidii aan wada lahayn tahay inay sidaas tahayn markhatiyadii keensaday Maxakamadaha Hoose u go aaamiyeen Jawaab Celiyaha iyago dhahaya waxaa iskaleh Jawaab Celiyaha mana aha hanti lawada leeyahay Go'aankaasna waxaa kajira qalad sharci oo Aasaasi ah in laburiyo go aaankaas, hantida qaybtii aan lahaa la ii go aamiyo.

Fadhiga dib u eegita oo amray in uu dhinicii kale kasoo Jawaabay 8 Hamle 2011 kii qoraal Jawaab celin ah markhatiyadii dadka iyo cadaymihii kale Maxakamada Hoose dhagaysatay la baadhay Guriga doodu kataagantahayna ay tahay hanti uu Jawaab Celiyuhu gaar u leeyahay maadaama ay jirin wax qaldaad sharci ah oo Aasaasi ah in Go'aankii Maxakamada Hoose la ii ansixiyo ku dooday. Codsadaha oo xoojinaya codsigiisi oo Jawaabtii Jawaab Celiyaha dib uga Jawaabay.

Iyadoo dooda labada dhinac sida kor ku xusan tahay Fadhigan Dibu Eegista oo fiirinaya dooda labada dhinac Go'aamada Maxakamadaha Hoose iyo la fiirinta shuruucda laxidhiidha baaritaanka hoos ku cad samaysay, arimaha mihiimka ah ee in Jawaab aan u helo ay tahay. Iyadooy guurkii u dhexeeyay labada dhinac ay kala furtay Maxakamada Shariicada heerka Hoose Fadaraalku arinta khilaafka dhalisay ee qaybsiga hantida in Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka lagaysto awood garsoor ma u leedahay?

Sida kamuuqata Codsiga Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka Dacwad qoraalka u keensaday dooda labada dhinac iyo go aamada ay gaaren Maxakamada Hoose Galka Tirsigiisu yahay 209/06 in Maxakamada heerka Hoose Shariicada tariikhdu markay ahayd 8/5/206 lamaanaha kalafurtay kadibna Codsaduhu arintan dhalisay hanti qaybsiga gaystay Maxakamada heerka Hoose fadaralka iyaduna doodsiisay labadii dhinac Go'aana kagaadhay Maxakamada Saree e Fadaraalkuna Rafcaankii loola yimid ku raacday Go'aankii Maxakamada Hoose waxay ku cadahay Go'aanka Maxakamadaha Hoose ay gaareen.

Hadaba sida lawada ogsoonyahay sida kucad qodobka 34/5 Dastuurka Fadaraalka Itoobiya sharciga laxidhiidh shaqsiga iyo qooyska rabitaanka shaqsiyaadka in la isku xukumo diinta amaa dhaqanka faah faahint sharci ba laga soosari buu dhahay, sidoo kale qodobka 78/5 ee Dastuurka Fadaraalka u qeexayaa in la dhisan karo lana aqoonsanayo Maxakamado Diiniya iyo dhaqan arintaas iyadoo laga duulayo

Bayaanka Tisigiisu yahay 188/1992 ee lagu Aasaasay Maxakamadaha Shariicada Islaamka ayaa lagu shaqeeya, Bayaankan qodobkiisa 4 aad firqadiisa 1 aad Maxakamadaha shareecadu awooda garsoore ay lahaanayaan iyo ariimaha lagu qeexay firqadan ee awooda garsoor loosiyay Maxakamada Shariicada, waxaa kalo jirta in labada dhinac ee lamaanuhu si cad u ogolaadan in arintooda Maxakamada shareecadu u eegto.

Arintaas iyada ah sida ku cad qodobkan 4/1/b dhamaan arimaha laxidhiidha guurka, furiitaanka, biilka, haynta caruurta Aanan qaan gaarin, iyo qaraabada isku dhaca kayimaada ayeey fiirisaa, labada dhinac ogolaashaha amaa diiidmada in ariintooda lagu eego Maxakamada Shariicada waxaa kahadlaya qodobka 5 aad ee Bayaanka, labada dhinac midkood haduu cabashadiisa gaysto Maxakamada Shariicada waxaa halkaas kamuuqata in uu raali kayahay in Maxakamadu arintaas eegto.

Maxakamada Shariicada ee Dacwada lakeensaday sida uu dhigayo qodobka 5/1 ee Bayaanka lifaaqisa ku cad in ay dhinaca kale u yeedhaa oo inu ogolyahay iyo inuu diidanyahay xaqiijisaa, marka dhinacaasi muujiyo ogolaanshaha in Maxakamadu arinkooda eegto Maxakamada shareecadu labada dhinac ariintooda inay eegto awood bay u leedahay. Balse sida ku cad qodobka 5/3 ee Bayaanka haday labada dhinac si cad ugu heshiin waayan in arintooda ay Maxakamada shareecadu eegto waxay aadayaan Maxakamada Fadaraalka ee awooda u leh in ay ariintaas eegto. Sida ku cad qodobkan 5/4 labada dhinac markay ogolaadan in arintooda lagu eego Maxakamada shareecada amaa Maxakamadaha kale hadana inay dhahaan Maxakamadii kale Ayaan la aadayna Dacwada way reebantahay.

Waxaa halkaas ka kucad in haday labada dhinac ku heshiiyaan in Maxakamada ay ku heshiiyaeen in ariintooda eegto uun Dacwadooda ku dhamaystaan taas oo ah haday

arintu kabilaabantay Maxakamada Shariicada taas uun ku dhamaystaan haday Maxakamadaha kale kabilaabantana taas uun ku dhamaystaan. Aritaan labada dhinac iyagoo ogolaanshahooga muujiyay waxaay kabilaabantay Maxakamada shareecada waxayna ahaayd inay ku dhmaato Maxakamadaas shareecada uun balse waxaa lala aaday Maxakamadiii heerka Hoose Fadaraalka, iyadoo awooda garsoore ee labada dhinac ee Dacwadan ay ledahay Maxakamada shareecada.

Markaan u soonoqono arintan Codsaduhu guurkii kala dhexeeyay Jawaab Celiyaha Maxakamada heerka Hoose ee shariicadu intay dooda labada dhinac dhagaysatay go aamisay inay kalafurto lamaanahas sida ka muuqata Go'aankaMaxakamada Shariicada iyo Go'aanda Maxakamadaha Hoose. Labada dhinac iyado Shariicada diinta islaamka lagu salaynayo oo ogolaanshaha lamaanaha in Maxakamada shareecada horteeda Maxakamadu doodooda dhagaysatay kadibna go aamisay inay kala furto.

Hadaba ariinta kadhalatay kala furkaa lamaanaha oo ah arintan hanti qaaybsig waxaa awood u leh in ay eegto Maxakamadaa shareecada, dhinac amaa labada dhinacba Go'aanka Maxakamada heerka Hoose shareecadu gaadhay in lala aado Maxakamadii kale maaha, Go'aanka Galka tirsiigiisu yahay 209/06 ay gaadhay 8/5/206 dii ay labada dhinac ku kala furtay Maxakamada heerka Hoose ee shareecadu arinta kadhalatay oo ah qaybsiiga hantiida waxay ahayd in lagu dhamaysto isla Maxakamadaa shareecada, arinta lala aaday Maxakamadii aan awood u lahaayn waa waxba kama jiraan.

Fadhiga Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka oo kaduulaya Qodobka 9/2 ee X/H/M iyo Qodobka 5/4 ee Bayaanka Shariicada ee Tirsigiisu yahay 188/1992 iyo Qodobka 244/2/b iyo 245/2 ee X/H/M sidaay dhigayaan, in ay Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalku dhahdo ariinta Maxakamada heerka Hoose ee shariicadu Go'aan

kafuritaanka kagaadhay arinta hanti qaybsiiga awood sharcii umalihii intay dhahdo burin lahaayd, ayay ariinta hanti qaybsiga labada dhinac dhagaysatay Go'aan ay gaadhay Maxakamada Sare ee Deegaankuna halkay wax kasixii lahayd Go'aanka Maxakamada Hoose ansixiisay Go'aanka ay gaadhay maadama aanu sharci ku salaysnaayn waa la buriyay.

Maxakamadaha Fadaraalka ee go'aanka Maxakamada Fadaraalka ee Shariicada ay gaadhay ee ku saabsana Go'aanka furniinka arinta kadhalatay furniinka ee laxidhiidh hanti qaybsiiga ee Maxakamada Fadaraalku iyadoon awood sharci u lahaayn dhagaysatay labada dhinac Go'aankaay gaadhay waxaa lagalay **khalad Aasaasi oo sharcii** sida daraadeed waxaan go aaminay sidan soo socota:

GO'AAN

1. Anagoo cuskanayna Qodobka 348/1 ee X/H/M waxaan buurinay Go'aanka ay Galka Tirsigiisu yahay 116454 ay 16/2/2011 ka gaadhay Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalku iyo Go'aanka Galka Tirsigiisu yahay 223910 ay 10/8/2011 maadama khalad sharcii lagu fuliyay.
2. Doodi u dhaxaysay labada dhinac ee Maxakamada heerka Hoose ee shareecada Go'aan ka furniinka kasoosartay ariinta hanti qaybsiga oo salka ku haysay furniinka ariintaas in eegto oo ay Go'aan ka gaadho waxaa awood sharci u leh Maxakamada heerka Hoose ee Shariicada balse Maxakamadaha Fadaraalku inay arinta hanti qaybsiga ee salka ku haysay furniinka inay dhax gasho waxaan dhahnay awood uma laha.
3. Go'aankaha loo diro Maxakamadaha Hoose
4. labada dhinac wexii kharash ah midba dhiniciisa haqabo

5. Fadhigani wuxuu Amray qaadida xayiraadi laxayiiray 7/9/2011 ha looqoro Xafiiska houmarinta Dhulka ee Magaalada Sululta
6. Galka tisigiisu yahay 123631 Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka qaybta Araada haloo cesho sido kale Galka Tirsigiisu yahay 209/06 Maxakamada heerka Hoose ee shareecada haloo cesho.
7. Go'aankan waxaa la akhriyay 23/2/2013

Galkan waa la xidhay waxaa ku yaala saxeexa shan garsoore oo an la akhrin karin

Summad Galka: 183001

Taar: 22 kii Tahasaas 2013

Garsoorayaasha: 1 Masa Ashanafii

2 Atimuut Asafa

3 Sahay Mankir

4 Nuuradin Kadir

5 Malaaku Kasaye

Codsade: Nagaa Haylu

Jawaab Celiye: Hana Haylu

Kadib markii Galka la baaray waxaa laga soo saray Go'aankan

XUKUN

Waa Dacwad la xidhiidha gurii oo Jawaab Celiyaha hada uu kaga cabanayo Codsadaha oo la keensaday Maxakamada heerka Hoose ee Magaalada Hawaasa. Jawaab Celiyuhu codsiga uu keensaday nuxurkeedu waa jago iyo xadkeeda Dacwada wuxuu ku faah faahiyay hantiida saran jago 287.88 kaare mitir ah heshiis lagalay 9 kii tiir 2002 dii t.i oo ay ku kala iibsadeen magaca Codsadaha hada oo walaalkii ah lacag dhan 35000 (sodon iyo shank un oo birr) Codsaduhu in uu guruga u sii maamuulo ugu dhiibtay kadibna dalka dibadiisa u baxay, inta dalka dibadiisa joogay u macagaca Codsadaha lacago ku soodiray lscagihiina Guriga lagu dhisay,markii aan ku soolabtay dalka in Codsaduhu inu ka sheegay inaan guriiga leeyahay cadaynihii gurig dhamaantood igu soowareejiyay markhatigi joogo, markaan ka codsaday daadkan kiirada ugu jira Guriga iiga saar oo igu soowareeji dhahay iga diiday, in Maxakamadu ii amarto in uu Guriga igu wareejiyo ka codsanayaa

Codsaduhu Dacwadan Jawaabta uu ka bixiiyay oo ah in uu guuriga isagu iibsaday balse Jawaab Celiyaha uu nan u iibiniin, heshiiskii iibkana Jawaab Celiyuhu saxeexaha markhaatiga 4 aad ka ahaa wax Xuquuqana Guriga ku lahaayn lacag aan dibada ka soodiray baa lagu dhisaydu been tahay, guriiga dhismihiisa waxaa igaga baxday lacag dhan 200000 (laba boqol oo kun) Jawaab Celiyuhu lacag intaas dhan inuu soodiro ma awoodin, lacagta uu soodirayna waxay ahaayd 320 (sade boqol iyo labaatan) lacagta dalka kuwaid ah oo wakhtigaas lagu sarifayay 1000 (kun birr) cadaymaha aan ku wareejiyay Jawaab Celiyaha waxay ahayd in qaantii lagu lahaa uu bixiyo qaan u haysasho uun ban ugu wareejay ee lahanshaha Guriga lama xidhiidho, lahaanshaha Gurigana markhaatiyo lagu ma cadeeyo ee dukumaanti sharciyaa lala yimaada, sida daraaded Codsaduhu in uu Guriga leeyahay wax dukumanti ah oo sharci lmuun imaani ee Dacwadiisa halaburiyo ayuu ku dooday.

Maxakamadiiii Dacwada la keensaday oo dooda labada dhinac iyo markhaatigii dhagaysatay oo soo kormeertay goobtii waxay xukuntay Jawaab Celiyaha hada markhaatiyada uu keensaday guriiga lagu dacwoonayo waxaa iskaleh Jawaab Celiyaha Codsadaha hada Codsaduhu inuu Guriga ilaaliye uun ka ahaa balse isagu lahaayn bay markhti fureen sida daraadeed Codsaduhu Guriga waa inu Jawaab Celiyaha faraha uga qaado, Go'aankaas waxaa isku raacay ilaa Fadhiga dib u eeegista ee Deegaanka.

Codsigan Dibu Eegista Go'aankaas baa laga soo qaatay, Codsaduhu 24 tii nahase 2011 kii T.i codsiga Dibu Eegista oo lagaga cabanayo go aamada ay Maxakamadaha Hoose gaaren khaladaadka Aasaasiga ee sharci in Fadhigani saxo lagu codsaday, ariimaha Aasaasiga ee Dacwaduna Guriga la isku haysto marka lakala iibsanayo Jawaab Celiyuhu inta uu goobta tagay heshiiskaas markhaatiga 4 aad ka ahaa ku saxeexna iyo dukumantiyada cadaynayay lahaanshaha sharci ee Guriga cida leh in tay dhinac u dhigeen oo markhatiga sidii larabay u dhagaysan Maxakamadaha Hoose goaanka ay gaadhen waa mid sharciga baal marsan,

Codsaduhu wuxuu ku dooday khaladaadka sharci ee ku jira kiiska waxaa ka mida: qofkii Guriga iibiyay oo markhaati ka noqday Guri iibsigiisa iyo lacag bixiintaba; qofkii Guriga iibiyay oo aan codsade ka ahayn dacwada sidoo kalena sheegay in uu dhukumenti iyo markhaatiba ku cadeeyay in aan Guriga loo haysan lahaansho shrarci. In ay Maxakamadaha Hoose arimahan sare ku xusan oo dhan dhinac iskaga dhigto oo ay Go'aan gaadhaa waa khalad.

Codasadaha oo doodiisa sii wataa wuxuu yidhi: Waxyaabaha muujinaya in aanu Jawaabceliyuhu wax xuquuq ah ku lahayn guriga waxaa ka mida; guriga waxaa ladhiisay Jawaab celiyaaha oo dalka diibada uga maqaan, lacagta Codsaduhuu soodiray waxaay dhanayd 320 (sadex boqol iyo labaata) lacagta Kuwait ah, in uu intaas lacag ka badan soodiray wax cadayn ah oo tilmaamaysa ma keensan. Sidaas daraadeed in ay Maxakamadaha Hoose iska indho tirto arimahan oo dhan oo in aan Guriga Jawaab Celiyaha ku wareejiyo go aamisaa waa **khalad sharcii oo Aasaasi** ah ee waa in lasaxo ayuu ku dooday.

Baaritaanki codsiga Codsadeyaasha ee Dibu Eegista lahaanshaha guriiga Dacwada laga keensaday, cadaynta lahaanshaha guriiga waxaa ku qoran Codsadaha, Maxakamadaha Hoose waxaay go aamiy iyago raacaya tirsiiga 1195 ee X/M in Maxakamadaha Hoose fiiriyeen iyo in kale in Fadhigani baaro, la amray in Jawaab Celiyuhuu in uu kaJawaabo fursad loo siiyay,

Sidaas daraaded Jawaab Celiyuhuu 26 dii yakatiit 2012 kii oo u qoraal ku soo Jawaabay, Jawaabtaas oo nuxurkeedu ahaa, guriiga marka la iibsanayay Codsaduhu lacag muunan haysaan Jawaab Celiye oo dhahay guriiga waxaan ku gatay markaan xaaskayga kala tagnay hantidii aan wada lahaayn ee naloo qaybiyay lacag 50000 (konton kun oo birr) oo igasoogaadhay ku iibsaday guriiga markaan iibsanayay wuxuu

ku yaalay dhul miyii ah wax wakiilasho ladhaho lamasiin karo, maadaama Codsaduhu ahaa walaalkay in uu magaciisa ku iibsado u ogolaaday kadibna dibadaan aaday, intaan dibada joogayna intaan magaca Codsadaha lacag ku soodiro ayaa Guriga la iidhisay, 6(lix) sano kadibna dalkaan ku soo noqday, cadaaymaha Guriga iyadooy odayaal goob jooge ka yihiin ayuu igu wareejiyay isdiidmada yadu waxaay bilaabantay uun markaan dhahay guriiga inaan dagaan rabaa ee qolyahan guriiga kirada ugu jiira ii gasaar maada in kastooy cosdaha ku qornaasha uu Guriga ku qornaa isku maleeyay hantiile hantiile waxaan ku buriyaay cadaymihii aan keensaday, Maxakamada Hoose Go'aankooda waxay ku saleeyeen markhaatiyaashi aan keensaday iyo goobtii oo ay soo arkeen, wax Go'aankaas looga horyimaado Meesha mayaalo, Codsadaha codsiga dib u eegistuuna oo doodiisa adkeesanaya ayaa ka soo Jawaabay Jawaabtii lakeensaday codsadayna in Go'aank Maxakamadaha Hoose laburiyo.

Geedisacodka Dacwadan iyo doodo labada dhinac dhexmartay oo faahfaahsan waa siida kor lagu xusay, Fadhigan oo baadhitaan ku sameeyay doodad dhex martay labada dhinac, nuxuurka Dacwada iyo shuruucda la xidhiidha. Baadhitaanka oo lagu ogaaday in arita labada dhina dooda dheer dhex marto dhalisay tahay guriiga oo hantiidan maguuranka ah la iskuhaaysto, hantidaan hantiilaha cadaaymaha waraaqaha lahaanshaha in uu Codsadaha hada lasiiyay labada dhinac iskuma dafiirsana, sida ku cad qodobka 1195/1 ee X/M ciida maamuulku hanttiida maguuraanka ah gacanta kuhaya ee maamuulku waraaqaha cadaaymaha ee hantilanimada la siiyo waa hantiile, balse waraaqaha cadaaymaha nuucaasa waa la burin karaa, siida ku cad qodoobka 1196 ee X/M hadii waraaqdaas cadaaynta hantiile nimada si sharciida ka baxas loola soobaxay amaa ciid aan awood sharci u haaysan in ay sharciiga bixiiso laga qaatay amaa waraaqo been abuura amaa dacwooduhu ishotaag ku sameeyn Karin amaa hantiida cadaaymaha loosiyay ay tahay mid marka waraaqda cadaynta la qaatatay

dabadeed lahelay tahay lacadeeyo. Sida uu dhigayo qodobka 1195/1 ee X/M in waraaqaha cadaaymaha hantiila nimada oo laqaato kaliya waxaa lagu buriin karaa in lacadeeyo oo kaliya in waraaqaha cadaaymaha lagu qaatay siifa sharciiga ka baxsan.

Arinta Jawaab Celiyuhu in Codsaduhu hantidan Dacwadu kasocoto in Codsaduhu waraaqada cadaynta haaysto madafiirsano, sidookale doodayda dib u eegistu waxaan ku dooday waraaqaha cadaymaha ee hantiiluhu inay gacata ugu jirto cadasadaha ma diidin balse, sida uu dhigayo qodoobka 1195 ee X/M ku buriyay lahaanshihii uu sheeganay, cadaay maha lahaanshaha ay bixiyaan hay adaha maamuulku inay ku saleeyay lahaanshaha dhabta ee shaqsiiga, markhaatiyada noocaas loobixiiyo maaha in lagu buuriyo oo kaliya inaad hantiida leedahay balse waa in lagu buriiyaa waraaqaha cadaaymaha lahaansha cantiga sifada lagu heelay in ay taahay mid sharciiga baal marsan inay tahay la cadeeyo, sida daraadeed Jawaab Celiyuhu markhaatiyan uu keensaday inay lahaanshihiisa Guriga inay u markhaati furaan u keensaday mooye waraaqadaha cadeeymaha ee codasadaha lasiiyay inay yihii kuwa ka hor imaanaya qodoobka 1196 ee X/M kama doodin isla markaasna muun cadaayn maadama Jawaab Celiyuhu dhihiin waraaqadi cadaaynta lahaanshan buuriyay markhaatiyadii cadsadaha wax burinaya uu keensaday ma muuqato

Ariinto sidaas ah Maxakamadaha heerarka kaladuwan ee Deegaanka waraaqaha cadaaymaha lahaanshaha hantiida ee sida sharciiga waafaqsan loo qaatay iyo kuwa siida shrciigu dhiigayo looburiinin iyagoon fiirin Codsaduhu in uu guriiga ka baxo xukumay waa kalad Aasaasi oo sharcii oo sharciiga baal maray. Waxaa la go aamiyay

GO'AAN

1. Fadhiga Dibu Eegista ee Maxakamada Guud ee Shucuubta iyo Dadka Koonfurta Itoobiya oo cuskanaya Qodobka 348 (1) ee X/H/M wuxuu buriyay:

i. Galka lambarkiisu yahay 75008, Amarka ay bixisay 30 kii giinbot 2011 G/l/ 26077 amarka 18 magabiit 2011 ay bixisay Maxakamada Sare ee Magaalada Hawaasa iyo;

ii. G/l 03140 Go'aanka 28 dii tahasaas 2011 kii Maxakamada heerka Hoose Magaalada Hawaasa waxaa lagu buriiyay qodobka 348/1 ee X/H/M

2. Hantiida lagu dacwooday Codsaduhu waraaqada cadaaynta ee lahaanshaha hantiile nimadada maadaama lagu buriniin sida uu dhigayo qodobka 1196 ee X/M Codsaduhu hantiida uu u haaysto waraaqada cadaaynta hantiila nimada isagaa lahaanshaheeda leh

AMAR

1. Doodan dib u eegita labada dhinac wixii kharash ah midba dhiniciisa habaxsho.

2. Galka waa laxidhay hala cesho

Waxaa ku yaal Go'aankan Saxeexa Shan Garsoore oo aan La Akhriin

Summad Galka: 48699

Taar: 21 Miyaasiya, 2002

Garsooreyaasha: 1. Hirut Melas

2. Taafase Yirga

3. Cadurahim Axmed

4. Almaw Waase

5. Cali Maxamed

Codsade: Amsaale Jemari (Ma Soo Xaadirin)

Jawaab Celiyee: Firdu Gabayahu

Galkan markii la soo baadhay kadib waxaa laga soosaaray Go'aanka hoos ku xussan

XUKUN

Codsiga qoraalku Fadhiga dib ueegista waxuu ku yinid gal/lamb/ 43302 ee Fadhiga Rafcaanka ee Maxakamada Guud ee Fadaraalku Go'aankaay gaadhay 28 dii nahaase 2001 kii T.I maadaama khalad sharcii oo Aasaai kajiro in la ii saxo

Dooda markii u horaaysay waxaa eegtay Maxakamada heerka Hoose Fadaraalka Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka oo Codsadaha iyo Jawaab Celiyaha 23 dii tiir 1998 dii doodsiisay oo Go'aan kasoo saartay, dhinicii Go'aankaku qanci waayay ayaa Rafcaan u qaatay Maxakamada Sare ee Fadaraalka Maxakamadiiii Sare ee Rafcaanka looqaatayna waxay amar ku bixisay in Askaale walda amanuel oo marka hore aan Dacwada ku jiirin dhaxleyaasheeda si ay dooda dhinac uga noqdaan Go'aana kasoo saarto Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka ku amartay sida ka muuqata amarada ay bixiiyeen Maxakamadaha Hoose.

Maxakamadii heerka Hoose oo kaduulaysa Amarkii Maxakamada Sare ayaa yeedhitaan lagu daabacay jaraa idka ugu yeedhay dhaxlayaashii Askaale Gebra Amanuel balse way imaan waayen iyagoo maqan bay Dacwada dhagaysatay, Go'aanki Maxakamada heerka Hoose hada kaho gaadhay 23 dii tiir 1998 in dhaxlayaashan askale gabre amanuel gadaal kaga soobiiray in qayb ka yiniin kadhigtay Go'aankii waxba iskamabadalin go aamisay 23 dii Magaabit ee 2000 T.I.

Codsadihii oo kuqancin Go'aankan ayaa Rafcaan u qaatay Maxakamada Sare Codsadaha oo gurigii ku yaala Degmada 20 aad Xaafada 40 aad Guriga lanbarkiisu yahay 320 cadaynta lahaanshaha xujada oo magiciisa ku qoran oo shaabadaysan isagoo sheegay incodsduhu wadan dibada tagay maamulka ilaalinta shacabka 1970 lawareegay wakaalada birafaydka Itoobiya oo arinta lalasocosiyayna ay dhahday waa arin laba dhinac u dhexaysa sharcigu ima ogola inaan dhexgalo madhexgalo arintan Guriga Codsadaha leh, Jawaab Celiye Guriga iyo jagadaba rafcaanla halagu wareejiyo go aamisay.

Jawaab Celiyaha oo ku qanciin Go'aankaayaa Rafcaan u qaatay Fadhiga Rafcaanka Madaniga ee Maxakamada Guud ee Fadaraalka Fadhiga Dibu Eegista oo dooda labada dhinac dhagaysatay Rafcaanle oo Jawaab Celiyaha hada ah su aasha gurigu siduu kugu soogalay dhahaaysa iyadoy Meesha taalo Codsadaha hada Jawaab Celiyuhu Dacwada dhahaysa Guriga ha iguu wareejiyo horta waa in uu layimaado cadaaymo ay kamid yihiin aqoonsiga lahaanshaha Guriga la yimaado codsaduuhu in uu Jawaab celiiyaha wax ku sheegto waxaa ka horaaysa in hantiida uu sheeganayo xuquuq iyo faa iido ku leeyahay muun cadaayn sida qodobka 33/2 ee X/M ku cad iyadoo kaduulaysa Go'aanki Maxakamada Sare waay buriisay. Codsaduuhu codsiga uu keensaday Fadhiga Dibu Eegista goaanki uu gaadhay Fadhiga Rafcaanka Madaniga ee Maxakamada Guud ee Fadaraalku waxaa ka jirta khalad sharcii oo

Aasaasi ah. Rafcaanka hore ariinta fadhigu ku eegin iyo Maxakamada Sare Galka Tirsigiisu yahay 46056 Go'aankaay gaadhay 15 kii ginbood 1998 dii waa la buriiyay, Jawaab Celiyaha oo kacabanaya goa aank Galka Tirsigiisu yahay 46056 Maxakamada Sare ka gaadhay Rafcaan kama qaadan, iyado laga duulayo Rafcaanka hada in lagu buriiyo Go'aankii hada kahor la Gaadhay waa khalad sharcii oo ka hor imaanaya X/H/M.

Maxakamada Sare Maxakamada Sare Galka tir/yahay 46056 askale gebre amanuek inay qayb kanoto ay ahaayd in iyadoon arintaas fafcaan laga qaadan la buriiyo ida uudhigayo qodobka 343/1 waa arin ka hor imaanaysa X/H/M. laba Fadhiga Dibu Eegista ee Maxakamada Guud turjuunka uu siiyay qodobka 12 farqadiisa 2 aad ee Bayaanka Tirsigiisu yahay 47/1967 waa mid ujeeda shuruucda iyo Bayaanka ka hor imaanaaysa oo khaladaad sharci oo aasaasi ah ka jirto, Codsaduhuu xujada sababta uu u badalii waayeey iyadooy tahay bankiiga dhismaha oo amaah u haystay iyadoon la fiirinin Go'aankalaGaadhay waa khalad sharcii oo aasaasi ah ee in diib loogu eego codsaday. Jawaab Celiyuhu ku dooday guriiga dawlada la wareegtay oo askaale walde amanuel badal loosiiyay, arintana inay Maxakamadiiii eegto maaha, Codsaduhu xujada uu keensaday waxaa la siiyay 1953 kii wasaaraduna Bayaanka 47/1967 kuma ansixiniin shaabadina kuma taalo xuquuq uu ku dacwoodo malahaa, guriigu wuxuu dumay qarixii ka dhacay Xaafada baqlo bet 1983 dii, waxaan gaaraash ahaan uga kiraaystay dhaxla yaasha askale welde amanuel, Maxakamada Hoose Go'aankaay gaadhay wax khaladaad sharci oo Aasaasi ah ma lahaa ku Jawaabay.

Codsaduhu wuxuu ka soo Jawaabay Jawaabti lakeensaday dooda dhinacyada waa sida kor lagu sheegay, baadhitaan kadib Gurigan doodu ku salaysantahay Jawaab Celiyuhu Gurigaan Dacwad maka keensan karaa mise xaq uma laha arinta odhanaaysa in la fiiriyo waa mihiin, si hal loogu helo dooda Codsadaha in lala fiiriyo Bayaanka

47/1967 ujeedadiisa iyo iyo shuruucda kale ee la xidhiidha turjumkooda loobaahan yahay. Codsaduhuu guriiga lambarkiisu yahay 320 ee ku yaal degmadii hore 20 aad qabalihii 40 aad iyo jagada 855 kaare mitir ah inuu leeyahay baanka dhismaha uu xujada ka haaysto waxaan ka fahanay Go'aankaMaxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka iyo Fadhiga Rafcaanka ee Maxakamada Sare ka gaadhay, Fadhiga Rafcaanku oo raacaya qodobka 33/2 ee X/H/Minaad hantidaan xuquuq ku leedahay maanad cadayniin Go'aankoodana la xidhiidhiyay sida ku cad qodobka 12 aad fiqadiisa 2 aad ee Bayaanka 47/1967 xujada Guriga iyo bilaanka goobtu maadama Bayaanka dhaqan galkiisa ka horaaysay wasaaradu ma ansixiinin.

Bayaanka Tirsigiisu yahay 47/1967 qodobkiisa 12 firqadiisa 2 aad ujeedadiisa iyo xadka fulineed qodobada kale ee Bayaanka iyado lala xidhiidhinayo la turjumaa, sida ku cad hodhaca Bayaanka qof amaa qoyiis haday haystaan hal guri iyo guri goobta shaqada ah in lagala wareeyo ma dhigayo, ujeedada bayaankuna waa sida ku cad qodobka 3/3 aad wixii hal guri oo lagu noolado iyo hal guri oo goobta shaqada kaban buu kahadlayaa, balse waa in guryaha dheeriga ee dawladu lawareegayso u rabto dhibaatooyinka gurii la aanta ee magaalooyinka ka jirta u xaliso dadka bilaa guryaha ah guryo dawladu u siiso uunbaa laraba, sidookale sida kucad qodobka 7/1 aad inta bayaanku soobixiin qofka amaa qoyiiska jago haystay meelkalena wax kale ku lahaayin jagadaas xujad wuu u qaadan karaa, sida uu dhigay qodobka 12/2 ee Bayaanka 1967 xuquuqda shaqsiga amaa qoyiiska uu siiyay la duufsiiyo ma haboona.

Wasaaradu sida uu dhigayo qodobka 12/2 iyo 35/1 aad ee Bayaanka guryaha wadanka dhamaantood inta ladiiwaan gasho in si cusub cidkasta lahaanshaha loosiiyo arin lagabagabeeyay maaha sida ka muuqata Galkan doodiisa iyo galal kaloo badanba, wasaarada oo awooda fuliteedu koobnayd amaa guriiga oo baanku dayiin u haysto amaa arimo kale oo Maxakamadiii cadaayn lahaansha Guriga ansixintiisa oo xujad

siin la aanta cidkasta oo gurii dawladu lawareegin ku jirta sida uu dhiigayo qodobka 37 ee Dastuurka inau u Maxakamada awooda garsoor u leh aritaas uu u dacwoodo kama hor istaagaysoo. Arintan wakaalada birayfatasationka Itoobiya waxay dhahday maadaa gurigu shaqsiyaad gacanta ugu jiro inaan labada dhinac dood siiyo oo an Go'aan ka gaaro awood inay u lahaayiin qoraal Codsadaha ku ogaysiisay, Go'aankaMaxakamada Sare ka ogaanay.

Sida daraadeed iyadoon ogolaasho iyo heshiis ka haaysaniin Codsadaha dadka guriida iska gashay ee ku nool inuu Guriga ka saaro uu hantiilaha guriiga yahay xukun ku xaqiijiyo uu keensaday cadaaymo inuuGuriga xaquuq uleeyahay tilmaamaysa.

Waxaan argnay in qodobada Bayaanka 12/2 natiijada fulinta iyo u jeedada iyo qodobka 2/3 iyo qodobka 7/1 ee Bayaanka 47/1967 xidhiidhkooda lawada turjumo, sida daraadeed Codsaduhu markay wakaalada birafitashinka Itoobiya dhahday arintan awood umaliihi ina uu yahay hantiilihi arinta tilmaamaysa oo ah xujadii iyo bilaanki inta uu cadaayin ahaan ula soobaxo dhaho Guriga dawladu lama wareegin dadkan guriiga ku jiiraa inay guriiga ku jiraan xaquuq uma laha sida daraadeed wuxuu xaq u leeyahay in guriiga looga baxo, xujada guriiga iyo bilaanka wasaarada inay ansiixiso ahaayiid oo ansixiniin kama dhigaayso xuquuqdii iyo danihii uu Guriga ku lahaa mid reebaysa. Sida daraadeed Fadhiga Rafcaanka ee Maxakamada Guud ee Fadaraalku turjumaada ay ka bixiisay qodobka 12/2 ee Bayaanka 47/1967 in khalad sharcii oo Aasaasi uu ka jiro ayeey go aamisay.

GO’AAN

1. Fadhiga Rafcaanka ee Madaniga ee Maxakamada Guud ee Fadaraalka Go’aankaay gaadhay waa la buriyaay.
2. dukumantiiyada uu cadaaymaha uu u keensaday Codsaduhu waxay cadaaynayaan in Codsaduhu guriiga xuquuq iyo danaba u leeyahay.
3. Fadhiga dib u eedista madaaniga ee Maxakamada Guud ee Fadaraalku Codsaduhu maadamaa uu Guriga xuquuq iyo dana u leeyahay dacwoona karo ogaato ariimaha Rafcaanka ugu yimiid ee kale intaay si miisaman u baadho sida uu dhigayo qodobka 343/1 aad ee X/H/M iyaan dib ugu celiinay si ay Go’aan uga gaadho.
4. Maxakamada wixii labada dhinac kharash iyo khasaare kasoo gaadhay midba dhiniciisa ha baxsho.
5. Go’aankan waxaa Gaadhay dhamaan garsoorayaasha Fadhiga dib u eegita Maxakamada Guud ee Fadaraalka.

Waxaa Go’aankan ku yaal Saxaaxa shan garsoore oo la akhrin Karin

Summad Galka: 17712

Taar: 16 kii tikimti 1998

Garsoorayaasha: 1. Menbarasahay Tadase

2. Cabdulqadir Maxamed

3. Sinidu Alemu

4. Mesfin Ekubeyonas

5. Hirut Melas

Codsade: Maamuul Magaalada Addis-Ababa cidii matalaysay Tesfaye Semadkun wuu jooga

Jawaab Celiiye: Dhaxlayaashi Sacdiya Ismaacil oo kala ah:

1. Sabaax Cabdo

2. Axmed Cabdo weey joogaan

Kadib markaan Galka baadhnay waxaan ka soo saaray Go'aankan

XUKUN

Dacwadan Dibu Eegista arinteedu waxaay ka bilaabantay Maxakamada heerka Hoose ee Fadaraalka kadib markuu Codsadaha hada Go'aanki kasoo baxay Fadhiga 6 dii Tahasaas 1995 tii cabasho ka keensaday. Faahfaahiteeduna waa sida soosocota

Go’aanka laga soo cawday waxaa Dacwaysane ka ahaa Amaan Maxamed, codsaduha oo heshiis kiro guuryaha ganacsi ee lanmarkoodu yahay 797 iyo 798 ee ku yaala Degmada 5 aad Xaafada 9aad kulagalay, cidii Go’aanka la gaadhay ka cabanaaysay ee sheeganaysay hanti ay gaar u leedahay into dhahay dacweysanuhu guryihii intuu kabaxo haku wareejiyo dacwoodaha, sido kale laga bilaabo 7 dii yakaatit 1994 wixii kiro lagu lahaa ha bixiiyo go aamisay, kadacwoodaha Go’aanka wuxuu dhahay maya guryahani waa guryihii Bayaanka Tirsigiisu yahay 47/ 1967 dii dawladu lawareegtay islamarkaana mudo 28 sano ah Amaan Maxamed kiro ugu jiray dacwoodaha buugi lanbarkiisu ahaa 5127386 lahaanshahana Xafiiska shaqada iyo Horumarinta Magaalooyinka

Waxay Waaxda Guryahu ku dooday: Maadaama aan la keenin cadeeyn tilmaamaysa in guryaha la la wareegay iyo waraaqihii lagula wareegay, Waaxda Guryuhu dhinacbay iska dhigtay codsiga.

Inkastoo kiiskan Rafcaan looga qaatay Maxakamada Sare ee Fadaraalka, Maxakamada Sare waxay ku raacday Go’aankii Maxakamada Hoose

Codsadaha hada codsiiga Dibu Eegista ee uu kaga cabanayo Maxakamada Sare ee Fadaraalka wuxuu ku dacwoonayaa in Go’aamada lagu gaadhay Cadaayn aan la hubin iyo Tirtiirida Go’aanka ay ku gaadhay iyadoo ka duulaysa Go’aanka ay gaadhay khalad sharcii oo Aasaasi uu ku cabanayo.

Maadama lagu ku qancay in loo baahan yahay Turjum Sharci, waxaa galka loo gudbiyay Fadhiga Dibu Eegista, waxaana la faray in Jawaabta Jawaab Celiyaha iyo Jawaabta Jawaab celinta Codsadaha la dhagaysto.

Fadhigan dib u eegistu arintii wuu baaray, waxa u soobaxday arintan waxaa turjun sharcii u baahan waraaqaha cadaaynta lahaanshaha hantiida maguurtada ee Xafiiska maamuulku hantiilaha siiyay marka latirtiiro amaa lagala noqdo waxaa kadhalanaya?

Sida ku cad qodobka 1195/1 aad ee X/M Xafiiska maamulku waraaqda cadaayinta lahaanshaha hantiida maguurtada qofka lasiiyo waxay tilmaamaysa in hantiilahasi leeyahay hantida maguurtada ah. Balse hadii la ogaado in waraaqada lahaanshaha hantida ee labixiyay qaab sharci daro ah lagu bixiyay, waxaa burinaya arintaas qodobka 1196/1 aad ee X/M, arintan marka laga hadlayo Xafiiska sharcigu awooda u siiyay in uu bixiyo waraaqada cadaaynta hantiilenimada buuga lahaanshaha ee Tirsigiisu yahay 5127386 inu tirtiiray lacadeeyay, buugi lahaansha oo latirtiirayna xuquuq xanti lagu lahaado mayeelanayo, dhaxlayaasha Jawaab Celiyuhuna xaquuq anu lahaayin madhaxlikaraan. Maxakamada Hoose shuruucdan kor lagu xusay siday dhigayaan in kastoy fahansanyihin buuga lahaanshaha ee latirtiiray buugaa lahanshaha ee la tirtiray wax xuquuq ah u codsanaha siinayo majirto intay dhahday Go'aankaay gaadhay waa khalad sharcii oo Aasaasi ah dhahday cod dheeri ku go aamisay.

GO'AAN

1. Waxaa laburiyay Maxakamada Saree ee Fadaraalku 10 kii Tiqimti 1997 Galka Tirsigiisu yahay 15563 Go'aankii ay ka gaadhay
2. Labada dhinaac wixii kharash iyo khasaara ah ha isqabaan
3. Galka Xusuus Dhawrka halagu cesho

Kala duwanaashaha Fikiirka

Sida ku cad qodobka 358 X/H/M qofkasta in uu hor istaag ka keensan karo intaan Go'aanka la fuliniin ariimaha la xidhiidha in dood socota dhinac ka noqdo amaa kaqayb gali kara, inuu isago kharash bixin Go'aanka la gaadhay waxyeelo ka soogadho, taa waxa laga fahmayaa in Codsaduhu intaan go'aan lagaadhin uu doodi

socotay in laga qayb galiyaay ahayd amaa isagoon dooda ka qayb galin Go'aanka la gaadhay hadday dhibaato kasoo gaadho in cadaymaha soojeediyuhu inay taas u xaqiijiso ayaa loo baahan yahay.

Arintan Codsaduhu guryaha ganaacsi ee lanbarkoodu yahay 797 iyo 798 ee ku yaal Degmada 5 aad Xaafada 9 inay dhaxlayaasha Jawaab celihuhu inay la wareegto Go'aanka Maxakamada heerka Hoose gaadhay wax yeelo u gaysanayso xuquuqdayda inaan dooda dhinac ka noqdo si aan Go'aankau buriiyo isagoo sooqaatay qodbka 358 X/H/M codsiiga Maxakamada keensadayka dhahay guryahaan xuquuq ku leehay dhahayna Dawladaa la wareegtay awgeed logu diiday Galka laga fahmayaa, ha ahaate cadaymo in Dawladu lawareegatay muujinaya ma keensan, doodiisuna ku ma salaaysneyn cadeeymahan baan hayesta amaa hayistay, dhinaca kale sida uu dhiigayo qodobka 1194 ee X/M hantiidan maadama cidii lahayd aan la garanayn oo aan cadayn loo hayn guryahan dawladaa leh kuwa la dhihi karo maaha. Sida ku cad qodoobka 358 ee X/H/M kaligii uu xuquuq masiinaayso sababt looga dhigaa dhaxlayaasha Jawaab Celiyaha xuquuqdii lasiiyay waa la tirtiiray,

Waxay ilatahay iyadoon loo baahnaayn in Maxakamadaha Hoose arintii ku noqdaan oo dooda labada dhinac ah baadhan, kaliya Codsaduhu xuquuqdii uu u lahaa inuu dooda ka qaybgalo muun cadaynin awgeed codsiiga laga diiday khalad sharcii muunan samayniin. Sida daraadeed in Go'aanka loo ansixiyo ayeey ahayd anigoo dhahaya, magacaayguna yahay garsooraha lanbarka sadexaad ku xusan. Waxaan muujiyay Kaduwanaashaha aan kaqabo goo aanka la isku wada raacay.

Summadda Galka: 168556

Taar: 14 Sane 2011

Garsooreyaasha: Birhanu Aminew

Beiwket Belay

Indashaw Adane

Haylu Nagash

Itmet Asafa

Codsade: - Mudane Teshome Dalanse

Jawaab Celiyeyaal: 1. Masuuliyiinta Dhulka Miyiga ee Xafiiska Deg/ Qarsa Maalima

2. Xafiiska Maamulka Beeraleyda Qabalaha Qarsa Warko

Kaddib markii ay Maxakamadu baadhay Galkan waxay ka soo saartay Go'aankan:

XUKUN

Waxaa nuxurka Dacwadan sal u ahaa cabashada Codsadaha oo ay Dacwadiisu ahayd maadaama oo dhulkii la iiga qaatay Wadada Danta Guud ah aanan badalkii Dhulka iyo wax magdhaw ah midna helin, waxaan Maxakamada ka codsanyaa in ay ii go'aamiso xuquuqda dhul bedelka iyo magdhawga. Codasuduhu wuxuu codsigiisa ku yidhi:

1. Maxakamadii ugu horeysay ee cabashadayda qaaday oo ahayd Maxakamada

Degmada Qarsa Malima ee Dawlada Deegaanka Oromiya waxay go'aamisay in aysan awood garsoor u lahayn in ay dhagaysato Dacwada;

2. Maxakamadii labaad oo ahayd Maxakamadda Gobolka Woqooyi-galbeed ee Shawa ee Dawlad Deegaanka Oromiya, waxay ansaxisay Go'aankii Maxakamada Degmada Qarsa Mali;
3. Maxakamadii sadexaad oo ahayd Fadhiga Dibu Eegista ee Maxakamada Guud ee Dawlada Deegaanka Oromiya wuxuu isna ansaxiyay Go'aankii Maxakamada Degmada Qarsa Mali iyo Ansaxintii Maxakamadda Gobolka Woqooyi-galbeed ee Shawa.

Hadaba, maadaama Bayaanka Tirsigiisu yahay 455/97 aqonsanyahay dhagaysiga arinta aan ka dacwoonayay, islamrkaana aanu Bayaanku ka hadlayn "**Awood Garsoor**", waxaan aaminsanahay in sadexda Go'aan ee Sare ku xusan ay ku jiraan "**Khaladaad Sharci oo Aas-aasi ah**". **Sidaas Daraadeed, waxaan codsanayaa in layga saxo khaladaadka sharci**.

Maxakamadu markii ay baadhay Galkan, waxay ogaatay in sababta ay Maxakamada Degmada Qarsa Mali ku diiday qaadista Dacwadan ay ku sheegtay in aan la dhisin "**Gudigii Eegista Cabashooyinka"** ee uu Bayaanka Tirsigiisu yahay 455/97 farayay in la dhiso.

Hadaba, Maxakamadu waxay hoosta ka xariiqday in ay **Arinta Turjumaada Sharci** u baahani Tahay: "**Iyadoo la cuskanayo Bayaanka Tirsigiisu yahay 455/97, Maadaama aan Gudiga Eegista Cabashooyinka la dhisi, Maxakamadi ma diidi kartaa qaadista Dacwadan"?**

Intaa kadib, waxay Maxakamadu guda gashay dhagaysiga kiiska. Waxaa jawaab Celiyeyaasha oo kala ahaa Xafiiska Maamulka iyo Isticmaalka Dhulka Miyiga ee Degmada Qarsa Maalima iyo Maamulka Beeralayda ee Qabalaha Qarso Warko la

amray in ay Jawaab Celinta keenaan.

Xafiiska Maamulka iyo Isticmaalka Dhulka Miyiga ee Degmada Qarsa Maalima (JawaabCeliyaha 1aad) wuxuu ku jawaabay: Bayaanka Tirsigiisu yahay 455/97 qodobkiisa 11/1 wuxuu dhigayaa:

- Marka ugu horeysa waa in Cabashada loo gudbiyaa Maamulka, Iyadoon Cabashada Maamulka loo gudbin, toos cabashada looguma gudbin karo Maxakamada'. Dacwadan waxaa toos loogu gudbiyay Maxakamada;
- Gudigii Dhagaysiga Cabashada ee Bayaanku farayay lama dhisin;
- Waxaa mudo dhaaf ah wakhtigii sharigu u fasaxayay soo gudbinta Dacwadaha.
  - Sidaas daraadeed, waxaan cosanaynaa in ay Maxakamadu ansaxiso Go'aankii Maxakamada Degmada Qarsa Maalima.

Maamulka Qabalaha Qarsa Warko wuxuu ku jawaabay:

- Codsadaha Dhul-beereedkiisa lagama wada qaadin. Waxaa laga gooyay 110 mitir x 12 mitir kaliya;
- Maadaama aanu Maamulka Qabaluhu lahayn dhul u gaar ah, Codsadaha lama siin dhul loogu badalo intii laga jaray Dhul-beereedkiisa;
- Maadaama aanay jirin Miisaanyad loo qabtay Magdhawga Cida Dhulka lagala wareego, Magdhaw lama siin.
  - Sidaas daraadeed, waxaan Maxakamada ka codsanayaa in ay ansaxiso Go'aankii Maxakamada Degmada Qarsa Maalima.

Si Dacwadiisa uu u xoojiyo, wuxuu Codsaduhu bixiyay jawaabta jawaabteeda.

Waxaan Galka ka garan karnaa in dulucda Dacwadu ay ahayd:

- dhulkii laga qaatay Codsadaha ee uu ka keenay cabasho ah in la siiyo dhul bedel ah taasi oo uu ka codsaday Hayádaha Maamulka markii uu jawaab ka

waayayna uu layimid Maxakamada si ay Go'áan uga siiso.

- Jawaab Celiyeyaashu ma dafirin in qayb ka mid ah Dhulka Jawaab Celiyaha loo istimcaalay dhul dadwayne, balse waxay soo gudbiyeen diidmada ah in cabashadan marka hore ay haboonayd in uu eego guddiga dhagaysiga cabashooyinka oo ah mid ka hoos dhisan Maamulka.
- Waxaa la ogaaday in maxkamdaha Hoose iyada oo taas ka duulaysa ay bixiyeen Go'aanka ah in aysan lahayn awood garsoor ay arinta ku eegaan.

Asal ahaan sida uu dhigaayo Dastuurka Dawlada Jamuuriyada Diimoqraadiga Fadaraalka Itoobiya qodobka 40/3/, lahaanshaha Dhulka Miyiga iyo kan Magaaladaba iyo Khayraadka Dabiiciga waxaa xuquuq u leh shacbiga iyo Dawlada. Waxaa qodobka 40/4/ ee Dastuurku uu dhigayaa in la dhawraayo xuquuqda ay beeraleyda Itoobiya u leeyihiin in ay dhul ku helaan bilaash, iyo in la ilaalinaayo xuquuqda ay u leeyihiin in aan dhulkooda laga barakicinin, iyo in faahfaahinta fulinta sharci lagu go'aamiyo Bayaanka Isticmaalka Dhulka Miyiaga ee Fadaraalka ee Tirsigiisu yahay 456/97 oo ah mid daba socday Qodobada Dastuuriga ah qodobkiisa 5/4 iyo Bayaanka Isiticmaalka iyo Maamulka Dhulka Miyiga ee Dawlad Deegaanka Oromiya Qodobadiisa 5/1 iyo 5 ay xaqiijinayaan in xuquuqda istimaalaka iyo haysashada Dhulka lagu helaayo qoondaynta iyo qaybinta ay samayso dawladu, dhaxal amaa siin.

Sidaas darteed qof kasta oo leh waxaan leeyahay xuquuqda haysashada Dhulka Miyiga kuna helay sababaha kor ku xusan, wuxuu xaq u leeyahay in si aan xad lahayn Dhulka uu u isticmaali karo, hantida uu ku dul dhaqay Dhulka uu iibin karo, baddali karo, qof kale u gudbin karo, iyo in xuquuqdaasi ay istaagi karto marka loo baahdo in Dhulka loo isticmaalo si dan Guud oo ka wayn tii hore, taasna qofka laga siinaayo mag dhaw iyo dhul badal ah haddii taas la kari waayana loo samaynaayo mag dhaw

dib u dejineed sida uu dhigaayo Bayaanka Tirsigiisu yahay 130/99 iyo waxyaabaha ay xeerinayaan qodobada 6/1, 10, 11, 12 iyada oo laga duulaayo dastuurka dalka bayaanada loo soo saaray arimaha la xidhiidha sida dadweynaha looga qaadayo lahaanshaha Dhulka danta daweynaha ama danta Guud darteed gaaar haaan Bayaanka loo soo saaray ee Tirsigiisun yahay 455/1997 qodobkiisa 21aad ee lagu go'aaminaayo siyaabaha dadka dhulkooda marka loogu baahdo shaqo faaiido u leh bulshada ay ugu baxayaan Dhulka ay haystaan iyo sida loo siinaayo, wuxuu dhigayaa in "mag dhaw" looga jeedo lacagta amaa waxyaabaha aan lacag ahayn amaa labadaba, ee qofka Dhulka haysta ee lagu ridayo Go'aan inuu Dhulka uu haysto ka baxo laga siinaayo hantida uu ku dul leeyahay Dhulka uu ka baxaayo.

Akhriska cakiska ah (contarario reading) ee Qodobka 11/1/ wuxuu dhigayaa magaalooyinka aysan ka dhisnayn cid maamul ah oo dhagaysata cabashooyinka ku saabsan Dhulka, wixii ku saabsan cabashada xadiga magdhawga, in loo gudbinaayo isla cidda ka dhisan Maamulka Magaalada, hasa yeesha maaamulada magaalooyika aysan ka jirin gudiga dhagaysiga cabashada, waxaa cabashada ku saabsan Dhulka magaalda iyo Miyiga loo gudbinayaa Maxkadamada Rasmiga ah sida uu xeerinaayo Qodobkani

Arintan gacanta lagu hayo ee codsiga Garsoorka ee Codsaduhu, waxay tahay in dhulkii danta shacbiga looga qaaday aan mag-dhaw laga siinin amaa dhul badal ah laga siinin, taas isaga oo ka duulaayo inuu garsoor codsaday. Sidoo kalena waxaa dooda laga fahmi karaa nuxurka ah in aan bilowgiiba la siinin mag dhaw amaa dhul badal ah, taasna aan cabashadii uu u doonaayay inuu ku helo xal maamul aan laga siinin wax jawaab ah.

Dhab ahaantii, Bayaanka uu Tirsigiisu yahay 455/97 Qodobkiisa 3/1 sida uu dhigaayo, markaay tahay Dhulka Miyiga, waxaa Maamulka Dhulka ee Degmada qasab ku ah in uu xaqiijiyo inuu qofku helay mag-dhawgii ku haboona ka hor inta

aan Dhulka laga kicin. Hasa yeeshe arrinta, iyada oo Jawaab Celiyeyaashu ay aaminsanyihiin in Codsadaha laga qaaday dhul beereedkiisi, doodana aan lagu soo darin in Codsadaha la siiyay mag-dhaw amaa dhul badal ah, waxay ahayd haddii aysan wax xal ah ay Maamulku siin waayaan, in Maxakamadu u eegto.

Hadaba markii uu Codsaduhu Maxakamada cabashada u soo gudbiyay waxay ay go' aamisay in aysna lahayn awood garsoor, Go'aankaas oo ka hor imaanaysa arimaha ku cad qodbka 37aad ee Dastuurka Dawladda Jamuuriyada Dimoqraadiga Fadaraalka Itoobiya ee ah in ay muwaadiniintu xaq u leeyihiin in ay helaan garsoor.

Sidaas daraadeed maadaama oo Garsoorka la waydiistay Maxakamadaha Hoose ay ku saabsanayd gacan ku haynta Dhulka Miyiga, madaama oo marka arinta laga fiiriyo Dastuurka iyo Bayaanka 455/ 97 qodobkiisa 11/1 ay haboonayd in ay Maxakamaduhu ay dhinacyada doodsiiso go'aana ka soo saarto, waxaa Go'aanka ay Maxakamada Hoose ay soo saartay ee ah in aysan awood garsoor u lahayn iyo ansixinta ay Maxakamada Sare ku waafaqday Go'aanka Maxakamada Hoose, waxay Maxakamdu garwaaqsatay, markay turjumaad sharci samaysay, in uu ku jiro **<u>Khaladaad Sharci</u>** **<u>oo Aasasi ah</u>**, oo u haboon in la saxo. Sidaas daraadeed waxaan Galkan ka bixinay Go'aanka hoos ku xusan:

<u>GO'AAN</u>

1. Iyada oo la cuskanaayo Qodobka 348/1 ee HXMI waxaa la buriyay:

i. Go'aanka ay Maxakamada Degmada Qarsa Mali ee Dawlada Deegaanka Oromiya ay ka soo saartay 27 Tikimit 2010 TI Galka Tirsigiisu yahay 20880;

ii. Go'aankii Fadhiga dheygaysi Rafcaanka ee Maxakamada Gobolka Woqooyi-galbeed ee Shawa ay ka soo saartay 17/07/2010 T.I Galka Tirsigiisu yahay 42674; iyo

iii. Go’aanka uu Fadhiga Dibu Eegista ee Dawlad Deegaanka Oromiya uu ku an sixiyey Galka tirsigisu yahay 290177 ee lagaadhay tariikhdu markay ahayd 06/12/2010 T.I

2. Iyada oo la cuskanaayo Qodobka 314/1 ee HXMI, waxaa Kiiskan dib loogu celiyay Maxakamada Degmada Qarsa iyadoo lagu amray inay dib u dhagaysato doodsiisana labada dhinac islAmarkaana ay ka soo saarto Go’aanka ku haboon.

3. Dhinacyadu ha is qabaan kharashka iyo khasaaraha.

Galkan waa la xidhay, waxaana lagu celiyey Xusuus Dhawrka.

Waxaa Go’aanka ku jira saxeexyada 5 Garsoore oo qarsoore.

Summad Galka 166617

Taar: 30/9/2011

Garsoorayaal: - Taklit Yimesel

Tafari Gabru (Dr.)

Kane'a Kitata

Teshome Shiferaw

Sahay Mankir

Codosade: Mudane Gabremedhin Melkasadiq

Qareen: Ayele Bogale

Jawaab Celiyeyaal: 1. Mudane Kanani Dibaba:- Ma soo xaadirin

2. Mudane Serihun Samson Getachew

Kaddib markii baadhitaan lagu sameeyay Galkan waxaa laga soo saaray Go'áankan

XUKUN

Waxaa Galkan laga furay Maxakamada Darajada 1aad ee Fadaraalka, waxayna doodeedu ka dhaxaysay Codasadaha hadda oo Dacwaysane ahaa iyo Jawaab Celiyeyaalka hadda oo DacwoOdayaal ahaa. Sababtay arrinta loogu soo gudbiyay Maxakamadani waa Codsadaha oo ku dacwoonya in uu **Khaladaad Sharci** ku jiro, islamrkaana dalbanayo in la saxo **Amarka ay 11 Hidaar,** Maxakamada Sare ee Fadaraalku ka soo saartay Galka Sumadiisu tahay 212821.

Marka la eego sida ay arintu ku timid Dacwaysanaha (Jawaab Celiyaha hadda) wuxuu Dacwada uu soo gudbistay ku cadeeyay oo uu yidhi: in dacwoOdayaashii iyo dacwaysanaha ay marikii ay ahayd 3 Tikimt 1980 ay galeen heshiis kiro guri ah oo aan ribo lahayn taas oo ah in guri ku yaalada Magaala Addis-Ababa Magaalo Hoosaadka Lidata, Degmada 4aad, Guriga Lambarkiisu yahay 752 ayna leeyihiin dacwoodayaashu, ay lacag cadadkeedu dhanyahay 20,000 birr (labaatan kun oo birr) oo dayn ah aan ka qaadanay aan ku wareejinay Guriga, Anaga oo ku heshiinay in aan Daynta la bixiyo 3da Tikimt 1980 TI, Anagoo kireystayaasha Guriga ah aan sidaas ku qaadanay lacagta, Gurigiina aan ku wareejinay, hadana markii uu dacwaysanuhu uu lacagtii qaaday, kana codsanay in uu nagu wareejiyo guriga balse maadaama oo uu taas raali ka noqon waayay kaddib ayaan waxay ku dacwoodeen in guriga uu nagu soo wareejiyo, uuna na siiyo faa'iidadii aan kirada ka heli lahayn oo dhan 10,000 Birr.

Dacwaysanuhu wuxuu dhankiisa uu Dacwadan kaga soo jawaabay oo uu ku dooday in Dacwooduhu taariikhdu markii ay ahayd 3 Tikimit 1990 laga bilaabo ay muddo 17 sano kaddib ay tahay sidaas darteedna ay Dacwadani tahay muda dhaaf, heshiiskuna wuxuu dhigayaa haddii ay dacwoodayaashu ay lacagta wakhtigeeda ku soo celin waayaan in uu Dacwooduhu guriga iibin karo lacagtana sidaas ku qaadan karo, sidaas daraadeedna maadaama oo aan gurigii taariikhdu markii ay ahayd 5 Tahsas 2007 aan gurigii ka iibiyay Mudane Malaku Yohanes, Dacwadani maaha mid la aqbali karo. Hasa yeeshe, haddii ay Maxakamada leedahay Guriga waa in loo celiyaa dacwoOdayaashii, waa in Dayntii ay iga qaateen oo dhanayd 20,000 Birr (labaatan kun), la iga siiyaan lacagtaas iyo lacagtaas iyo dul-saarkeeda, oo xisaabteeda laga soo bilaabo 3dii Tikimt 1980 TI.

Intaas ka dib, markii ay Maxakamada Hoose baadhay Galka waxay ku xidhay 'Is-hortaag Darajada 1aad ee ha Mudo Dhaafka' kaddib waxay Go'aan ku gaadhay in

Dacwada ay soo dhawaysteen dacwoodayaashu ay tahay muddo dhaaf, waxayna sidaas ku tirtirtay Dacwadooda.

Maadaama ay Dacwoodayaashu ku qanciwaayeen Go'aanka Maxakamada Hoose, waxay Maxakamada Sare ee Fadaraalka u soo gudbisteen Rafcaan. Kadib markii ay Maxakamada Sare ee federaalku doodsiisay labada dhinaca, waxay Go'aanka ka soo saartay, Dawcadan oo Galka Tirsigeedu yahay 177014, Taariikhdu markii ay ahay 18/8/2009. Go'áanka ay Maxakamada Sare ee Federaalku soo saartay wuxuu nuxurkiisu ahaa in ay Go'áanka Maxakamada Hoose uu yahay mid aan sharciga ku salaynayn waxaana la buriyay Go'aankii Maxakamada Hoose, waxayna Maxakamada Sare ee Fedraalku dib ugu soo celisay Maxakamada Hoose iyada oo ku Amartay in dib loo doodsiiyo dhinacyada Go'aana laga soo saaro.

Maxakamada Darajada 1aad waxay qaaday Dacwadii Galkii la soo celiyay, waxaanay ka soo saartay Go'aan ah in "**Heshiiska"** dhexmaray DacwoOdayaashii iyo Dacwaysanayasha ee **Ribo-reebka** ahaa la Go'aamiyay in uu yahay mid aan lahayn **Natiijo Sharci**, Sidaas daraadeedna waxay Go'áamisay in ay lacagtii ay Dacwoodayaashu Daynta ku qaateen oo dhanayd 20,000 birr (labaatan kun) ay iska bixiyaan oo ay siiyaan Dacwaysanaha, Dacwaysanuhuna uu guriga lambarkiisu yahay 752 ku wareejiyo DacwoOdayaashii.

Kadibna Dacwoodayaashu oo ku qanci waayay Go'áanka Maxakamada Darajada 1aad, waxay Rafcaan u soo gudbisteen Maxakamada Sare ee Fadaraalka. Maxakamada Sare ee Federaalku, kadib markii ay qaaday Dacwadii Rafcaanka ahayd, waxay ansaxisay Go'aankii Maxakamada Darajada 1aad.

Cabasha hadda ee Dibu Eegistuna waxay ku saabsantahay ka soo horjeedka Go'áankan Maxakamada Sare ku ansixisay Go'aanka Maxakamada Hoose waxaana lagu codsaday in la baddalo.

Cabashada Dibu Eegista ee uu 1da Tahsaas, 2011 TI uu Codsaduhu soo qoray waxay u dhignayd sidatan: “Maadaama oo ay Maxakamada Darajada 1aad ee Fadraalku ay ka talaabsatay Go’aankii ay gaadhay Maxakamada Sare ee Federaalku oo ahaa ‘in ay labadanada dhinac naga doodsiisoo arrinta muhimka ah balse Iyadoon nagadoodsiin Go’aanka gaadhay, islamrkaana aany baadhitaan ku samayn Caddaymaha la soo dhaweeyay, Maxamada Sare ee Federaalkuna ansaxisay Go’aankii Maxakamada Darajada 1aad, waxay baal marsantahay Habka Xeerka Madaniga ee Dalka”. Hadaba, maadaama ay Go’aamada Maxkadamadaha Hoose (Maxakamada Darajada 1aad iyo Maxakamada Sare ee Federaalka) lagu sameeyay **Khalad Sharci** oo aasasi ah, waxaan codsanaynaa in nalaga buriyo iyaga oo soo dhaweeyay sharaxaada tabashada ay qabaan.

Fadhiga Hore ee Dibu Eegistu oo arinta qaabilay wuxuu baadhitaan ku sameeyay Su’aasha ah “**Go’aanka ay Maxakamada Darajada 1aad ka gaadhay arintani ma yahay mid waafaqsan Go’aanka Maxakamadda Sare ee Fadaraalka mise ma waafqsana”?**

Kadib Fadhiga Hore ee Dib u Eegistu waxa uu aqoonsaday, in iyada oo laga duulayo Qodobka 341 ee Habka Xeerka Madaniga Itoobiya, ay mudantahay in arintan la furo, wuxuuna Fadhigu Amray in ay Jawaab Celiyeyaashu 16ka Megabit 2011 keenaan jawaabtooda, kana xaadiraan Fadhiga Dibu Eegista ee Shanta ah.

Waxay Jawaab Celiyeyaashu, si waafaqsan Amarka Fadhiga Hore ee Dibu Eegista keeneen jawaabtoodii. Nuxuka jawaabtu marka la soo gaabiyo wuxuu u dhignaa sidan: - ‘Maadaam oo Go’aamada Maxkamdaha Hoose aysan **lahayn Khaladaad Sharci** oo aasasi ah, waxaan codsanaynaa in naloo ansixiyo Go’aanka, naloona ilaaliyo xuquuqda aanu u leenahay in aan dalbano kharashka iyo khasaaraha.

Codsaduhuna wuxuu dhiniciisa soo keensaday jawaab uu ku xoojinaayo Codsigiisa Dibu Eegista.

Hadaba Fadhiga Dib u Eegistu isaga oo ka duulaya dooda labada dhinac iyo Go'áanka uu Fadhiga Hore ku soo furay arinta, lana baadhaya/eegaya Shurruucda Aasaasiga ah ee arinta khuseeya ayaa waxa uu Galka u baadhay sidan soo socota: Sida aan baadhitaanka ku helnay Maxakamada Hoose Dacwada uu soo gudbistay Jawaab Celiyaha hadda, (Is-hortaagihii Maxakamada Darajada 1aad) ee uu soo gudbisitay Codsaduhu ay Maxakamadu aqbashay, halka Dacwada ay soo gudbisteen Jawaab Celiyeyaashana ay go'aamisay in uu mudda dhaaf yahay sida ku cad Galka.

Maxakamada Sare ee Fadaraalkuna markii ay baadhay Rafcaanka loo soo gudbistay, waxay cadaysay in Go'aanka ay Maxakamadda Hosee ku burisay Dacwada Jawaab Celiyeyaashu yahay mid aan haboonayn. Sidaas daraadeena Maxakamada Sare ee Federaalku waxay burisay Go'áankii Maxakamada Darajada 1aad, waxaanay dib ugu celisay Maxakamada Darajada 1aad, iyada oo cuskanaysa Qodobka 341 (1) ee Habka Xeerka Madaniga Itoobiya, waxaanay ku Amartay in ay dib u dhagaysato Dacwada sida Galka laga fahmayo.

Maxakamada Darajada 1aad ee Fadaraalku waxay Dacwada Galka dib loogu soo celiyay ee Tirsigiisu yahay 228538, fadhigeedii ay yeelatay 2/5/2010 TI, iyada oo laga duulaayo Go'aanka ay bixisay Maxakamada Sare ee Fadaraalku, ku cadaysay in ay codsadayeeshu ay codsadeen in Gal loo furo islamrkaana ay Maxakamadu ka aqbashay, sidookalena ku Amartay in Jawaab Celiyeyaashu ay Coddsadaha gaadhsiiyaan Waraaqda Yeedhitaanka 16 Yekaatiit 2010.

Fadhiga Maxakamada Darajada 1aad, wuxuu, si uu u baadho Galka ugana soo shaqeeyo balan u qabtay 16 Yakatit 2010 TI. Iyada oo taas la raacaayo waxaa

Xogta Galka laga arki karaa in isla 16 Yekatiit uu Fadhiga Maxakamada Hoose arintii Go'áan ka soo saaray taasi oo cadayn u ah in Maxakamada Hoose ka leexatay Amarkii Maxak40amada Sare ee ahaa in ay dhinacyada dood siiso.

Sida uu dhigaayo Habka Xeerka Madaniga ee Itoobiya Qodobkiisa 341 (1), Go'aan laga qaatay Rafcaan, haddi ay Makamadii Go'aanka bixisay ay arinta go'aamiso iyada oo aan guda galin dood, islamrkaana ku saleeyso kaliya diimada 1aad ee loo soo gudbiyo, Maxakamada Rafcaanku, iyada oo qodobada u baahan in la eego tilmaamaysa, ay Amri kartaa in dib loo dhagysto Kiiska.

Inaga oo taas raacayna markaa dib ugu soo noqono arrintan ay Maxakamada Fadaraalka Darajada 1aad Dacwada ay Jawaab Celiyeyaashu soo gudbisteen ku burisay, iyada oo ka duulaysa diidmada 1aad ee loo soo gudbiyay, dhinaca kalana ay jirto in Maxakamada Sare ee Fadaraalka burisay Go'aanka Maxakamada Darajada 1aad kuna Amartay in ay dib u dhagaysato kiiska oo ay labada dhinac doodsiiso go'aana kala siiso, waxaan ka fahmi karaa khaladka sharci ee meesha ka dhacay.

Hadaba arintan aan gacanta ku hayno waxaan ka fahmim karnaa in nuxurkii dhabta ahaa ee la xidhiidhay mudo dhaafka ee ay Maxakamada Hoose Go'áamisay, ay Maxakamada Sare ee Federaalka oo aan gudgalin xaqiijinta Mudo Dhaafku iska soo celisay Galka. Marka ay xaaldu sidaas tahay, waxana garwaaqsan karaa, garawshana ku siin karaa in Maxakamada Sare ee Fadaraalku ay Go'aankeeda ku salayso Qodobka Tirsigiisu yahay 341 (1) ee HXMI oo qeexaya in ay Maxakamada Rafcaanku awood u leedahay in ay Go'aan bixiso, iyo in ay buriso Go'aamada Maxakamada Hoose sidoo kalena dib uga celiso si ay dibu ugu eegto Maxakamada Hoose iyada oo cadaynaysa qodobda la raacayo.

Taas waxay ka dhigantay in Maxakamada 1aad ee Fadraalkau uu waajib ka

saaranyaahy in Go’aanada iyo awaamiirta Maxakamada Sare iyada oo ka duulaysa ay labada dhinac doodsiiso kana soo saarto Go’aan. Iyada oo taas la raacaayo, Maxakamada Darajada 1aad ee Fadaraalku iyada oo ka duulayso Go’aanada ka soo baxa Maxakamada Sare ee Fadraalka, waa in ay labadooda dhinaca doodsiisaa sidookalena la semeyo geedi socodka dhegaysiga doodaha.

Taas waxay ka dhigantahay in arimaha ay Maxakamadu qabanayso noqdaan kuwo ku salaysan HXMI qodobada tirsigoodu 246-249, oo dhigaya in marka ay soo bandhigaaan doodaha Dacwadooda iyo jawaabahooda lagu armro in ay keenaan cadaymaha waxyaabaha ay doodooda ku xuseen lana baadho, goáana laga siiyo.

Hadaba, marka aan ku soo laabano arinta gacanta lagu hayo, waxaa Galka laga garan karaa iyada oo Maxakamda Darajada 1aad ee Fadaraalku ka duulaysa Go’aanka Maxakamada Sare aanay samaynin geedisocodkii dhagaysiga Dacwada muhiimka ah balse a dhinacyada oo qudha dib u dhaqaajinta faylka.

Sidaas daraadeed, maadaama aanay Maxakamadu nidaamkaasi aan kor ku soo sharaxnay raacin, ayna ka soo horjeedo Go’áanka ay Maxakamada Sare bixisay, waxaan leenahay Go’áanka Maxakamada Hooise ee Darajada 1aad malaha wax taageero sharci ah.

Hadaba Marka la isku soo duubo, maadaama ay Maxakamada Darajada 1aad ee Fadaraalku aanay raacin Go’aanka ay soo saartay Maxakamadda Sare islamrkaasina aanay dhinacyada doodsiinin, dhegaysanin, Dacwada ka soo saarin nuxurka ku haboon waxa la isku haysto, baadhisna ku samaynin cadaymaha la soom bandhigay, Go’aanka ay arinta ka gaadhay wuxuu noqonayaa mid leh **Khalad Sharci oo Aasaasi ah**, sidaas daraadeed waxaan Galkan ka soo saarnay Go’aankan hoos ku xusan

GO'AAN

1. Iyada oo la raacayo Qodobka 348 (1) ee HXMI, maadaama ay ku jiraan Khaladaad Sharci oo Aas-aasi ahi, waxaa waxba kama jiraan laga dhigay Go'aanka ay Maxakamada Darajada 1aad ee Fadaraalku, markii ay taariikhdu ahayd 6/6/2010 ka soo saartay Galka Tirsigiisu yahay 228538, iyo Amarka ku taariikhysan 11/3/2010 ee ay Maxakamada Sare ee Fadaraalku ka soo saartay Galka Tirsigiisu yahay 212821.
2. Iyada la raacayo qodobka 343 (1) ee HXMI, waxaa Maxakamada Darajada 1aa ee Fadaraalka dib loogu soo celiyay in iyada oo laga duulaayo Go'aanka/tilmaamaha ay bixisay Maxakamada Sare ee Fadaraalku, dib loo dhagaysto dhinacyadana la doodsiiyo, lana soo saaro nuxurka Dacwada la isku hayo, la baadho caddaymaha arinta ku aadan, kadibna laga soo saaro Go'áanka ku haboon.
3. Nuqulka Go'aankan ha la gaadhisiiyo Maxakamadaha Hoose.
4. Dhinacyadu ha is qabana kharashka iyo khasaraha.
5. Galka Tirsigiisu yahay 228538 ha loo celiyo Maxakamada Darajada 1aad ee Fadaraalka.
6. Galkan waa la xidhay waxaana lagu celiyay Xusuus Dhawrka.

Waxaa Go'aanka Ku Jira Saxeexyada 5 Garsoore oo Qarsoon

Summad Galka: 162083

Taar: 28 Miyasiya: 2010 T.I

Garsoorayaasha: -

1. Berhanu Amanew

2. Beiwket Belay

3. Indeshaw Adane

4. Haylu Negash

5. Itmet Asefa

Codsadayaasha: - Marwo Ababu Temesgen-Waxa jooga Wakiilkeeda Makuriya Adunya

Jawaab Celiyeyaasha: - 1. Mudane Bare Abate

2. Mudane Aschiluwal Alem **Wakiil Aschalow ma**

3. Marege Fakedu **soo dhawaan**

4. Mudane Masre Alemayehu

5. Mudane Samagn Bahiru

Kadib markii baadhitaan lagu sameeyay Galkan waxaa laga soo saaray Go'aankan hoos ku qoran

XUKUN

Dacwadan oo nuxurkeedu la xidhiidho gacan kuhaynta Dhulka Miyiga ayaa ka bilaabantahay Maxakamada Degmada Yewadhla ee Dawlad Deegaanka Amxaarada. Nuxurka Dacwadan ay Jawaab Celiyeyaashu codasadayaasha hada ay ka soo gudbiyeen Maxakamada Hoose waa sidan soo socota. Dhulkii

aan haysanay ee nalooga soocay Dhulka la wada leeyaahy, ee nalagu siiyay Shahaadaa Haysashada Dhulka, maadaama ay codsatadu sanadkii 2009 qodatay, arintaas oo nagu ahayd buuq iyo faro galin, waxaan codsanaynaa in nalaga baal mariyo buuqa iyo fara galinta ay nagu hayso.

Codsaduhu wuxuu dhiniciisa ku jawaabay:- Dacwada la iiga soo gudbiyay waa Mudo Dhaaf maadaama Dhulka la i siiyay sanadkaa 1983 TI. Maadama oo uu Dhulkan gacanku hayntiisu iigu diwaan gashan yahay buuga lahaansha in qodashada Dhulkayga lagu tilmaamo buuq iyo faro galin waa mid khalad ah. Sidaasi daraaded Dacwadan ha la iga xidho. Arinka waxaa Darajada Koobaad ku dhagaystay Maxakamada Degmada Yawadhla oo markii ay dhgaystay maragyaasha labada dhinaca, Xafiiska Maamulka ee Dhulka ee Degmada Khabiirkeedu uu u soo baadhay warbixinta uu xafiisku usoo gudbiyayna lagu cadeeyay in xubnaha guddiga qaybinta Dhulka ay dhaheen waxaa sanadkii 1983 la siiyay Codsadaha. Waxay dhinaca kale bulshada inteeda badan ee agagaarkaasi sheegeen in uu dhulku ahaan dhul la wada leeyahay amaa dan Guud ah isla markaasna sanadkii 2009 la siiyay Jawaab Celiyeyaasha.

Waxaana loo sameyay Shahaadada Cadaynta haysashada Dhulka, waxayna intaas ka dib Maxakamadu miisaantay cadaymaha waxayna Go'aamisay in buuqa iyo faragalinta laga joojiyo Jawaab Celiyeyaasha rabashka ay sameeyeen Codsadayaasha ee ka dhashay Dhulka Jawaab Celiyeyaasha ee ay qoteen meesha laga saaro.

Kadib markii dhinaca kale ku qanci waayay Go'aanka ee ay Rafcaan u qaateen Maxakamada Saree e Gobolka Waqooyiga Wallo ayaa Maxakamada Sare ee Gobolka Waqooyiga Wallo oo ka duulaysa Rafcaanka ay ka soo gudbiyeen arinta markii ay doodsiisay labada dhinaca kadib islAmarkaasina ay Galka baadhay

waxay ka soo saartay Go'aan ay ku ku ansixisay goáankii Maxakamada Hoose. Hadaba codsigan Dibu Eegista ee horyaala Fadhiga dib u eegistu waxa uu ka dhashay codsatada oo ku qanci wayday Go'aanka Maxakamada Sare. hadaba nuxurka codsiga dib u eegistu waxa uu udhiganyahay sidan:-:- Jawaab Celiyeyaasha ma jiro caddymo ay soo dhawaysteen oo la xidhiidha gacan ku haynta mudasda dheer ee ay ku dacwoodeen marka laga reebo been abuurka ay sheegayaan ee ah Dhulka nala siiyay ayaan buuq iyo faro galin nalkagag hayaa waxaa kale oo Codsaduhu ku dooday in Dhulka uu gacanta ku hayay laga bilaabo 1983 TI muddo 26 sanadood ah, waana dhul aan ka bixiyay cashuurta dawladda , waxayna arintaasi kucadahay cadaynta haysashada Dhulka ee la isiiyay, hadaba aniga oo taas caddeeyay in Maxakamada Hoose ay ay cadaymahaygii siisay turjimaad gaar ah ayna burisa maaha mid haboon.

Inkasta oo ay Jawaab Celiyeyaasha sida ay usoo dhawaysteen Dacwadoodu ay ku caddeeyeen in uu dhulku ahaa dhul dan Guud ah oo uu gacantooda soo galay sanadkii 2009 Ti, balse ma jiro cadayn ay soo dhawaysteen oo ku saabsan sida uu dhalkani ugu soo galay gacantooda.

Markhaatiyaashaydu waxay sida ugu haboon ay u caddeeyeen in Dhulka markii hore la siiyay xaaskayga, markii ay dhimatayna aan anigu halkii ka sii waday Isticmaalka. Sidaas daraadeed, waxaan codsanayaa in la iga buriyo Go'aanka Maxakamada Hoose ay ku go'aamisay in buuqa iyo farogalinta aan ka joojiyo

Jawaab Celiyeyaasha marka la eego nuxurka jawaabtooda waxy sheegeen in Maxakamada Hoose Amarkii ay siisay qabalaha iyada oo laga duulayo in uu Maamulku dhulkii cabiray xaqiijiyay jawaabta warbixintaasina ay cadaynayso in Dhulkaasi anaga nala siiyay.

Waxaa 16 Tikimt 2009 TI noo cabiray oo na siiyay Dheskiga Dhulka ee Degmada,

injeerka Isticmaalka Maamulka Dhulka ee Qabaleega oo goob joog ah, iyada oo dawaynaha deegaanka iyo iyo codsataduna ay goob joog ahaayeen, waxaana Dhulka nalagu siiyay in aan maal-galino ee kaliya nalaguma siinin codsi aan gudbisanay oo qudha. Xiligaas codsatadu ma jirin wax diidmaha oo ay ka keentay. Sidaas daraadeed, waxaan codsanayna in nalaga buriyo cabashada Codsadaha oo Na loo anxisyo Go'aanka Maxakamada Hoose.

Jawaabta jawaabteeda ay uu soo dhawaystay codsataduna wuxuu ahaa nuxurkeedu mid sii adkaynaysa cabashadeeda Dibu Ee Maxakamadagista.

Iyada oo sababaha keenay Dacwadu ay tahay sida kor ku xusan, waxaan baadhitaan ku samayna anaga ka eegayna fikirka cad ee ah in Go'aanka Maxakamada Hoose uu yahay mid laga furi karo dib u eegis iyo inkale.

Sida aan baadhitaankayaga ka dib aan fahanay, waxay tahay sababta keentay dooda dhex martay laba dhinaca oo ah yaa Dhulka gacanta ku hayay inta aan sanadkii 2009ka la siinin Jawaab Celiyeyaasha iyo ka hor inuu haystay Codsaduhu Dhulka ama uu ahaa dhul la wada leeyaahy (dan Guud ah).. Dooda Haysashada Dhulka ee ay soo qaaday Maxakamada Degmadu Dhulka ay doodu ka dhalatay sababtay u qaadatay fahamka ah in uu dhulku sanadii 2009 TI uu ahaa mid la wada leeyaahy (dan Guud), waxay ka qaadatay warbixinta ay arrinta ku soo xaqiijiyay Xafiiska Maamulka Dhulka, in kasta oo ay warbixintu cadaynayso in Dhulka xaaska Codsadaha la siiyay hadana bulshada deegaanka intooda badani ay sheegaan inuu Dhulka ahaa mid la wada leeyaaha, iyada oo Codsaduhu uu ku dooday in Dhulka la siiyay sanadkii 1983 TI, balse cacdaynta haysashada (lahaashaha) Dhulka ay la soo baxeen taariikhdu 20 ginbot 2009, iyada oo warbixinta aysan muujinayn in Dhulkani yahay mid mar hore la siiyay.

Codsaduhu arinta uu ku adkaysanayo iyo fikirka la qaatay ee ah arinta in ay istaahisho in laga furo Fadhiga Dibu Eegista nuxurka laqaatay oo ah in codsatadau iyada oo sheegaysa 1983 in Dhulka la siiyay odaygeeda oo ay taasna cadeeyeen guddiga qaybinta dhulku iyo iyada oo ay jirto marxalad ay dadweynuhu ku cadaynayaan in dhulku dhul lawada leeyahay ahaa balse aanan taasi si ku haboon loo baadhin in ladhaho codsatadu dhulkii ay qoday waa buuq iyo faro galin in lana goáamiyo miyay haboon tahay mise wa maya

Asal ahaan Qodobka 40/4/ ee Dastuurka Fadaraalku waxaa si cad loogu xeeriyay in ay dhawrsantahay xuquuqda ay beeraleyda Itoobiya u leeyihiin in ay bilaash ku helaan dhul, isla markaasna aanan laga barakicin karin dhulkooda. Sidooklae Nuxurka qodobkani waxa laga fahmi karaa, in Dhulka uu haysto qof ku nool Miyiga amaa ah beerelay in si sharci ah looga siiyo mag-dhaw amaa dhul badal ah mooyee aanna laga baro bixin karin si rabitaankiisa ka baxsan

Dhulka inta aanan lasiinin qofkale oo beeroley ah waxay ahayd in marka hore qofkii gacanta ku hayay si uuna uga Bara kicin arinta loo baadho si taxadar leh oo ku haboon

Marka aan fiirino kiiskan waxay xubinhii gudiga qaybinta Dhulka ee sanadkii 1983 ay geedi socodkii baadhitaanka ay ku cadeeyeen in Dhulka uu ka dhashay marunka ahaa mid la siiyay Xaaska Codsadaha, sidooklanea xili danbaba ha noqote codsaha 20 ginbot 2009 T.I la siiya cadaynta haysashada Dhulkaas. Dhinaca kale waxay dadka deegaanku Xafiiska Maamulka Dhulka ee Degmada u sheegeen Dhulka uu ahaa mid dan Guud ah oo lawada leeyahay ka hor inta aan la siinin Jawaab Celiyeyaasha

In kasta oo Maxakamada Degmada si ay u kala saarto arinta Dhulkan ay doodu ka dhalatay, ay waajib ku ahayd inuu ku sameeyo baadhitaanka ku haboon, wuxuu isga oo kaliya ka duulaayo waraaqda cadaynta hayshada ee xiliga danbe uu qaatay

codsauhu u qaadatay fahamka ah inuu dhulku ahaa mid la wada leeyahay.

Cadaynta haysashada Dhulka ee xilga danbe la siiyay codsadahu sina uma xaqiijinayso in uu dhulku ahaa mid uusan lahayn Codsaduhu. Sababta oo ah, cosaduhu kuma doodaayo in cadaynta haysashada Dhulka la siiyay 2009 T.I, balse sababta Dhulka ay doodu ka dhalatay ay doodi uga dhalanwayday waxay tahay maadaama oo uu Dhulka ku jiro gacanta Codsadaha uuna ka mid yahay haysashadiisa sharciga ah. Iskasta oo cadaynta haysashada Dhulka la siiyay xili danbe 2009 T.I balse Wuxu Dhulkani ahaa mid la siiyay 1983 TI iyada isga oo qodanaaya, la siiyay cadaynta haysashada Dhulka sanadkii 2009 TI.

Sidaas daraadeed, haddii uu dhalkani ay ka dhalatay doodani uu yahay mid uu Codsadaha la siiyay uuna isticmaalaayay laga bilaabo sanadkii 1983 T.I, hadada si loo ilaaliyo xuquuqda uu u leeyahay in aan laga barakicin Dhulka uu haysto, waxay haboonayd in marka hore la ogaado waxa sanadkii 2009 T.I ka hor Dhulkan loo isticmaali jiray, Dhulka uu xadka la wadaago, amaa in markhaati baadhitaan loo soo dhaweeyo dadka leh Dhulka oo labada dhinac la waydiiyo su''aalaha isweydaarka waxaana haboonayd in fursad la siiyo.

Marka laysku soo aruuriyo, in kasta oo ay haboonayd in Go'aanka la bixiyay lagu saleeyo macluumaadyada ku saabsan waxyaabaha loo adeegsanayay Dhulka ka hor inta aan sanadkii 2009 TI la siinin Codsadayaasha, cida manaafacaadsanaysay, ilaa goorma, ayay isticmaalayeen arimahan ayay ahayd in suáalo laga keeno iyada oo aan taasi la shiilin in hadana Go'aan la gaadho iyada oo la laga duulaayo sanadkii 2009 TI ayaa Codsadaha la siiyay cadaynta haysashada,lana dhaho dhulku wuxuu ahaa dan Guud, waxay tahay mid aan aad looga fiirsan, waxayna ka hor imanaysaa arimaha ku cad Dastuurka Federaalka Qodob kiisa 40(4) kaasi oo sicad u ilaalinaya xuquuqda beeralayda iyo in aanan dhulkooda laga barakixin. Maadaama Go'aankani yahay mid aanan si ku haboon looga baaraan deign oo ka hor imanaya xuquuqdaasi Sare ku xusan

waxaa la arkay in uu leeyahay **khladaad sharci oo aasaasi ah** islAmarkaasina loo baahanyahay in Galkan dib loo baadho Go'áana looga soo saaroi. Sidaasi darteed waxaan Go'aaminay sidan hoos ku xusan:

GO'AAN

1. Waxaa siwaafaqsan Qodobka 348/1, ee HXMI loo buriyay Go'aankii ay Maxakamada Degmada Awadla ay 24 Tahsas 2010 ka soo saartay Galka Tirsigiisuyahay 14292, iyo Go'aankii ay Maxakamada Sare ee Woqooyiga Wolo ay 14 Magabit, 2010 ay ka soo saartay Galka tirsigisu yahay 23130, iyo Go'aankii uu Fadhiga Dibu Eegista ee Maxakamada Guud ee Dawlad Deegaanka Amxaarad uu 28 Hamle 2010 T.I uu k asoo saaray Galka Dibu Eegista ee Tirsigiisu yahay 03-21728.
2. Galkan waxaa dib loogu celiyay Maxakamada Degmada Awadhla ee Dawlada Deegaanka Axmaarada iyada oo Maxakamdu raacaysa qodobka 343(1) ee HXMI si ay Dhulka doodu ka dhalatay ee sharaxaadisu kor ku xusan tahay, u xaqiijiso in uu ahaa dhul beereed uu Codsaduhu gacanta ku hayay iyo in uu ahaa dhul dan Guud ah oo lawada leeyahay ka hor intii aanan la siinin Jawaab Celiyeyaasha si arintaasi loo xaqiijiyana waa in markhaati loogu yeedho dadka haysta dadka haysta Dhulka xadka la leh ama in lagu sameeyo baadhitaanka loo arko in uu arinta ku haboonyahay iyada oo la raacayo qaab ku haboon, sida ku haboona go'' aan ha looga soo saaro.
3. Dhinacyadu ha is qabana kharashka iyo khasaraha. Galkana inta la xidho, ha lagu celiyo xasuus dhawrka

Galkan waaa la xidhay, waxaana lagu celiyey Xusuus Dhawrka

Waxaa Go'aanka ku jira saxeexyada 5 Garsoore oo qarsoon

Summad Galka: 169648

Taar: Sane 21/2011 T.I

Garsooreyaasha: 1 Birhanu Amenew

2. Beiwket Belay

3. Endashew Adsane 4. Haile Negash

5. Itmet Asefa

Codsade:- Mudane Tashale Wako

Jawaab Celiyeyaasha:- 1. Mudane Neguse Bonte

2. Mudane Abdala Botntu

3. Mudane Negawa Badaso

4. Mudane Abu Negawa

5. Mudane Gamachu Kayimo

Kaddib markii aan baadhitaa ku samaynay Galkan waxaa ka soo saarnay Go'aankan

XUKUN

Iyada oo bilowga doodan dib uu eegistu uu sabab u ahaa arinta ku saabsan Xuquuqda Isticmaalka Dhulka Miyiga, wayna ka bilaabantay Maxakamada Degmada Arsi Nagele ee Dawlad Deegaanak Oromiya. Galkani wuxuu tilmaamayaa in ay Maxakamadan ku doodadayeen Codsadaha hadda ee dacwoodaha ah iyo Jawaab Celiyeyaasha dacawaysaneyaasha ah.

Marka la soo gaabiyo nuxuruka Dacwada ee uu Codsaduhu ku soo oogay dacwaysaneyaasha waa sidan xigta:- Dacwaysanayaashu iyaga oo aan xaq u lahayn waxay dhul beereedka ay baaaxadiisu dhantahay 2da heckaaar, ee Xadkiisu ku xusan yahay Dacwadooda oo ku yaala Qabalaha Hawile ee ka tirsan Degmada Amararo ee Gobolka Arsi ay laga bilaabo sanadkii 2004 TI ay iiga haystaan si aan haboonayn, sidaas daraadeed, waxaan makmadda ka codsanayaa in laii xukuma in Dhulkaas ay iiga kacaan,ayuu Dacwadiisas soo dhawaystay.

Maxakamadu waxa ay Dacwad iyo dood kasta oo ku saabsan Dhulka, sida ku xusan Bayaanka Isticmaalka Dhulka Miyiga ee Dawlad Deegaanka Oromiya ee Tirsigiisu yahay 130/1990 faqraddiisa 16 iyada oo ka duulaysa ay Maxakamadu doodda 1aad ee Dacwada ay marka hore la hor geeyaa Odayaashii qabalaha, waxayna Maxakamadu ay Amar ku bixisay inuu keeno , natiijada dhex dhexaadinta Odayaashii.

Maadama ay codsadayaashu keeneen natiijada dhex dhexaaddinta Qabalaha Gudadro, balse Dhulka Dacwooduhu uu ku yaalo qabalaha Qabalha Mararo Hawilo, loogana baahnaa inuu natiijada dhex dhexaadinta uu ka keeno qabalahan balse uu keeni waayay, waxay Maxakamadu ay xidhay kiiskan iyada oo u taas ku sababaysay inuu Dacwooduhu xaq u leeyahay inuu soo dhawaysto Dacwadiisa marka uu la yimaaddi natiijada dhex-dhexaadinta Odayaashii qabalaha Mararo Hawilo.

Codsaduhu isga oo ka soo horjeeda Go’aanka wuxuu Maxakamada Sare ee Gobolka Galbeedka Arsi u gudbistay tabashadiisa, isla markaasna Maxakamada Dawlad Deegaanka Oromada u gudbistay Fadhiga dhegaysig dhacwada Dibu Eegista sida ay u kala horeeyaan, waxay diideen isla markaasna buriyeen Dacwada Codsadaha.

Dawacwadda Dibu Eegista waxaa soo gudbistay Codsadaha si ay Maxakamaddu u buriso maadaama uu Codsaduhu tabasho ka muujiyay Go'aankan.

Codsaduhu wuxuu taariikhdu markii ay ahayd 20/05/2011 u soo gudbiyay waraaq Dacwad ah oo ka kooban 2 bog. Nuxurka Dacwada Dibu Eegista Codsaduhu waa sidan xigta:-

Maadaama ay Jawaab Celiyeyaashu ay dhul baaxadiisu tahay 2 hektaar ku haystaan si sharci daro ah, iyada oo ay odayaashu deegaanku taariikhdu markii ay ahayd 3/05/2011 TI iyo 26/2/2010 TI ay Odayaashii deegaanku noo xaqiijyeen, balse ay Maxakamada Degmadu ay xidhay faylkii iyada oo aan dhegaysanin aanan kala saarin labada dhinac bidixi iyo midig, waxa loo baahanyahay in la buriyo, maadaama oo ay ku dhaqaaqday khaladaad sharci oo aasaas.

Maadaama oo markii baadhitaan lagu sameeyay Dacwada uu soo gudbistay la ogaaday in ay haboonayd in lagu eego Fadhiga Dibu Eegista, waxaa Maxakamada horteeda yimid oo ka dooday Jawaab Celiyeyaasha marka laga reebo Jawaab Celiyaha 2aad.

Jawaab Celiyaha 2aad waxaa loo diray waraaqda Maxakamada ee yeedhintaanka, balse markii uu ka soo jawaabi waayay, waaxaa sida uu Galka Dacwadu caddaynaayo la dhaafay xuquuqdii uu u lahaa in uu keeno jawaab qoraal ah.

Waxyaabaha keenay kiiskan oo kooban waa sida xigta:- Anagu qodobka baadhitaankiisa gacanta lagu hayo ee dooda u dhaxaysay labada dhinaca ee sababta u ah in la soo gudbiyo Dacwada Dibu Eegista ee aan fiirinay shuruucda ku haboon arinta waxaan u baadhnay sida hoos ku xusan:-

Sida laga dheehan karo waxyaabaha ku jira Galka Dacwada wuxu Codsaduhu Maxakamada ka codsaday Garsoorka loo go'aamiyo in Jawaab Celiyuhu uu ku soo wareejiyo haysashada Dhulka isaga taas ku sababaynaaya in ay si sharci dara ah ay

kaga haystaan Dhulkas.

Maxakamada Degmada oo kiiskan eegtay Dacwada uu soo gudbistay Codsaduhu, kaddib markii uu codsaday in Odayaal ay Dhulka uga saaraan Jawaab Celiyeyaasha, balse ay taas diideen Jawaab Celiyeyaashu, waxayna Odayaashii ay Maxakamada ka codsadeen in ay Go'aan ka gaadho. Maxakamadu iyada oo ka duulaysa Bayaanka Isticmaalka Dhulka Miyiga ee Tirsigiisu yahay 130/99 qodobkiisa 16aad ee xeerinaaya in dooda ku saabsan Isticmaalka Dhulka Miyiga ay tahay in marka hore ay dhinac yada doodu ka dhaxayso ay dhex-dhexaadiyaan odyaasha qabaleegu, sidaas daraadeedna waxaa Codsadaha ay Maxakamadu Amar ku siisay inuu Dacwadii uu soo raaciyo natiijada heshiisiinta Odayaashii arinta galay, balse maadaama oo uu soo raaciyay natiijada heshiisiinta ee Odayaashii Qabalaha Goduro, balse goobta uu Dhulka muranku ka taaganyahay ay ka tirsantahay Qabalaha Mararo Hawilo, Codsaduhu uu soo dhawayn waayay natiijada heshiisiinta Odayaashii Qabalahan, waxay Maxakamadu ay soo saartay go'aan ay ku burisay Dacwada.

Hada iyada oo laga eegaayo dhinaca sharciga su'aalaha in laga jawaabo u baahan waxay yihiin in marka Dacwada ku saabsan haysashada Dhulka Miyiga loo gudbinaayo Maxakamadu ay sharci tahay in la soo raaciyo natiijada heshiisiinta ee Odayaashii qabaleega iyo in ay san sharci ahay.

Marka laga hadlaayo xuquuqda Isticmaalka Dhulka, dhaxal wareejinta xuquuqdas iyo wixii la halmaala ee lagu xeeriyay dastuurka Jamuuriyada Dimoqraadiga Fadaraalka Itoobiyada, waxaa iyda oo laga duulaayo mabadiida ku xusan dastuurka ee xuquuqahan la soo saaray Bayaanka Maamulka iyo Isticmaalka Dhulka Miyiga ee Tirsigiisu yahay 456/97, kaas oo faahfaahinta shuruucda lagu hirgalinaayo ay soo saarayaan Dawlad Deegaanadu sida ku xusan qodobka 17aad ee Bayaankan

Arimaha ku saabsan doodaha la xidhiidha xuquuqda haysashada Dhulka Miyiga,

maadaama oo lagu dadaalaayo in dhinacyada ay doodooda ku xaliyaan heshiis murankooda, balse haddii taas lagu dhamayn waayana wuxuu qodobka 12aad ee Bayaanku uu xeerinayaa in Go'aan ay ka gaadhayaan Odayaal ay labada dhinaca ay xusheen ama si waafaqsan waxyaabaha uu xeerinaayo sharicga Maamulka iyo Isicmaalka Dhulka Miyiga.

Sida uu dhigaayo qodobka 17 ee Bayaanka ay soo saartay Dawlad Deegaanka Oromiya ee hadda shaqeeya ee Tirsigiisu yahay 130/99, waxaa qodobkiisa 16aad ee xeerinaaya nidaamka xalinta khilaafaadka iyo is fahamwaaga Dhulka, uu xeerinayaa in marka hore lagu xalinaayo heer Qabale iyada oo la adeegsanaayo odayasha oo labada dhinaca lagu heshiisiinaayo, iyada oo cidda ku qannci wayda natiijada heshiisiinta odayaashu ay Dacwadeeda oo ay ku lifaaqday Go'aanka Odayaashii ay u gudbin karta Maxakamada Degmada.

Waxaa nuxurka xeerkan laga dheehan karaa in siyaabaha habka loogu dadaalaayo in in arrinta lagu dhameeya tahay ay tahay marka uu jiro heshiis labada dhinaca ah, aysan jirin in si qasab ah dooda Dhulka uu gudbiyo qabaluhu amaa Dacwad lagu soo gudbiyo Go'aan laga soo saaro, ka dibna laga dhigo in Rafcaan loo gudbiho Maxakamada dastuuriga ah oo lagu xidho nidaam xidhan

Sidaas daraaded arinta gacanta lagu in marka hore lagu xaliyo heer Qabalee amaa ay labada dhinaca ay door bidaan arintooda ku xaliyaan Odayaal dhamaqeed waxaa ay tahay wado u furan oo loo ogolyahay labada dhinac ee doodu ka dhaxayse ee maadama oo ay san ahayn qasab, waxaa Maxakamada Degmada Arsi Nagele Go'aanka ay ku burisay Dacwada uu soo gudbistay Codsaduhu iyada oo cuskanayna inuusan Dacwadiisa soo raacin natiijada heshiisiinta Odayaashii iyo iyada oo Maxakamada Sare ee heerarka kala duwan ay ansixyeen Go'aan, maadama oo ay tahay **Khaladaad Sharici**, waxaan ogaanay in ay haboon tahay in la saxo.

GO'AAN

1. Waxaa sida ay u soo kala horeeyaan lagu buriyay Qodobka 348(1) ee HXM:
   i. Maxakamada Degmada Arsi Nagele Go'aanka ay ka gaadhay Galka uu Tirsigiisu yahay 3642 taariikhdu markii ay ahayd 29 Ginbot, 2010 TI;
   ii. Maxakamada Sare Galbeedka Arsi fadhigii ay ka yeelatay Galka Tirsigiisu yahay 38111 taariikhdu markii ay ahayd 3dii Hamle, 2010 TI; iyo
   iii. Maxakamada Sare ee Dawlad Deegaanak Oromiya fadhigeeda Dibu Eegista ee ay ku ansixisay.
2. Maxakamada Degmada Arsi Nagele waxaa looga baahan yahay in Dacwada uu soo gudbistay dacwoodaha Hoose (Codsadaha) ay qaabisho, sidaas daraadeed ay dib u dhaqaajisu faylkii la xidhay ee Tirsigiisu ahaa 34612, waxaan anaga oo cuskanayna habraaca X.M ee Tirsigiisu yahay 34 (1) aan ku soo celinay si labada dhinac ay u doodsiiyo ayna uga soo saarto Go'aan sharci ah. (ha la qoro)
3. Dhinacyadu ha is qabana kharashka iyo khasaraha.
4. Falylkan waxaa la xidhay, ha lagu celiyo xasuus dhawrka

Galkan waaa la xidhay, waxaana lagu celiyey Xusuus Dhawrka

Waxaa Go'aanka ku jira saxeexyada 5 Garsoore oo qarsoon

Summad Galka: 22719

Taar: 14 Tikimt 2000 T.I

Garsoorayaal: 1. Cabdulqaadir Maxamed

2. Hagos Woldu

3. Tagane Getaneh

4. Tashagar Garbre Silase

5. Berhanu Amenew

Codsade: Wakaalada Shaqada iyo Horumarinta Magaalada iyo Horumarinta Dhulka Badalka, ma soo xaadirin

Jawaab Celiye: Mudane Naga Dubale- Waxaa u jooga

Qareenkiisa Mudane Mokonen Kidane

Kaddib markii aan baadhitaa ku samaynay Galkan waxaa ka soo saarnay gooan

XUKUN

Galkan waxa uu Fadhiga Dibu Eegistu ku yimid kadib markii cabasho dib u eegis ah laga soo qaatay Go'aanka ay Maxakamada Sare ee Fadaraalku, taariikhdu markii ay ahay 5tii Tahsas 1998 T.I, ay ka soo saartay Galka Rafcaanka ah ee tirsiguusu yahay 35928, oo ay ku ansixisay Go'aankii ay gaadhay Maxakamada Darada 1aad ee Fadaraalka, isaga oo codsaduhbu sheegay in Go'aanadaasi ay leeyihiin **Khaladaad Sharci oo Aasaasi** ah sidaas daraadeedna uu cabashada uu soo qoray 15 Tir 1998 kuna dalbaday in laga saxo.

Iyada oo ka duulaysa codsiga Dibu Eegista Maxakamada dib u eegistu kadib

markii ay Galka baadhay si ay u xaqiijiso sharcinimada Go'aanka Maxakamada Hoose ay ku tirtireen buuga iyo xujada lahaanshaha Guriga iyo in Go'aankani noqdo mid dhaqan gala waxay Maxakamadu yeedhis u samaysay Jawaab Celiyeyaasha Sare ku xusan waxayna dhagaysatay dooda labada dhinac waxayna Guud ahaan baadhis ku samaysay Galka iyada oo arinta la eegaysa dooda iyo Go'aanka Maxakamada Hoose iyo sharciyada arinta xidhiidhka.

Arintani waxay ka kacday guriga lambarkiisu yahay 1304, 1305, 1306 ee tirsiga xujadiisuna tahay 32221, tirsiga buuga laashuhuna yahay 17/3/91, kaas oo ku yaala Xaafadda 20aad ee Degmada 17aad ee Magaalada Addis-Ababa, ayaa kaddib markii la xaqiijiyay inuu leeyahay Jawaab Celiyuhu waxaa Galka Tirsigiisu yahay 503/88 iyo Galka fulinta ee Tirsigiisu yahay 90/91 lagu wareejiyay loo yaadhaha. Markii Jawaab Celiyaha lagu wareeejiyay kaddib ayay Codsadaha iyo masuuliyiinta Xafiiska, oo Dacwadii Maxakamada Hoose kala ahaa dacwaysanayaasha 1aad iyo kan 2aad ay meesha ka saareen caddaymaha lanaashaha, waxayna ku doodeen in lagala xisaabtamo falkan sharci darada ah ee ay ku kaceen, in laxajiiqiyo dhukumentiyada. Kaddib markii ay Maxakamada Hoose ay baadhitaanku samaysay waxay soo saartay Go'aanka ah in la siiwaado fulinta caddaymaha lahaasha iyada oo ficilada Codsadaha ku tilmaantay mid sharci dara ah.

Hadaba hadii la isla akhriyo codsiga Codsadaha iyo Go'aanka Maxakamada Hoose su'aasha aasasiga ah ee u baahan in laga jawaabo waxay noqonaysaa:: Hadii Maamulku ay buriyaan cadaymmaha lahanshaha Dacwad Malaga keeni karaa? Kadibna Maxakamadu iyada oo suáalahaasi sharciga ah ka duulaysa lana eegaysa shuruucda ku haboon ayay Galka badhitaan ku samaysay.

Assal ahaan waxaa Xafiiska codasaha ah xuquuq sharci ah loo siiyay inuu bixiyo isla markaasna uu buriyo buuga lahaanshaha. Sida uu Jawaab Celiyuhu xaqiijiyay waxaa cad in la buriyay xujiyada guriga ee tirsigeedu yahay 32221 iyo buuga lahaashaha Tirsigiisu yahay 17/3/91 ee guriga lambarkiisu yahay 1304. 1305, 1306. Madaama oo cidda samaysay burinta ay tahay cida la siiyay awood sharciyeed, hada iyada oo ay sidaas tahay, ayaa waxaa la ogyahay haddii ciddaasi Go'aanka ay bixisay ay wax ka dhamanyihiin, cidda sixi kartaa ay tahahay cidda Maamulka ah iyada oo la raacayo sida ay isugu xigto Awooda Maamulku.

Iyada oo ay taasi sidaasi tahay, waxaa Jawaab Celiyaha looga baahanyahay inuu la yimaaddo caddaynta ah in uu hantida uu ku dacwoonayo ku leeyahy xuquuq. Arintan cadaynteedana rabitaank iyo damac shaqsi ahaaneed ka sokow waxaa lagu cadeynkaraa cadayn sharci oo qaadasho leh sida laga garankaro qodobka 33/2/ ee Habka Xeerka Madaniga Itoobiya.

Hadaba arintan doodeeda sharci in kasta oo ay ka bilaabantay Maxakamada Hoose, haddana si qodo dheer Maxakamadu umaysan fiirin kiiskan. Arinta ganacanta lagu hayo, haddii uu Codsaduhu uu buriyo cadaymahah lahaashaha Jawaab Celiyaha, waxaa Jawaab Celiyaha looga baahanyahay inuu gacantiisa uu soo galiyo cadaymaha sheegaya inuu leeyahay guryaha la soo sheegay. Isga oo aan haysan dhumentiydan cadaymaha ah, Maxakamada kama codsan karo in ay u xukunto in lasiiyo dhukumentiyda cadyamaha ah.

Sidaas daraadeed, sida ku cad qodobka 1195/1/ ee Habka Xeerka Madaniga Itoobiya waxaa xuquuqda iyo faiidada Jawaab Celiyaha xaqiijinaaya, cadaynta lahaashaha ee ay bixiyaan xubanaha maamulku. Jawaab Celiyaha hadda isaga oo aan haysanin cadaymo ay xaqiijiyeen xabnahani, sharciga hortiisa lagama aqbali karo inuu soo gudbistao dacwo isaga oo aan haysan caddaymaha guryahan sababta u ah doodooda.

Sidaas daraadeed iyada oo ay caddahay in Dacwada Codsaduhu aanay soo buuxinin waxyaabahah uu dhigaayo qodobka 33/2 ee Habka Xeerka Madaniga Itoobiya, in inta ay taasi baal marto oo ay Maxakamadu toos u gasho Dacwada ayna doodsiiso dhinacyada islAmarkaasna buriso caddaymihii uu Codsaduhu siiyay Jawaab Celiyaha maadaama aanay sharciga ku haboonayn. Waxay Maxakamadu burisay Go'aanadii ay Maxakamada Hoose ku aqoonsadeen sharcinimada cadaymihii ay maamulku buriyeen maadaamo oo ay leeyihiin **khaladaad sharci oo aasaasi** ah.

GO'AAN

1. Waxaa la buriyay Go'aankii ay Maxakamada Darajada 1aad ee Fadaraalku, taariikhdu markii ay ahayd 25 Tikimt 1997 T.I, ay ka soo saartay Galka uu Tirsigiisu yahay 30467 iyo Go'aankii ay Maxakamada Sare ee Fadaraalku, ka soo saartay Galka Tirsigiisu yahay 35928, taariihdu markii ay ahayd 5 Tahsas 1998.
2. Dhinacyadu ha is qabana kharashka iyo khasaraha. Falylkan inta la xidhay ayaa lagu celiyay xasuus dhawrka.
3. Galkan waaa la xidhay, waxaana lagu celiyey Xusuus Dhawrka

Waxaa Go'aanka ku jira saxeexyada 5 Garsoore oo qarsoon

Summadda Galka <u>37725</u>

Taar 6 Timit 2001 TI

Garsoorayaal:

1. **Cabdiqadir Maluamade**
2. **Tadese Yirga**
3. **Almaw Wala**
4. **Sagaye Asmamaw**
5. **Cali Maxamed**

Codsadayaasha: 1. Bakale Deribsa-- Wuu jogaa

2. Marwo Desta Kafane-- waxaa jooga qareenkeeda

Jawaab celiye: Yemikir Barihu---Waxaa jooga Tesfaye Bakale oo ah qareenkiisa

Kiiskan waxa uu Fadhiga Dibu Eegista soo gaadhay kadib markii cabasho dib u eegis ah laga keenay Go'aanada Maxakamada Darajada 1aad ay soo saartay 24 Magabit 2000 ee Galka Tirsigiisu ahaa 10906 iyo Amarkii ay Maxakamada Sare ay ka soo saartay Galka Tirsigiisu yahay 6658 22 Miyasiya 2000 TI taasi oo lagu sheegaqay in Go'aanadasi ay leeyihiin khaladaa sharci oo aasaasi ah laguna codsaday, in laga saxo.

XUKUN

Kiiskan waxaa sabab u ahaa Jawaab Celiyaha oo ku dacwoonaya in Codsadayaasha iyo laba qof oo kale iyo Xafiiska Shaqada iyo Horumarinta Magaalada Addis Ababa, isaga oo Go'aanka ku qanacsan balse dooda iyo Dacwaduba ay ku saabsantahay xukun fulinta.

Nuxurka doodu waxay ahayd in Jawaab Celiyaha soo jeediyay su'aal ah in loo fuliyo heshiiskii iibka, waxay ay dulucda doodu ahayd in Codsadayaasha hadda 18kii Megabit 1984 TI ay heshiis loo qoray Marwo Belaynesh Kasaye ku iibsadeen Guri ku yaal Degmada 17 ee Magaalda Addis-Abab, Xaafadda 12/13 oo lambarka guriguna yahay 552, maadaama aan Gurigan laftiisa ka iibsaday Marwo Beleynash Kasaye taariikhdu markii say ahayd 21 Ginbot 1989 TI, waxaan soo gudbisanayaa Dacwad ah in guriga laygu soo wareejiyo, Magacaygana lagu badalo.

Dhinaca kale, Belaynesh Kasaye iyo cideedu waxay Dacwad ku fureen codsadeyaasha sare ku xusan. Codsadayaasha haddu waxay ku doodeen si sharci ah oo rasmi ah Murwo Belaynesh noogama iibin guri, sababtoo ah Jawaab Celiyuhu wax heshiis ah noolama galin.

Arintana waa sababta keentay in Dacwadu ka bilaabanto Maxakamada Sare, kaddibna waxaa Rafcaan loogu gudbiyay Maxakamada Guud ee Fadaraalka, wuxuuna Fadhiga dhegaysiga Rafcaanka ee Maxakamada Guud cadeeyay in aysan jirin sabab uu Jawaab Celiyuhu wax ku waydiiyo Codsadayaasha, wuxuu Galka tirsigi yahay 76720 ay 13 Hidhar 1999 ay go'aamisay in aysan ku qasnabayn in fuliya sida uu yahay heshiisku.

Jawaab Celiyuhu wuxuu Dacwad xukun fulin ah ka furtay Maxakamada Darajada 1aad ee Federaalka Maxakamaduna waxay xustay in Go'aanka Maxakamada Sare ee ay burisay Maxakamada Guud uu yahay Galkii Go'aanka ay ka soo saartay ee

Tirsigiisu ahaa 25552 taariikhdu markii ay ahayd 29 Magabit 1998 TI, halka la Amray in la fuliyo Go'aankana 2 Maskaram 1999 sida kucad Go'aanka laga soo saaray Galka Tirsigiisu yahay 15170, waxayna Maxakamadu bixisay Amar ah in ay fulintu soconayso.

In kasta oo uu Codsaduhu Rafcaan u gudbistay Maxakamada Sare, waxay Maxakamadu tirtirtay (cancelation) Rafcaankii iyada oo raacaysa qodobka 337 ee HXMI. Codsadayaashu waxa soo gudbisteen Dacwada ah in Go'aankii Maxakamada Sare ee ahaa in sida heshiiska ku cad loo fuliyo ay burisay Maxakamada Guud. Jawaab Celiyuhuna wuxuu ku doodaya in Marwo Balaynesh ay ka iibisay guri iyada oo aysan jirin wax xuquuq ah oo ay Balaynesh ku lahayd guriga, sidaasna waxaa lagu xaqiijiyay in heshiishku aanu dhaqangal ahayn. Sidaasi daraadeedna wixii hada ka danbeeya in nalagu Amro in aan fulino go'aan la buriyay oo aanan la ansixin waa mid leh **Khaladaad Sharci oo Aasaasi ah**

Jawaab Celiyuhu wuxuu dhiniciisa xusay kuna dooday in ay Maxakamadu burisay arinta Marwo Belaynaesh, iyada oo leh in Marwo Belaynesh aanay la dacwoon karin Codsadayaasha balse Maxakamadu maysan burin Go'aankii Marwo Belaynesh iyo cideeda ay ka soo saartay, waxaan faylka Dacwada fulinta ah aan ku furay Marwo Belaynesh iyo Mudane Gulilat Mola ee kuma furin Codsadayaasha, sidaas daraadeed Go'aanada ay soo saareen Maxakamada Hoose malaha khaladaad sharci oo aasaasi ah. Waxay codsadayaashu soo gudbisteen dooda in arinta laga soo saaray Amarka fulinta ay tahay mid ay si cad u burisay Maxakamada dhagaysiga Rafcaanku, sidaas daraadeed Amarka fulinta ee la bixiyay waa mid leh khaladaad sharci oo aasaasi ah. Hadaba maadaama oo sida ay arintani kutimiday Fadhiga Dibu Eegista iyo doodeeduba ay tahay sidaasi ayaa anaguna Galka aan baadhis ku samaynay

Sida aan ku ogaanay baadhintaanka aan ku samaynay Galka, Dacwada fulinta ee

Jawaab Celiyuhuhu ka soo gudbiyay Guriga waxa ay tahay in codsadeyaashu ay Balaaynesh iyo Ato Gulilat ay ka iibiyeen, kadibna ay Balaynash Aniga iga sii iibisay, halka ay Codsadeyaashu ku doodeen ma haysano heshiis iib oo uu sharcigu dhaqan galiyay oo aan la galnay Marwo Belaynesh Kasaye iyo Ato Gulilat, cidda fulinta lagu qasbaayo in ay guriga ka baxaan oo ay ku wareejiyaan Jawaab Celiyaha maaha Marwo Belaynesh ee waa codsadeyaasha.

Marka arinta aan gacanta ku hayno fiirino, Jawaab Celiyeyaasha Marwo Belaynesh iyo Mudane Gulilat ee uu Jawaab Celiyuhu leeyahay Aniga ayay iga iibiyeen waxa ku qoran gurigaas Codsadayaasha. Hadii xataa la keeno dood ah loo yeedhayaasha iyo Marwo Belaynesh waxay guriga ka iibsdaeen Codsadayaasha waxay taasi cakiskeeda codsadayaashu ku doodeen in aysan jirin heshiish kala iibsi guri oo sharcigu taageerayo oo u dhexeeya Marwo Belaynesh iyo Codsadayaasha

Hadaba Anaga oo ka duulayna nuxurka ah cida la leeyahay guriga ayay iibsadeen ee ah Belaynesh iyo Gulilat Mola majirto wax Dacwad ah oo heshiishkaa hanaloo fuliyo ah oo ay Maxakamadu cadaysay

Sidaasi daraadeed iyada oo ayna jirin heshiish u dhexeeya Marwo Belaynesh iyo Codsadayaasha oo sharcigu xoojinayo in ay xuquuqdoodii gacan ku haynta faraha ka qaadaan maadama aanan la cadayn jiritaanka heshiis arintaasi ku qotoma, in Jawaab Celiyuhu ku dodo guriga waxaa iga iibiyay Belaynesh Kaasaaye iyo cideeda islamrkaasina ku andacoodo in heshiishkaasi loo fuliya arintaasi kaliya inay codsadayaashu hantidooda ku wareejiyaan Jawaab Celiyaha sabab loo go áamiyaa majirto.

Qodobkan waxay Maxakamada Guud Fadhigeed dhagasiga Rafcaanku uu taariikhdu markii ay ahayd 25 Miyasiya 1999 uu Go’aan ka soo saaray Galka Tirsigiisu yahay 25551. Maxakamada Guud ee Fadaraalku waxay markii ay Go’aankeeda si cad ugu xustay in Go’aanka Maxakamada Sare ay ka soo saartay

heshiiska iibka ee la yidhi waxaa lala galay Marwo Belaynesh uu yahay mid aan haboonayn, waxay intaas ka dib ay Maxakamadu Go'amisay in wixii la xidhiidha Dacwadu uu Jawaab Celiyuhu ka soo gudbiyay codsadayaaha aysan codadayaashu ku qasbanayn in ay fuliyaan sida uu heshiisku dhigaayo.

Haddii Jawaab Celiyuhu leeyahay Go'aanka laga soo saaray Rafcaankii Dacwada ee uu xalka ku khalad ayuu lahaa waxay u baanahayd in uu kaliya kiiskiisa u dhaweeysto Fadhiga Dibu Eegista, balse ma ahayn inuu Marwo Belaynesh kaligeed Dacwad ku bartilmaameedsado si uu ula wareego Guriga tabaha uu u raacay Dacwaduna waxay ahayd mid aan haboonayn

Maxakamada Darajada 1aad gacanta ku haysay Dacwada xukun fulinta isaga oo si cad u sheegay in aanay haboonayn in codasadayaahu ay gurigooda ku wareejiyaan Jawaab Celiyeyaasha balse Maxakamada Sare ee Federaalku iyada oo baal maraysa Go'aankaasi la bixyay sabana u samaynaysa in xukun fulin ku dacweysanuhu yahay Marwo Belaynesh Kasaye Amarna ku bixisay in codsadayaashu ay gurigooda ku wareejiyaa waxay taasi tahay mid qiime tiraysa Go'aanka Maxakamada Rafcaanka ee Maxakamada Guud islamarkaasina burinaysaa waxayna baal marsantahay habsocodka Garsoorka ee aasaasiga ah iyo isu qoolanaanta ama kala Sareynta Maxakamadaha. Sidaasi daraadeed waxaan Go'áaminay in Amarkaasi leeyahay **Khaladaad Sharci oo Aasaasi** ah, sidoo kalena Maxakamada Sare ee arinta a loogu soo gudbiyay Rafcaankuna in ay tiraahdo Amarkani malaha khalad sharci oo aasaasi ah islamarkaasna buriso Rafcaanka Codsadayaasha waxaan Go'áaminay in iyaduna ay leedahay **Khalalad Sharci Oo Aasaasi Ah.**

GO'AAN

1. Ha loo qoro Amar ah in laburiyay Galka Tirsigiisu yahay 109064 ee ku taariikhaysan 24 Megabit 2000 Amarka laga soo saaray Dacwadii u dhaxaysay Jawaab Celiyaha iyo Marwo Belaynesh Kasaye iyo Mudane Gulilat Mola ee nuxurkiisu ahaa maadaama oo aanan la burin Go'áankii ay Maxakamadu noogu xukuntay in codsadayaashu ay uga baxaan guriga kuna wareejuiyaan Jawaab Celiyaha iyo go'aankii ay Maxakamada Sare taariikhdu marki ay hayd 25 Miyasiya 2000 TI Galka Tirsigiisu yahay.
2. Haloo qoro Amar ah in Go'aan Maxakamada Guud ay ka soo saartay Galka Tirsigiisu yahay 25551 taariikhdu markii ay ahayd 25 Miyasiya 2000 TI maadaama aanan la burinin waxna laga bedelin uu yahay Go'áan lagu qasban yahay islamarkaasina leh dhaqangal sharci. Sisdaasi daraadeed codsadayashu kumaqasban in Go'aankaasi fuliyaan oo ay gurigooda uga baxaan kuna wareejiyaan Jawaab Celiyaha.
3. Kharashka iyo khasaaraha dhinacyadu ha is qabaan
4. Galkan waxaa lagu Go'áamiyay cod buuxa taariikhdu markii ay ahayd 6 tikimt 2001

Galkan waaa la xidhay, waxaana lagu celiyey Xusuus Dhawrka
Waxaa Go'aanka ku jira saxeexyada 5 Garsoore oo qarsoon

Summad Galka: 181206

Taariikh: Meskerem 27, 2013 T.I.

Garsoorayaasha: - 1. Itmat Asefa

2. Sahay Mankir

3. Nuradin Kedir

4. Malaakuu Kaasaaye

5. Istibal Andualem

Codsade: Ato Hailu (Abiy) Sisay

Jawaab Celiyayaal: Xeer-ilaalinta Guud ee Dawlada Deegaanka Oromiya

Galkan ayaa u mudaysnaa in lasoo baadho. Baadhis haboon kadibna Go'aanka hoos ku xusan ayaa laga soo saaray.

XUKUN

Kadib marku Codsaduhu u soo dhawaystay Cabashada ku taariikhaysan Hamle 11, 2011 T.I. Fadhiga Dibu Eegista taasoo uu ku sheegay in ay Maxakamada Hoose iska oo aanu geysan iskuday dil sidu inuu geestay inta laga dhigay danbile iyo go'aan ciqaab khaladaad sharci oo aasaasi leh lagu fuliyay waa cabasho in laga saxo.

Codsadaha Cabashada dib-u-egista oo Maxakamadu Hoose ee Finfine agarkeda ee gobalka gaarka oromiya Maxakamada Sare ee ku tala Jawaab Celiye (Dacwada oo

aha) u ku soo ogay Codsadaha (oo ah dacwaysane) inuu ku xad gudbay X.C. Qodobka 27 (1) iyo 540 si ku talagal ah in dil qof into ku fikiray Sanadafa Beka Qabaleega 02 dhibanaha la yidhaahdo Alemayehu Mulatu aya Baastoolad u ku riday Caloosha kaga dhuftay sidaasna waxyeelo soo gaadhay waxaa u naftiisu ku badbaaday dhakhtar u helay sidaas ayu u geestay Faldambiyeed iskuday dil ayu ku dacweeyay.

Hadaba Codsaduhu ku dooday in uuna gaysan Faldambiyeed Xeer-ilaalinta ayaa soo dhawaystay Maragyada in loo dhageesto sidaas awgeed Maragyadu waxay sheegeen inuu Codsaduhu soo galay Daaska si sigaar uga iibsado ee uuna kana baxay wax Baastoolad inu haystay kama muuqan marku iga baxay waxyar kadibna waxaan maqlay cod xabadeed markaan baxayna waxaan arkay nin Caloosha oo dhanka bidixda ah xabadi kaga dhacday oo si dhacaya iyo Codsadaha into yidhi waan ku dhuftaye ka si socda intaas ayuu sheegay. Maraga 2^{aad} codka markaan maqlay maadaama Banjarletaayir iga soo horjeedo waxaan moodayay cod Taayirka Gaadhiga, markaan soo baxay Codsadaha oo si ordayya iyo shaqsiga waxyeelodu soo gaadhay oon ordi karin markaan ku iri maxaad noqotay? Wuxu ii sheegay inuu Codsaduhu Baastoolad ku dhuftay Caloosha dhanka bidixda wuna ii tuusay is taagii kariwaayay wuna dhacay intaas ayuu sheegay kadibna inu Codsaduhu isdifaaco ayaa la Amray.

Codsadaha hadda oo ah Eedaysanaha waxaa qaalkiisa u ku bixiyay in aynan wax colaad ah ka dhexaynin shaqsiga dhibka u soo gaadhay sida caadi ahaan inay Daaskiisa into tago sigaar, biyo iyo waxi la mid ah ka iibsan jiray sidaana u dhaafi jiray maalintaasi lamid ah inu ka soo ibsado inta u tagay Baastoolada waxaan ka saartay Jeebka Hoose ee Kaabordiga waxana is idhi dhinaca bidixda u wareeji waana usoo wareejiyay markaasay iga fakatay xabadu kuna dhacday shaqsiga waxyeelodu soo gaadhay inaan ku dhuftay markaan arkayna inta Caloosha qabtay kadibna maadaama ay qoyskiisa joogan waxaan ka baqay in ay ii dilaan sidaas ayaan uga tagay ayu yidhi.

Maraga Codsaduhu wuxu yidhi maalinta inaan biyo soo iibsado ayaan u tagay Codsadaha ayaan agtiisa taagna Codsaduhuna Baastoolad kasoo bixinayay Kabordhiga Jeebkiisa midig uuna wareejinayay qaybta bidixda ayay xabad dhacday waxyeelo ka soo gaadhay shaqsiga Codsaduhuna laha maan ku dhuftay laakin inta gudaha galay shaqsiga waxyeelo si ku talagal ah uguma dhufan xabada ayu yiri.

Intaas kadib Maxakamada Go'aanka ay bixisay Maragyada Xeer-ilaalnitu Codsaduhu shaqsiga waxyeelo soo gaadhay inuu Baastoolada Caloosha kaga dhuftayba ayay cadeeyeen, cadaymaha dhakhtarkuna waxay sheegeen shaqsiga waxyeelada soo gaadhay xabada lagu riday in ay Mindhiqirkayar meelo kala duwan ka daloolisay islamrkaana Midhiqirka weyn qaybta Sare iyo Caloosha iyo Beerka xubkooda inay wax yeeshay, hase ahaate Maragyada cosadaha ee isdifaacu meesha Baastooladu ka soo wareejinay iyo falku marku dhacay kadib Codsaduhu waxa ka muuqata cida waxyeeladu soo gaadhay iyo inkale waxay bixiyeen wax iska hor imanaya sidaas awgeed ayay Maxakamadu ugu dawaaqday inuu Codsaduhu yahay dambile islamrkaana ku xukuntay lix (6) sano oo xadhig ah. Hadaba Codsaduhu wuxu ku qanci waayay go'aan kaas wuxuna Rafcaan u qaatay Maxakamada Guud ee Deegaanka, Maxakamaduna iyada oon Jawaab Celiyaha u yeedhin ayay Rafcaankii burisay Maxakamada dib-u-egistuna ee Deegaanka Go'aanka Maxakamada Hoose wax khaladaad sharci oo aasaasi ah ay galeen majirto ayay tidhi codsigiina way ka diiday.

Cabashada Codsaduhu usoo dhawaystay dib-u-egista wuxu ku sheegay shaqsiga waxyeeladu soo gaadhay aqoon wax dhaafsan oo colaad ama nacayb oo ka dhexey inaynan jirin Maragyaduna iyaga oon si haboon wax u sheegin sabab aan u dila iyadoon jirin inay Xeer-ilaalnitu soo qaado X.C. Qodobka 540 falkan aan galay wax la socon kara ahayen iyo falka iyo cadaymaha la soo dhawayay-na waa mid Qayra

Masuulnima ah Dambile inta la yidhi in la igu ciqaabo iskuday dil waxay baalmarsantahay ujeedada Sharciga Ciqaabta Codsaduhu Baastoolada Faldambiyeedka ku gaystay Dawlad ha loo xareeyo Amarka lagu bixiyay waa sharci darro. Go'aanka Maxakamada Hoose inta la iga buriyo Amarka Baastoolada Dawlada ha loo xareeyointa la iga qaado ha la ii soo celiyo in la ii go'aamiyo ayaan codsanayaa.

Hadaba Go'aanka Codsadaha Dambiilenimada Ciqaabta sida uu u dhacay falku iyo X.C. Qodobka 23 (2) si la iskula xaqiijiyo Cabashadan waa la eegi kara inta la yidhi, kadib Jawaab Celiyaha Jawaabtiisu cadaymaha Xeer-ilaalinta Maragyada iyo dokumatiga ah shaqsiga waxyeelo soo gaadhay in Caloosha xabad lagaga dhuftay ay tahay Baastoolada Codsaduhu waa la cadeeyay. Codsaduhuna arinta madafirin Go'aanka Dambiilenimada iyo Ciqaabta la siyay Codsadaha sharciga ayay waafasanyihiin sidaas awgeed wa in la ansixiyo. Codsaduhu inta uu cabbeyay Baastoolada inuu kolba meel la tagao munan dhaafirin islamrkaana Baastoolada iyado cabbaysan waxyeelada ay keensatay inu qaato iyo kolba meel ulatagay Faldambiyeedku shaqsiga waxyeelada uu soo gaadhay ku dhacay X.C. Qodobka 58 (2) (t) danbiyada nocan loo fuliyo in si ku talagal ah loo fuliyo ayay dhigayaan Maragyada isdifaac waxaa marag furay in ay dhacday qab qeramasuuliyad ah cadaymaha xeer ilaalint ma burin sidaas darteed Baastoolada Faldambiyeedka lagu fuliyay in la ii celiyo yuri wa arin aan sharci ahayn, islamrkaana wax khaladaad sharci ah ooy galeen Maxakamada Hoose majiro sidaas darteed waa Go'aanka la ansixiyo ayu ku dooday.

Codsadaha Jawaabta uu ka bixiyay Jawaabta Jawaab Celiyaha doodiisa ayu ku si adkeeyay.

Hadaba Guud ahaan dooda dhinacyadu waa sida aan kor kusoo aragnay. Sidaas awgeed barta aan Ismaandhaafka Dib-u-egista ha lagu eego iyo qodobadad sharciga ee khuseeya iyo waliba dooda Maxakamada Hoose sida hoos ku xusan ayaan usoo baadhnay:

Faldambiyaduku wuu dhacay ayaa la odhan kara marku buuxiyo sadexdan arimood ee ku xusan X.C. Qodobka 23 (2). Hadaba arinta uu Jawaab Celiyuhu Dacwada ku soo dhawaystay X.C. Qodobka 540 inu ku xadgudbay in la sameeyay Faldambiyeedka iskuday dil ah Codsaduhu xabad u ku riday in ay shaqsiga waxyeeloo soo gaadhay kaga dhacday Caloosha dhinca bidix, arintaana dhinacyadu way isla qaateen. Arinta shuruudaha ee Faldambiyeednimada ee ku xusan Qodobka X.C. 23 (2) way buuxisay Codsaduhu sidu u dhigayo qodobada X.C. 27 (1) iyo 540 waxaa lagu qaadi karaa Dambiilenimada marka Xeer-ilaalintu soo cadaysoo inu si ula kac ah ama talagal ah uu fuliyo Faldambiyeedka Codsaduhu.

Maxakamada Hoose Codsadaha inkasta oo ayy Go'aanka Dambiilenimadad ay ku siisay qodobada aan kor ku sheegnay Codsaduhu inu si ku talagal ah falkan u fuliyay wax cadaymo oo ka muuqda Go'aankaas majiro, Jawaab Celiyuhu Jawaabta u ka bixiyay Cabashada wuxu dooday maadaama Baastoolad cabbaysan u haystay Codsaduhu haddi waxyeelo ka timaado natijada waa inu qaato arintani waxay cadaynaysa sida u dhigayo Qodobka X.C. 58 (2) inu buuxiyo.

Sida u dhigayo Qodobka 58 (1) (T) ee X.C. Faldambiyeed toos ahayn in la yidhaahdo ishuday oo waxyeelo u gaysta arintuna inay sharci darro tahay laguna ciqaabi karo isaga oo oog, si ku talagal ah falku gaystay natijadiisa si cad inuu u qaato sidaan ku aragnay Qodobka 58 (1) (T) ee X.C.I. Arintan imika hayno Xeer-ilaalnitu siday ku sheegtay Jawaabteeda Codsaduhu isaga oo oog Baastoolada inay cabbaysantahay inuu watay ayay ku dooday. Islamrkaana Codsaduhu Baastooladu iyado cabbaysan inu

dhigay uuna ooga si taxadar la’aan ah inay cabbaysantahay inuu ku iloobay inu ku cadahay iyo inkale duwaanka Maxakamadaha Hoose kama muuqato.

Baastoolad inuu dhinac kasoo saaro una wareejinayay dhinaca kale inay cabbaysnayd lama cadayn. Codsaduhu Baastooladu inay cabbaysnayd isago oog marku kala wareejinay inu amaankeeda xaqiijiyo ayay ahayd taxadarna sameeyo haday waxyeelo keento iyo haddi kaleba natijada ka timid inuu qaato maadaama u shaqsiga waxyeelo gaadhsiyay Xeer-ilaalnitu arintaas si cad uma cadayn ama gunaanadka arintan Maragyadu waxaynan sheegin in gundhiga Codsaduhu shaqsiga waxyeeladu soo gaadhay Daaskiisa marku tagayay Baastooladu inay cabbaysnayd si cad loo ma cadayn. Hadaba falkuna si aan toos ahayn isaga oog inu u fuliyay Codsaduhu sida u dhigayo Qodobka 27 (1) iyo 540 ee X.C.I. in lagu siiyo Go’aanka Dambiilenimada Xeerka Ciqaabta Qodobadiisa 23 (2) iyo 58 (1) (T) sida ay dhigayaan go’aanku kuma salaysna sida awgeed na wa khaladaad sharci oo aasaasi.

Taa waxaa ka sii daran Codsaduhu Baastoolada marka u dhinac kabixinayay u dhinaca kale u wareejinayay inay cabbaysantahay iyo in kale inu xaqiijio ayay ahayd, isaga oon arinta samayn Baastoolada kala warejiiyay sidaas shaqsiga waxyeeladu soo gaadhay dhibaato u gaystay.

Hadaba falka waxyeelada keenay markaan eegno waa arin ku timid taxadar darro. Sidaas awgeed waxaan odhanayna falka Codsaduhu gaystay waa fal taxadar darro.

Codsadahu shaqsiga waxyeeladu soo gaadhay Baastoolada u ku riday hadaan nidhi taxadar darro falkuna dhimashoo unan keenin wa arin iskuday sidaas awgeed dhinacyadu sida u dhigayo Qodobka 27 (1) ee X.C.I. waa in loo eego. Falalka lagu gaysto daxadar la’aanta waa in loo arko iskuday inkasta oo argti noocaasi jirto hadana fal dambiyeed marka laleeyahay falku waa iskuday waa in rabitaan iyo talagal lagu fuliyay la cadeeyo. Shuruudaasina wadana kala duwan sharciyadooda falka taxadar darroda lagu fuliyo in yahay iskuday intooda badan looma aqonsana.

Qodobka 27 (1) ee X.C.I. qofkasta oo si ku talagal ah eeraygaas in lagu darro falku inu yahay ku talagal waxyeelo gaysanaya in la cadeeyo wa shuruudaha muuhimka u ah. Hadaba Codsadaha falka lagu soo dacweeyay in u yahay fal taxadar darro la'aan lagu fuliyay islamrkaana iskuday yahay cadaymaha kor kusoo aragnay ayaa sheegaya. Haba ahaate Maxakamada Hoose Gobolka Go'aanka Dambiilenimada iyo Ciqaabta ay ku riday Codsadaha ee waliba Maxakamadaha herarkood kala duwan inay saxaan ay ahayd balse aynan sixin Go'aamada Maxakamadaha Hoose Maxakamadu way burisay. Codsadaha lagu soo dacweeyay ee iskuday dil ah xorbu yahay ayay tiri. Sidaas darteedna xoryadiisa loo soo celiyo ayay go'aamisay.

Maxakamadaha Hoose Codsaduhu Baastoolada u falka ku fuliyay ay Go'aanka ay yiraadeen Dawladu ha la wareegto sharci khuseeya Go'aanka ku sheegeen kama muuqdo islamrkaana Jawaab Celiyuhu sabab lagu qanci karo oo lagula wareego umunan keenin sidaas awgeed Go'aanka hoos ku xusan oo cod aqlabiyad lagu Go'aamiyay:

GO'AAN

1. Iyadoo la cuskanayo Qodobka 195 (2) (t) (l) ee HXCI, waxaa la buriyay go'aamada iyo Amarada kala ah:
   i. Maxakamada Sare ee Gaarka ah ee Wareega Finfine Oromia Gal-dacwadeedka Lambarkiisu yahay 18862, ee ku taariikhaysan Ginbood 6 iyo 8, 2010 T.I. iyo;
   ii. Go'aanka Maxakamada Guud ee Lambarkiisu yahay 315181 lana qoray 4/10/2011 T.I. Amarka lagu bixiyay iyo;
   iii. Maxakamada Guud ee Deegaanka Fadhiga Dibu Eegista Galka Lambarkiisu yahay 311856 lana qoray 28/10/2011 T.I. Amarka lagu bixiyay ee la ansixiyay Dambiilenimada iyo Ciqaabta iyo;
   iv. Waliba Amarka la wareegida Baastoolada.

2. Codsaduhu maadaama u xor kayahay Dacwada lagu soo dacweeyay sidaas darteed haloo qoro Waraaq sidayna Asluubta (Amar sidayna ha lagu darro).
3. Baastoolada Lamabarkeedu yahay EP1291212 ee Turki ah in loo celiyo Codsadaha aya cod aqlabiyad lagu Amray.

Summad Galka: 37050

Taariikh: Tahsaas 30, 2001 T.I.

Garsoorayaasha: 1. Abdikadir Mahamed

2. Hirut Malas

3. Sagaaye Asmamaw

4. Albo Wali

5. Ali Mahamad

Codsade: Shambal Xuseen Cali - Qareenkiisa Madin Mahari

Jawaab Celiye: Xeer-ilaalinta Deegaanka Soomalida

Galkan inta lasoo baadhayba Go'aankan hoos ku xusan laga soo saaray.

XUKUN

Arintan oo ah Faldambiyeed Dil Culus ah ayay doodeedu ka bilabmantay Maxakamada Gobolka Jijiga kadib markay Xeer-ilaalnitu Dacwada ku taariikhaysan Maskaram 2, 1999 T.I. Cabashada Dacwada Codsadaha hadda sida u X.C.I. u dhigayo Qodobka 539 (1) (B) isaga oo ku xad gudbay Nahaase 26, 1998 T.I. Saacaduna ahayd 10ki subaaxnimo Xarunta Booliska Gobolka Jijiga horteeda Marxuumkaka la odhan jiray Yusuf Maxamad Silmi Codsaduhu Baastoolada watay in u hal (Rasaas) Xabad Madaxa kaga dhuftay saasina Marxumku u dhintay islamrkaana in sida loogu Ciqaabo ayay Dacwada gundhig uga dhigeen.

Jawaab Celiyaha hadda oo Eedaysane ahaa marki Dacwada loo akhriyay Maxakamada wuxu ka codsaday Qareen u dooda in loo fasaxoo. Maxakamaduna Eedaysanaha in Dacwada loo akhriyay in fahmay iyo in kale ayay waydiisay. Jawaab Celiyuna inu fahmay ayu Maxakamada u sheegay kadibna sidu falku u dhacay ayu sheegay laakin

Dacwada Cabashada Xeer-ilaalinta sida la igu dacweeyay umaanan fulin ayu yiri wuna dafiray

inta kadib Tikimt 8, 1999 T.I. oo balantu ahayd Xeer-ilaalnitu inay Markhaatiyadii soo dhawaystaan iyo Codsaduhuna inu Qareen soo dhawaysto marki la Amray xeer ilaanti markhatiyadi way soo dhawasan wayday Codsaduhuna Qareenki wu soo dhawaysan kadib Maxakamadu waxay amartay in mudo dambe loo qabto balse Xeer-ilaalinta ayaa diiday iyadoo ku candaconaysa in arintu dib u jitamayso sidaas awgeedna Maxakamadu dhinacayda ayay dhagaysatay tii oo Qareenka Codsaduhu maqanyahay iydoo tidhi dhinacyadu way ku heeshiyeen islamrkaana Qareenki Codsadaha oon joogin ayaa la dhagastay maragyadii Xeer-ilaalinta.

Hadaba Codsaduhu Faldambiyeedka u fuliyay Xeer-ilaalnitu si oon shaki ku jirin ayay u cadaysay inta la yidhi ayaa isdifaac la yiri. Kadibna isdifaac inta la yiri ayaa hadana layiri xuquqdisii isdifaaca wuu isk daayay. Hadana Xeer-ilaalinta ayaa Markhaatiyo dheeri ah loo dhagaystay. Marka kadibna Maxakamada Sare Gobolka Jijiga ee arint eegaysay markay baadhitaan samaysay Codsadaha Qodobki Xeer-ilaalnitu ku soo eedaysay maadaama lagu helay inta ay dambilenimadiisa ku dhawaaqday ayay ciqaab dil ah ku xukuntay. Marka kadib Jawaab Celiyaha eega ayaa Maxakamada Guud u qaatay Rafcaan Maxakamada Guud dhinacyada doodsiisay kadib Go'aankii lagu riday Codsadaha ee Dambiilenimada iyo Ciqaabtaba si buuxda u ansixisay. Hadaba Cabashada Codsaduhu ka codsaday Fadhiga dibu Eegista isaga oo ku qanci waaya Go'aamada Maxakamada Hoose in laga badalo weeye.

Miyasiya 4, 2000 T.I. Codsaduhu cabasho ka kooban 7 boog ayu uso dhawaystay isaga oo leh Go'aamada Maxakamadaha Hoose qaladaad sharci ayaa la iga galay isaga oo sababtanana faafaahinaya markaan soo koobno waa sidan: in xuquqdaydi in Qareen ii doodo la iga diiday islamrkaana Faldambiyeedka saan u fuliyay aan la igu soo cadayn, xuqudaydi cadaymoo aan isku difaacana aan la ii siin tii oo wakhti ku fula

aan la ii siin. Tii oo habka dhagaysi dheeri ah tii oon la marin in go'aan dambilenimana la igu riday kaaso Qodobka loo adeegsaday ku haboonayn. Iyo waliba Ciqaabta la igu xukumay ee dilka waa tu sharci aan ku salaysnayn. Hadaba faahfaahinta aan soo dhawaystay tii oo laga duulayo go'aamada Maxakamadaha Hoose in la iga buriyo ayaan codsanayaa. Hadaba Cabashada Codsadaha Maxakamadu markay baadhay in Fadhiga dib-u-egist lagu eego ayay go'aansatay kadibna xerr ilaalinta deegaanku Jawaabta ku taariikhaysan Hamle 9, 2000 T.I. ayay kusoo Jawaabeen. Codsaduhuna Jawaabta Jawaab Celiyaha eek u taariikhaysan Hida 10, 2001 T.I. ayay ku soo Jawaabeen.

Geedi socodka markaan waa sidaan kor kusoo sheegnay. Fadhiga dib-u-egistu marku dhincyada doodoodi eegay lana eegay Go'aamada Maxakamada Hoose iyo qodobada sharciye khausaya sida hoos ku xusan ayu usoo baadhay:

Siday baadhistu tahay Codsadaha waxa lagu soo dhaweeyay Dil Culus tii oo sidaa la ogyahay isaga oon Qareen matalayn in dooda la sameeyo go'aanna laga soo ma haboonyahay mise ma haboona? Barta ismandhaafka ee tahay in la baadho taasaan u aragnay.

Sidan ka fahanay dooda Galkan Codsaduhu Maxakamadaha Hoose qaalku ku bixiyay Maskaram 4, 1999 T.I. islamrkaana maalintaas Qareen matalaya ma jogin, hadana Tikimt 8, 1999 T.I. Xeer-ilaalnitu inay soo dhawaysato markhaatiyada islamrkaana Codsaduhuna dhawaysto Qareenka tii oo loo balamiyay maalinti balantu gaadhay na Codsaduhu Qareenka ma soo dhawaysan. Balamihii ku xigayna Xeer-ilaalnitu markhatiyadi way soo dhawaysatay Codsaduhuna sababta uu usoo dhawaysan waayay ayuu Maxakamada u sheegay kadibna maragyadi Xeer-ilaalinta iyo Qareenkuba bari yimaadaan u sheegtay balse arinta Xeer-ilaalnitu intay diiday ayaa maragyadi xeer ilaalint la dhagaystay tii oo Qareenka Codsaduhu joogin taasiina way caddahay.

Hadaba sideedaba Cadaalada Maamulka Ciqaabta arinta la hayo dadka lasoo dacweeyo sidu sheegayo Dastuurka Federaalka sheegayo wadamada xuquq lagu sheegay siday cadaynayaan macnoohooda iyo siday u yaalaan markaan eegno waxaa ka fahmayna inay haboontahay in lagu dhaqmo. Inta waxaa ka Sareeya ay Ciqaabta Maamulka Cadaalada dadka lagu qabto ee la dacwaynayo xuquqdooda Dastuuriga in loo xurmeeyo loona ilaaliyaa wa waajibaad dastuuri ah sida u dhigayao Qodobka Dastuurka 13 (1) sida ka cad sidaas darteed dadka la dacweeyo xuquqdooda Dastuuriga ah in la xurmeeyo in la ilaaliya waa waajibaad saran garsoorayaasha. Sidaas darteed arinta in la garab maro ma haboona. Ciqaabta Maamulka Cadaalada garsoorayaashu markay waajibaad ka soo baxaan bulshaduna geedi socod cadaalad ah ayay helaysa inta waxa dheer geedi socodka natijadiisu si xurmo leh ayaa loo qaadan. Nidamka sharciga ee Dastuuriga in la ilaaliyo waxay la mid tahay xuquqda muwadiniinta la xurmeeyay lana ilaaliyay, waajibaadka cida ka soo waxa weeye bulshada dhexdeeda xurmadoodu hoos ayay u dhacaysaa sidaas darteed xuquqa biniaadminimada Dastuurka lagu sheegay in la xurmeeyo lana ilaaliyo waa waajib.

Maamulka Cadaalada Ciqaabta qofka la hayo ee la dacweeyay geedi socodkiisa bilow ila dhamaad xuquqa biniaadminimada Dastuurka lagu cadeeyay waxaa kamid ah xuquqda in Qareen wakiisho hadaba xuqudan Codsadahani oo ahaa Eedaysanaha Maxakamadahada Hoose inu qabsado Qareenku rabo ama haddu awood waayana maadaama cadaaladu waxyeelo ku noqonayso xaaladan oo kale markay tiimaado in kharash Dawlada Qareen lagu qabta inay tahay waxaa cadaynayaa Qodobka 20 (5) ee Dastuurka, hadaba Qodobka ujeedadiis waxaan ka faahmayna edaysanuhu Qareenku rabo inu doorto ee u isleeyahay waxbu ii qaban su u keensado waa in la siiyo mudo ku filan oo aqligal ah inta waxaa dheer xuquqdan inay jirto in Fadhiga lagu cadeeyo. Intaasoo kaliya ma’ahine Eedaysanaha Qareen karti leh inu wakiisho waa la xaqiijiyo. Arintaasina wa arin u taala Maxakamadaha oo dhan. Sidaas darteed in Qareen la wakiisha waa xuquq muuhim ah inay Dastuurkaan ka fahmayna.

Hadaba arinta gacanteena ku jirta markaan usoo noqono Codsadaha haddu geed socodka bilow ila dhamaad xuquqdiisi Dastuuriga ahayd ee Qareenku dooni inu wakiisho wakhti ku fulan ee aqligal inu ku keensado Maxakamada Hoose umana ilaalin. Taana waxaan ka fahmayna geedi socodka dooda sidaas darteed xuquda Dastuuriga ah ee Codsadaha tii oo loo ilaalin Go'aanka Dambiilenimada iyo Ciqaabta lagu riday waxa kujira qaladaad sharci oo ah aasaasi sidaas darteedna in la buriyo inay haboontahay ayaan garanay. Go'aanka hoos ku xusan na waan bixinay.

GO'AAN

1. Iyadoo la cuskanayo Qodobka 195 (2) (t) ee H.X.C.I, waxaa la buriyay Gomaada kala ah:
   i. Maxakamada Sare ee Gobolka Jigjiga Galka Lamabarkiisu yahay 001/99 lana qoray 1/2/1999 T.I. iyo
   ii. Go'aanka Maxakamada Guud ee ku taariikhaysan Tir 23, 2000 T.I. ee Go'aanka lagu ansixiyay Dambiilenimada iyo Ciqaabta dilka ah.
2. Codsaduhu Qareenku doorto xuquuqda Dastuuriga ah waa in loo dhowro
3. Codasadaha tii oo loo ilaalinay Qareenka u doorto ee xuquda Dastuuriga ah garsoorayaal arintan aan horey u galin in ay dib u eegaan ayaa haboon si ay go'aan uga soo saaraan.
4. Ha lagu celiyo Maxakamada Sare ee Gobolka Jigjiga hana loo qoro.
5. Galkan waa la xidhay waxana lagu celiyay xasus dhawrka

5 Garsoore oon saxeexoda la akhri karin ayaa ku jira.

Summad Galka: 186919

Taariikh: Taahsaas 27, 2013 TI

Garsoorayaasha: 1. Ma'asa Ashanaafii

2. Itmat Asafa

3. Sahay mankir

4. Nuradin Kadir

5. Malaakuu Kaasaaye

Codsade: Ato Birhanu Moolaw

Jawaab Celiye: Xeer-ilaalinta Deegaanka Tigrayga

Galkan ayaa u muudaysnaa in baadhista kadib in Go'aan laga soo saaro. Waana laga soo saaray Go'aankan hoos ku xusan.

XUKUN

Kadib marka Cabashada dib-u-egista ee Codsadaha kuna taariikhaysan 22/3/2011 TI u soo dhawaystay kuna saabsana Go'aanka Lambarkiisu yahay 07568 lana qoaray 24/10/2011 TI kana soo baxday Dawlada Deegaanka Tigrega Maxakamada Degmada ee Magaalada Shiraaro laguna Go'aamiyay sida u dhigayo x.c.i Itobiya Qodobka 670 inuu Codsaduhu yahay Dambiile ee lagu go,aamiye ciiqaabtisa taariikhdu markay ahayd 2/11/2011 T.I. Codsadaha hadda kahor marar badan in la xukumay, xukunadaas u wax ku qaadan waayay sidaas darteed waxa lagu xukumay xadhig dhan 18 sano xadhig adag ah in lagu ciqaabo. Go'aankaas oo ay ansixiiyeen Maxakamadaha herarka kala diwan ee Deegaanka Tigrega Go'aankaas oo khaladaad sharci leh in laga saxo ayaa Cabashada dib-u-egista uu soo dhaweystay.

Galkan oo khuseeya dood ciqaab ah ayaa laga bilaabmay Deegaanka Dawlada Deegaanka Tigrega Maxakamada Degmada ee Magaalada Shiraaro.

Jawaab Celiyaha iyo codsada hadda oo Maxakamada Hoose aha Eedaysanaha 1aad Jawaab Celiyaha Dacwada usoo dhawaystay Maxakamada Hoose nuxurkeedu aha: - taariikhdu markay ahayd 3/7/2011 T.I. qiyaasti saacadu markay ahayd 5:30 Magaalada Shiraaro Qabaleega Muse gobta la yidhaado Salaam Blanet Hotel agagaarkiisa ayaa shaqsigan la dulmiiyay ayaa Eedaysanaha 1aad intu xaga dambe kaga yimid ayuu qoorta ku qabtay u horay u tuuray ayuu kalabaxay 400 Birr oo kujirtay jeebka surwaalkiisa iyo mobile lagu qimeeynayo 2,200 oo Birr. Edaysanayaashan waxay ku xad gudbeen X.c. Qodobka 32 (1)(B) iyo Qodobka 670 iyaga oo ku fikiray faa'iido aynan lahayn inay helaan. Codasadaha hada oo ahaa Eedaysanaha 1aad Maxakamada Hoose markii loo akhriyay Dacwada ee inuu fahmeen la xaqiijiyay danbiga inuu galin iyo inkale wuxuuna ku Jawaabay ma galin Maxakamadu waxay dhagaysatay markhaatiyada Xeer-ilaalinta kadibna waxay Amartay inay eedaysanayaaashu is difaacaan.

Codasadaha oo ahaa edaysanihi 1aad ee Maxakamada Hoose isdifaasi cadaymo isdifaaca uu soo dhawaysteen waana loo dhagaystay. Kadib Maxakamadu markay eegtay dooda dhinacyada iyo cadaymahana baadhitaan kusamaysay eedaysanayaashu cadaymaha usoo dhawaysteen difaaca waxba kamaynan difaaciin sidaas awgeed X.C. Qodobka 32 (1) (B) iyo 670 siday dhigayaan Dambiilayaal loo aqonsaday Ciqaabtana sida u dhigayo awaamirta xadaynta Ciqaabta ee lambarkeedu yahay 02/2006 tiyo lagu salaynayo Eedaysanaha 1aad sadex sano oo xadhig ah in lagu ciqaabo Codsadahana maadaama hadda kahor sadex diwaan oo kala duwan fal dambiyeed lagu ciqaabay cadayn muujinaysa ayaa lasoo dhaweeyay sidaas darteed X.C. Qodobka 188/1/2 sida u dhigayo fal dambiyeedka cusub waa in looga qabto Ciqaabta halka ugu Sareysa.

Sidaas awgeed Codsadahan marar badan maadaama la ciqaabay cashirna u ku qaadan waayay dambiga hadda Qodobka dambinimada lagu aqoonsaday wuxu dhigaya Ciqaabta lagu ciqaabayo ay gaadhayso xadhig dhan 15 sano marka la labo jibaaro wuxu noqonaya xadhig dhan 30 sano. Balse markaan eegno awaamirta xadaynta Ciqaabta u lambarkeedu yahay 02/2006 maadaama unan ku jirin xadhig dhan 30 sano waxa hoos loogu dhigay xadhig dhan 25 sano. Kaasoo ku dhacaya irkan ka 37aad fal dambiyeed kan oo si wada jir ah loo fuuliyay ay ahayd 1 darajo in la culaysiiyo balse irkanka 37aad wax ka sareeya unan jirin Codsaduhuna yahay maamule qoys ayaa 1 darajo oo Ciqaabta loo fuudaydiyay. Sidaas awgeed waxa irkanka 36aad ayaa lagu saleyay oo waxana lagu xukumay 18 sano xadhig adag ah Go'aankaasoo heerarka kala duwan ee Maxakamadaha Deegaanka Tigregu ay ansixiiyeen.

Hadaba Cabashadan dib-u-egistua loo soo dhaweystay Go'aankaas oo lagu qanci waayay khaldaad sharci baa ku jiraan la yidhi ayay khusaysa iyada oo markhaatiyada Xeer-ilaalinta aynan cadayn in fal dambiyeedkan la sameeyay in Codsadaha la yidha isdifaac sax ma'aha, codsaduhu markhaatiyada usoo dhawaystay isdifaaca waxay cadeyeen goobtu uu ka dhacay fal dambiyeedku Codsaduhu inunan joogin balse waxay maragayadi sheegeen tiyonan misaanka la saarin la yidha waa dambile sax ma'aha, arinta la yidhi hadda kahor Codsaduhu marar kala duwan ayu dambiyo galay. Sidaas darteedna ciqaabtiisa haloo culaysiyo waxay kahor imanaysa Xeerka ciqaab qodobadisa 84 iyo 188 (1) (2) sida ay dhigayaan sidaas awgeed Maxakamadaha Hoose iyaga oo leh waa dambile caadaystey ayaay Ciqaabta ku culaysiiyeen khaldaad sharci oo aasaasi maadaama ay sameeyeen waxan codsanaya in dib-u-egis lagu sameeyo oo la iga saxo.

Hadaba iyado laga dulayo Cabashada codsadha go'aanadi Maxakamadaha Hoose Ciqaabta ay ku rideen sax inay tahay iyo inkale si loo soo baadho ayaa Fadhigan loo

hor keenay. Jawaab Celiyahan yeedhitaan inta loo sameeyay si ay dhinacyadu qoraal ku doodeen.

natijadiisa si buuxda u qaatay ayaa la cadeeyay. Samayntaa fal dambiyeedkana gundhigisu wuxu ahaa aar goosi sedaxdooduba si wadajir ah ayay uga qayb qaateen una fuuliyeen. Marxuumkaka marki madaxa lagaga dhuftay waxyeeladii kasoo gadhay ayu u dhintay. Arinta waxa lagu cadeeyay cadanti dhakhtar. Sidaas darteed Jawaab Celiyeyaasha Qodobka dambilenimadooda in lagu saleyoo ay tahay waa X.C. qodobada 32 (1) (B) iyo 539 (1) (B) siday dhigayaan. Sidaas awgeed, Maxakamada Guud ee Deegaanka Fadhiga Rafcaanka Jawaab Celiyaha 2aad iyo Jawaab Celiyaha 3aad ku talagalkoodu Marxuumkaka inay waxyeelo yar u gaystaan umbay ahayd tii oo leh Qodobka lagu soo dacweeyay X.C. 539 (1) (B) ma'ahine Qodobka 556 (2) (B) weeye. Jawaab Celiyaha 1aad dambilenimadisa Qodobka in lagu saleeyo ay tahay X.C. Qodobka 540 islamrkaana ay ku xukuntay 9 sano. Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad sida ay iskugu xigaan 6bilood iyo 8 bilood ay ku kala xukuntay Go'aankaas in qaladaad sharci ee aasaasi ku jiro ayaan ka helnay, sida darteedna xukunkan hoos ku xusan ay cod aqlabiyad leh ku gaadhnay.

GO'AAN

1. Maxakamada Guud ee Deegaanka Amxaarada Fadhiga Rafcaanka galka Lambarkiisu yahay 0218981 lana qoray megabit 14, 2010 T.I. go'aan kasoo baxay iyo waliba Go'aanka lagu ansixiyay ee Maxakamada Guud ee Amxaarada Fadhiga Dibu Eegista galka lamabarkiisu yahay 78191 lana qoray Sane 28, 2010 T.I. Amarka lagu bixiayay sida u dhigayo qodobaka H.X.C.I. 190 (2) (T) waa la buriyay.
2. Deegaanka Amxaarada Maxakamada Sare ee Baahir Dar iyo agagaarkeeda galka Lambarkiisu yahay 0404796 lana qoray Hidar 29, 2010 T.I. Go'aanka lagu siiyay Dambiilenimada iyo Taahsaas 4, 2010 T.I. Go'aanka lagu siiyay Ciqaabta sida u dhigayo Qodobka 195 (2) (T) (2) waa la ansixiyay

AMAR

Booliska federaalka, ka booliska deegaanada iyo ka booliska Addis Ababa ba Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad meeshi laga arkaba inta la qabto waa in loo gudbiyo Maamulada Asluubta ay qusayso in lagu wareejiyo ayaa la Amray.

Maamulada asluubta ay qusayso Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad boolisku marka uu idin keeno Jawaab celiyihii 1aad oo asluubta ku xidhan, sedaxdab intay xidhnaayeen tii oo xisaabta lagu daro Go'aanka ciqqabta inaan ayaa la Amray. Waraaqda ha loo qoro.

Galkan maadaama u go'aan helay waa la xidhay waana la celiyay.

Sadex garsoore oo saxeexooda aan la akhri karay ay kujira

Fikir ka duwan

Anaga oo ah garsoorayaasha ku xusan lambar 4 iyo 5 dooda Galkan aqlabiyada go'aanakan lagu gaadhay saxibadayada shaqada fikirkooda aanaan ku heeshiin sababta aan kaga duwanaanay sidan hoos ku xusan:

Galkan doodaha dhinacyadu soo dhawaysteen Qodobka u weyn ee doodu ka taagantahay Jawaab Celiyeyaasha Qodobka lagaga dhigay dambileyaal ee ciqaabtiisana lagu xukumay ee ay gaadhay Maxakamada Sare ee Baahir Dar iyo agagaarkeedu waa xukun culus oo dil ah, ama Maxakamada Guud ee Deegaanka Fadhiga Rafcaanka Go'aanka uu wax kabadalay Jawaab Celiyaha 1aad dil caadiya, Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad ku talagalkoodu maadaama u ahaa waxyeelo yar inay gaadhsiiyaan hadaba Maxakamada Hoose Baahir Dar iyo agagaarkeedu Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad Marxuumkaka godobti kadhaxaysay iyadoo sedaxdaba X.C. 32 (1) (B) iyo 539 (1) (B) sida ay dhigayaan ayay ku xad gudbeen intay tiri ayay ku xukuntay fal dambiyeed Dil Culus inay geesteen. Jawaab Celiyeyaashuna waxay Rafcaan qaateen cabashadoodi iyadoo ka duulaysa dhinacyada doodoodina baadhitaan kusamaysay, Maxakamada Guud ee Fadhiga Rafcaanku cadaymihii Xeer-ilaalnitu u

gudbisatay falka sidi loo fuliyay cadaymaha Xeer-ilaalinta waxa ka misaan batay cadaymihii isdifaaca sidaas darteedna Qodobka dambile nimada oo ku habooni Jawaab Celiyaha 1aad waa X.C. Qodobka 540 iyo Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad talagalkoodu wuxu waxyelo fudud. Saasay Maxakamadu go'aanki Maxakamada Sare wax kabadal ugu sameysay islamrkaana Maxakamada Guud ee Deegaanka Fadhiga dib-u-egistu na marku baadhitaan sameeyay wuxu ansixiyay go'aanki Maxakamada Rafcaanka.

Sida kor lagu xusay Maxakamada Guud ee federaalka Fadhiga dib-u-egistu fal dambiyeedka Jawaab Celiyeyaasha lagu cadeeyay dambilenimadooda in lagu iyada haboonayd doodu waxay ka taagnayd kala qeebsanaanta sabab u ah Jawaab Celiyeyaashu fal dambiyeedka ay galeen cadaymaha ay Xeer-ilaalnitu Maxakamada Hoose cadaymaha usoo dhowaysay waxay xaqiijiyeen Qodobka Dambiilenimada ee lagu saleyn karo Jawaab Celiyaha 1aad iyo Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad Marxumku inu Jawaab Celiyaha 2aad falkaasina Jawaab Celiyaha 2aad niyadjab ku noqotay si u arinta uga aar gutona ka codsaday Jawaab Celiyaha 1aadi cabsi galin ku sameeyo Marxuumkaka, talagalkuna aha cabsi galin kadibna hal dhagax oo lagu tuuray madaxa kaga dacay taasina dhimashda Marxuumkaka saasay diwaanada Maxakamadaha Hoose cadaynayaan.

Sida u dhigayo Qodobka 539 ee H.C. marka la leeyahay qofba qof dilay oo fal dambiyeed fuliyay dambilenimadiisa waxaa lagu sheega inta unan fulin fal dambiyeedka dilka ah kahor talagalkiisu muxuu ahaa? Talagalkiisu inu natijada ka gaadho diryaargarowgiisu muxuu ahaa? Qalabku isticmaalay, sababta fal dambiyeedka inu fuliyo ku kaliftay iyo sida u dilka u fuliyay, ama sida naxariisdarada fal dambiyeedka uu u fuliyay, tii oo arimahaas xisaabta lagu darsanayo ayu Qodobkaasi dhigayaa. Hadaba sida Qodobkaasi dhigayo geestaha fal dambiyeedku ku talagal oo qudha ma'ahine inu diyaar sidu u dililaha qorshe hore inu u sameyay iyo

sidu qorshihis aha inu fuliyay waa in la xaqiijiyo. Hadaba eedaysanayaashu markay falka fulinayeen inay shurudahan buxiyeen inay Xeer-ilaalnitu cadayso ayay ahayd.

Dhinaca kale fal dambiyeedka waa la fuliyay in la yiraado, cida falka fulinaysa inay fal dambiyeedka fulisoo talagal keeda iyo fal dambiyeedka la fuliyo natijada ka dhalata inay talagala ahayd iyo in kale laakin dambi fuliyuhu wuxu ku talagalay iyo marku falku dhacay natijada ka timid inunan masuul ka'ahayn waxa sheegaya qodobada 23, 32 (2) iyo 58 ee X.C.

Hadaba Galkan aan hayno ugu horaan inu cadeymaha masuuliyadiisu waxay saarantahay Xeer-ilaalinta cadaymuhu soo dhowaystana Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad inu Jawaab Celiyaha 1aad Marxuumkaka inu u diloo talagalkoodu ma'ahayn. Jawaab Celiyeyaasha 1aad falka u geestay Marxuumkaka inu dilo talagalkiisu ma'ahayn ee siday ku yiraadeen Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad inu u cabsiyo inay ahayd cadaymuhuu cadeynayaan.

Hadaba haday sida tahay, Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad Marxuumkaka Jawaab Celiyaha 1aad inu u dilo inay ku talagaleen tii oo la cadayn, kaba si daran Xeer-ilaalnitu cadaymaha ay soo dhowaysatay Jawaab Celiyaha 1aad talagalkiisu inu aha Marxuumkaka inu ka cabsiyo sida darteed falki cabsigalinta marku sameeyay ayay sababtay dhimashada Marxuumka. Sidaas kaligeed in la yiraado Jawaab Celiyeyaashu Dil Culus bay geesteen talagalkoodi aha Marxuumkaka inay cabsi galiyaan taasna si ay u fuliyaan Marxuumkaka dhagax ku tuureen sidaasna u ku dhintay hadaba sidaan kor kusoo faahfaahinay Dil Culus shuruudaha lagu mutaysto mid ka mid ah iyadoon buuxin in dambilenimadooda lagaga dhigo Dil Culus Ciqaabtana lagu go'aamiyo, Go'aankii Maxakamada Sarena la ansixiyo waxaan leenaahay mid garab marsan misaaminta cadaymaha khaladaad sharcina lagu galay sababtaasaan saaxibadayada fikirka ka duwan u qaadanay kabasi darane Maxakamada Guud ee Deegaanka Fadhiga Rafcaanka Jawaab Celiyaha 1aad Qodobka Ciqaabta u ku xad gudbay in 540 yahay dil

caadiya yahay ayay cadaysay, Jawaab Celiyeyaasha 2aad iyo 3aad Jawaab Celiyaha 1aad Marxuumka waxay doonayeen inu ku sameeyo waa sida u dhigayo Qodobka 556 sida oo ah waxyeelo fudud siday ku heeshiiyeen inay sidaas ahaydna waa la xaqiijiyay, go'aanki Maxakamada Sare in sa wax looga badaloo iyaa haboo fikir ah ayaan qabna.

Labo (2) garsoore oon saxeex aan la akhri'ii karayn ayaa ku jira.

Summad Galka : 189472

Taariikh: Sane 30, 2013 T.I.

Garsoorayaasha: - 1. Itmat Asefa

2. Sahay Mankir

3. Nuradin Kadir

4. Malaakuu Kaasaaye

5. Istibal Andualem

Codsade: Mudane Ashabir Awde

Jawaab Celiye: Deegaanka shucubta Itobiya xeer ilaanta qaybta Walayta.

Galkan ayaa u mudaysna in la soo baadho sidaas awgeedna waa la soo badhay Go'aanka hoos ku qorana waa laga soo saaray.

XUKUN

Cabashada dib-u-egista ee Codsadaha kuna taariikhaysan Tir 18, 2012 T.I. kuna saabsan galka Lambarkiisu yahay 31815 Maskaram 6, 2012 T.I. Fadhiga ka qabsoomay Maxakamada Guud ee Deegaanka Shucuubta Koonfureed Cabashada Codsadaha in Dacwada meel kale loogu badalo go'aank lagaga diiday islamrkaana Maxakamada Guud ee Deegaanka Shucuubta Koonfureed ee Itobiya Fadhiga dib-u-egistuna ku ansixiyay Go'aankaas galka Lambarkiisu yahay 31696 lana qoray Taahsaas 1, 2012 T.I. codsi ku saabsan maadaama khaladaad sharci oo aasaasi ah Maxakamada Hoose galeen in laga saxo ayu codsaday u soo dhawaystay.

Arintan waxay khusaysa Dacwada in meel kale lagu badalo dooduna waxay ka bilaabantay Maxakamada Guud ee Deegaanka shucubta confurta Itobiya. Codsadaha

hadda codsiga uu u qortay ee Maxakamada Guud ee Deegaanka ee kusaabsanayd in Dacwada meel kale loogu warejiyo. Markaan soo kobno waa sidan:

Gudoomiyaha Maxakamada Sare isaga oo ka duulaya diwaanka fikirka lagu qoro fikir lagu qoray oo magaca iyo sumcada Maxakamada wax u dhimaya islamrkaana hanjabaad ku jirto iyo farta Codsaduhu maadaama ay isku eekaadeen 6/11/2010 warqad igu amran inaan xafiiska imaado oon Jawaab kabixiyo arintaas. Aniga oo arinta ka duulaya ayaan Gudoomiyaha Maxakamada dacwad ka geeyay gudiga Maamulka iyo anshaxa garsoorayaasha ee heer Deegaanka. Sababtaas awgeed ayu gudoomiyuhu shiriyay garsorayaasha iyo shaqaalah Maxakamada ayu u sheegay fikirka diwaanka lagu qoray inaan anigu qoray. Labo garsore oo Maxakamada Sare ka tirsan oon magaacdooda aan ku qoray Cabashada dhexdeeda gal dacweedeedka Lambarkiisu yahay 30379 oon dacwaysane ka aha si iyaga oo dacwodaha u danaynaya ayaay si ka baaxsan habka Xeerka ayay doodi u hogaamiyeen. Sababta darteedna intaan gudi garsoorka ku dacwooday ayaa gal daweedka nambaaradod kala yihiin 32160, 33749 iyo 30379 dulmi la igu sameeyay ayay Maxakamada Rafcaanka cadaalad igu go'aamisay. Galka Lambarkiisu yahay 36642 ee la igu soo eedeeyay fal dambiyeed cheeg (check) inkasta oon ishortaag kaga Jawaabay gudoomiyihii Maxakamada anshaxa ku daweeyay inta galki loo dhibay qaab aan sharciga waafaqsanayn ayu ishortaagaygi ku diiday, hadana tii oo Codsadahan cuqdad iyo nacabsho loo qabo ayay marar badan cadaald daro soo gaadhay. Sababahaan sheegay darteed Maxakamadani si dhexdhexaad Dacwadan uma eegi karto sidaas darteed ayaan codsaday in meel kale la igu dhagaysto.

Jawaabta u ka bixiyay Jawaab Celiyuhu markaan soo koobno waa sidan:

Gudoomiyaha Maxakamadu wuxu qabtay waa shaqo maamul oo u arintan ku xaqijiyay. Arinta u sheegay inuu Maxakamada kaga dacwoodo gudiga garsoorkana wax dacwad oo soo gaadhay majirto. Laboda garsoore u sheegay ee Dacwada anshaxa

ka gudbiyayna go'aan kama dambaysa lama siin. Laboda garsoore mid kamid ah u Dacwada ka keenay fadhigi waa laga badalay. Garsooraha kalena waa garsoore ku qoran qabta madaniga. Hadaba arintan in lagu bueriyo Rafcaanka in Dacwada meel kale loogu warejiyo sabab uma noqon karto. Islamrkaana Maxakamada waxa jooga in kabadan 12 garsoore. Kuwa galka hayaana kuwu sheegayna kuwa ka baxsan weeye. Sidaas awgeed, Cabashada Codsadaha ee in Dacwada meel kale loogu werijiyo waa inay Maxakamadu ka diido.

Hadaba Maxakamadu markay baadhay dooda dhinacyada, gudoomiyuhuu shaqada u qabtay waajibaad saarna. Taasiina sabab uma noqon karto in Dacwada meel kale loo badalo. Takale gudiga Maamulka garsoor ee Deegaanka ayaan dacawad ugaystay u leeyahayna nuqulka koobigu soo dhawaysatay uma noqonayo cadayn inuu Dacwada gaadhisiyay. Haddi xita ay dacwadu jirto, wax Jawaab oo laga bixiyay majirto. Arinta u leeyahay garsoorka Maxakamadu indho xun ayay igu eegaan waa cabasho iski uun iskaga shakiyay ee sabab loo qaata majirto. Arinta u leeyahay garsoorayaasha waxan ku dacweeyay gudiga garsoorka kadibna xal baan helay wax cadaynaya ma keenin. Garsooraha u Dacwada ka keenay sabaabta darteed fadhigi wa laga badalay taasina geedi socodka ayay ka muuqata. Garsoore aan Dacwada hayn inuu yiraado ha la iga badalo ma haboona iyo waliba garsooraha kale u magaciisa sheegayna arinta gacanta ku ma hayo. Sidaas awgeed codsigu ma waafaqsana shariciga, habka Rafcaanka haddi Go'aanka laga buriyo ama wax ka badal lagu sameeyo iyo haddi la ansixiyoba wa hab sharciga waafaqsan dooduna heerarkas u kala horeeyaan ayey maraan ila hab ka dib-u-egista oo Go'aanka lagu buuriyo oo turjuumaad la siiyo ama dib-u-habayn lagu sameeyo, arintaasna meel kale Dacwada ha la igu badalo lama dhihi karo. Cabashada u soo dhawaystay Codsaduhu ee ah Dacwada meel kale ha la igu badalo Maxakamadu way ka diiday islamrkaana Go'aankaas waxa ansixiyay Maxakamada Guud ee Deegaanka Fadhiga Dibu Eegista.

Cabashada dib-u-egista ee lasoo dhawaystay waxa lagu qanci waayay Go'aamada Maxakamada Hoose kuwa soo khaladaad sharci oo aasaasi ah ku jiro Cabashada markaan soo koobno, Gudoomiyaha Maxakamada Sare oo Codsadaha hanjabaad iyo cabsi galin iyo nacaybsho badan ku sameeyay Codsadaha, Cabashadan oo golaha xildhibaanada Deegaanka iyo golaha xildhibaanada Gobolka iyo waliba gudiga garsoorka ee Deegaanka in cabashadu gaadhay ayay muujinayaan cadaymuuhu. Galdacwadeedyada kala duwan oo oo dooda hab ka baxsan loo maamulay 5 garsoorayaalna oo Maxakamada waxaan ku dacweeyay anshax xumo Dacwada cheega (check) lagu soo dacweeyayna inuu gudoomiyuhu ka noqdo fadhi dexe, garsoorayaashan soo dacweyayna ay lagalan ishortaagan soo dhawestay si sharciga ka baxsan u diidaan Dacwada la eegayana waxa ka mid ah gabadh ay qaraabo yihiin Gudoomiyaha oo Codsaduhu ku dacweeyay magdhow iyo khasaare islAmarkana Codsaduhu yahay qowmiyada Gaafo sidaas awgeedna dacwadiisi laga diiday. Sidaas aweeg Maxakamada Guud ee Federaalka cabasho u dhawaystay islamrkaana galka Lambarkiisu yahay 164842 lana qoray Tikimit 27, 2012 T.I. laguna xaqijiiyay Maxakamadu qaabka ay dooda u qaaday in khaladaad sharci lku jiran iyo waliba Codsaduhu xuquq cadaalad inuu helo meel kaga dhac ah Go'aamada sidaas lagu saxay codsiga Dacwada meel kale loogu wareejiyona maadaama cida wax loo gaystay Gudoomiyaha Xeer-ilaalinta Gobolka adeerki u yahay, agagaarkana ku leh hanti badan iyo qaraabo inay magacayga bi'iiyaan cadaymo badan oon hayo soo dhawaystay. Sidaas awgeed Cabashada Codsadaha ee go'aandada lagaga diiday Maxakamadaaha Hoose waxay leeyihiin khaladaad sharci oo aasaasi ah. Sidaas darted ayaa Maxakamada dib-u-egistu naga saxdo ayuu yiri.

Cabashada Codsadaha dib-u-egista marki la baadhay Maxakamada Sare ee Gobolka Gaamo gudoomiyeheda waxyeelada u gaystay inuu gudiga Maamulka garsoorka iyo anshaxa inuu cabasho u gaystay maadaama Maxakamadu dhedhaxad ka noqon karin. Sidaas darteed codsigi in Dacwada meel kale loogu wareejiyo ee laga diiday in sax

yahay in in kale si loo baadho waxa yeedhitaan loo sameeyay Jawaab Celiyaha si dood qoraal ah dhinacyadu u galaan.

Intaas kadib, Jawaabta Jawaab Celiyuhu markaan soo koobno waa sidan”

Cabashada Codsadaha ee Dacwada meel kale ee u dhawaystay Maxakamada Guud ee Shucuubta Koonfureed ee Maxakamadu ka diiday Qodobka 106 (2) ee H.X.C.I. sida u dhigayo amarada noocan ah Rafcaan lagama qaadan karo sidaas darteed Cabashada Codsadaha ee loo soo dhawayay Fadhiga dib-u-egistu mid waafaqsan maahin habka Xeerka Ciqaabta Maxakamada Sare Gobolka Gaamo diwaanka fikirada lagu ururiyo erayda lagu qoray ee hanjabaad iyo cabsi galinta markaan eegno Gudoomiyaha Maxakamadu cida la yiri qoralka way qortay waxa ka mid aha Codsadahaan saasina gudoomiyuhu xafiiska ugu yeedhay ayu shaqo maamul qabtay. Arintu leeyahay maxa la igu yeedhay waa cabasho been ah, Codsaduhu wax cabasho una gudbiyay gudiga anshax xumada ma majirto. Sidaas darteed Go’aamada Maxakamada Hoose bixiyeen in la ansixiyo ayay mudan yihiin ayaan leenanahay

Geedi socodka Galkan markaan so koobnay waa sida aan soo sheegnay.

Hadaba Fadhigan xaqijiintan dib-u-egista waxa in la xaqiijiyo ay mudantahay in dhinacyadu ku doodeen Go’aanka gundhiga uh Cabashada iyo qodobada sharciga ee la xidhiidha markaan isla eegnay sida hoos ku xusan ayaan usoo baadhnay:

Sida u dhigayo Qamuuska Balck Law (Black Law Dictionary) erayga in Dacwada meel kale loo wareejiya (change of venue) macnaheeduna yahay sida soo socota:

Change of venue is the removal of a suit begun in one country or district to another country or district for trial, though the term is also sometimes applied to the removal of a suit from one court to another court of the same country or district.

Hadaba fikirkan markaan wadankeena eegno dacwad meel laga bilabay inta meel kale lageeyo lagu dhagaysto ama dacwad laga bilaabay Maxakamada isla meesha sun in Maxakamada kale lageeyo oo lagu dhagaysto inay saa tahay ayaa loo qaatay.

Arimaha dambiyada cabashda Dacwada ha la ii wareejiyo waxa lagu saleeya H.X.C.I. Qodobka 106 sida lagu sheegay haba ahaate Qodobkani H.X.C.I. iyo habka Xeerka madaniga ee Itobiya. Bayaanka Lambarkiisu yahay 84/1968 ee dib loogu habeeyay Bayaankaasi sidu dhigayo arimaha Dacwada Ciqaabta kusaabsan codsiga in meel kale loogu wareejiyo waxa la samayn kara inta cadaymaha Xeer-ilaalinta la dhagaysan kahor ama inta dacwaysanayaashu Maxakamada Sare u gudbistaan Maxakamada Hoose iyago ku sheegaya inaynan dhexdhaxaad ahayn ama maalinkastaba dood sharci oo adag inay galaan ama amarada Maxakamadu ay bixinayso sida qodobada sharcigu u sheegayo dhinacyada iyo Maragyadaba Amarka Maxakamadu aynan surogalayn in Maxakamada go'aan cadaali ah laga gaadho.

Fikirka odhanaya Dacwada meel kale hala igu badalo iyada qodobadaan kore kuso aragnay waxan ka fahmi karna in Dacwada meel kale loo wareejiyo Cabashada ah inta la ogalaado in Dacwada meel kale loo wareejiyo ama isla gobtaasuun Maxakamada kutala oo kale loo wareejiyo. Saas lagu eegi karo markay isla gobtaas Maxakamada kutala uunan jirin fadhi kale oo lagu eegi karo.

Hadaba arintan aan hayno ee Codsaduhu Dacwada meel kale hala igu wareejiyo u yiri iyo sababa u soo dhawaystay Guud ahaan Maxakamadu arintayda si dhexdhexaad ah igu ma eegi karto ayu yiri. Sidaas darteed doodiisu waxay ku salysantahay go'aan kahorba inay Maxakamada dhexdhexaadnimo ka muuqato run ahaantina sababaha Cabashada u ku sheegay Codsaduhu inaynan Maxakamadu dhexdhexaad ahayn waxa ka dhigaya iyo in Dacwada meel kale loogu wareejiyo ma sababa in la ogaalado ay tahayba? Mise waa in la diido? Hadaba Maxakamadu erayga u qaadatay sida so socota badhitaan u samaysay:

Sideedaba garsoor madax banaan ayaa la aasaasay sida darteed heerarka kala duwan garsoorka jooga Dawlada iyo masuul kasta iyo cidkastaba saamayntooda waa inuu ka madax banaanyahay, garsoorayaashu marka ay shaqada garsoork ay gudanayaan waa in si sax ah iyo sharciga oon ku saleye inaynan xalado kale ku hogaamin saasna waxa dhigaya Dastuurka federaalka dimooqraadiga rebublic ee Ethiopia qodobadiisa 78 iyo 79 si cad u qexay waana habka garsoorka halbeeg u ah sidaas darteed garsoorayaasha iyo Maxakamaduhuba hogaamintoodu anshax fiican iyo fulin adag waa inay sameeyaan. Marka iyago taa ka gudbay la helayna sida qodobada khusayaa ay dhigayaan ayay masuulyadooda qaadanayaan sidaas na in loo fahmo weeye.

Dhinaca kale, garsoorka madaxa banana ee lagu aasaay Dastuurka in laga helo cadaalad iyo xuquqaha muwaadininta loo cadayay arimuhuna marka go'aan helaan kahor iyo kadib ba xuquqdooda in loo ilaaliyo nidaamyo xal loogu helayo oo sharciya ayaa jiraa. Kuwaas waxa kamid ah garsoorka aan dhaxdhaxaad ahayn in Fadhiga laga saaro la codsado, codsiga Dacwada in meel kale loogu wareejiyo iyo xukunka garsooruhu u bixiyo Rafcaan iyo dib-u-egis lagu saxo kuwaasa kamid ah. Sidaas darteed si madax banana iyo si eex la'aan in garsoorka lagu garsoora wa wajibaadyada dastuurku u dhigayo ooy tahay in la ilaaliyo. Qiyaasta la qaadanay ee garsoorka iyo Maxakamaduhu ba shaqadooda ku gudanayaan inay sidaas tahay weeye balse cid wajibaadka dasturiga ah aan kasoo bixin haday jirto dhinacyadu si ay xuquqdoo u ilaashadaan Cabashada ay soo dhawaysanayaan wa in ay ahaato mid sharci ah iyo cadaymo lataaban karo wadata.

Hadaba arintan aan hayno Cabashada Codsadaha ee Dacwada in meel kale loo wareejio ah sababta 1^{aad} uu soo dhawaystay Gudoomiyaha Maxakamada Sare duwaanka fikir ururinta ee Maxakamada in lagu qoray hanjabaad Maxakamada magaceeda iyo sumcadeeda meel kaga dhacaya farta lagu qorayna farata Codsadaha inay isku eegyihiin la cadeeyay sidaaasna la amran inuu xafiiska yimaado u Jawaab ka

bixiyo sidana dacwad anshax xumo loogu soo ogay. Taasiina ay ku xigtay Gudoomiyaha Maxakamadu garsoorayaasha iyo shaqaalaha Maxakamada u shiriiyay cida ku qortay inaan aniga ahay sidaasina si nacayb leh la ii arko ayay sababtay, labada garsoore ee Maxakamada Sare ee magacyadooda Cabashada ku sheegay galka aan dacwoodaha ka aha ee Lambarkiisu yahay 30379 si ay ugu daneeyaa dacwaysanada si ka baxsan habka dooda ayay geedi socodki Dacwada u hogaamiyeen kadib na gudiga Maamulka garsoorka ee gobolk ayaan dacwad u gaystay, Maxakamada Sare ee Gobolka gal dacwadyo kala duduwan oon dood kulaha go'aano si sharci daro ah igu ridday waxa ii saxday Maxakamada Rafcaanka. Gal dacweed Lambarkiisu yahay 36342 Dacwada la igu soo oogay oo ah dambi cheeg (check) inkasta oon ishortaag gaystay gudoomiyihii hadda kahor an anshax xumo ku dacweeyay inta Dacwada loo dhibay ayuu nidaam sharciga kabaxsan ishortaagayga ku diiday, sababta aan sheegayna waxay cadaynaysa Maxakamadu si dhexdhexaad ah arintayda ku eegayn.

Sida ay tahay Gudoomiyaha Maxakamadu wuxu hogaamiya Maxakamada, isaga iyo garsoorayaashu maxkabaduba waxay ka madax banaan yihiin cidkasta oo saamayn ku yeelan karta arimahana eex la'aan u eegaan wa waajibaad dastuuri ah sidaas darteed magaca Maxakamada iyo sharafteedaba inuun ilaaliyo masuuliyad ayaa ka ssaran marku arinta samaynaya ilaa intunan sharciga ka gudbin wax kasta oo cadaymo oo loo soo gudbiyo sida sharcigu u dhigayo inuu isticmaalo cida ay khusaysona la hadlo wa wax laga sugayo. Gudoomiyaha Maxakamadu diwaan fikirka lagu ururiyo waxa lagu qoray ee magaca Maxakamada iyo sumcadeedaba wax u dhimaya marku arkay cida loo maleeyay inay qortay oo ah Codsadaha inu Jawaab kabixiyo oo qoraal kuwaydiyo oo kaliya shaqo maamulbu qabtay waaye arinta codasadaha in si madax banaan iyo eex la'aan inaan lagu eegin wax samayn ah ku ma leh. Haba ahaate Gudoomiyaha Maxakamadu intaas wax u dheer Codsadaha magaca Maxakamada iyo sumcadeeda ayaad qortay into sabab ka dhigo garsoorka Maxakamada inay saamayn

ku yeesho si arinta Codsadaha si dhexdhexaad aan loogu eegin arintasina sameeyay haddi cadayn la taaban karo la hayo ooy jirto in Dacwada meel kale loo wareejiyo sabab ayay u noqon lahayd. Hadaba markaan arintan eegno Codsaduhu Gudoomiyaha Maxakamadu wuxu sameeyay oo ficil ah majiro. Gudoomiyaha intay dacwad u tagtay u Jawaabay ama dacwad anshax xumo lagu soo oogay wax dooda ama cadaymo sheegaya majiraan.

Magacda garsoorayaasha Maxakamada ee Codsaduhu yiri magacyadooda Cabashadaan ku qoray galka Lambarkiisu yahay 30379 een dacwoode ka aha si ay dacwaysanada ugu daneeyaan si ka baxsan habka dooda intay u qaadeen ayaan cabasho u geeyay gudiga Maamulka garsoorka ee gobolka. Arintaas u ku doodayna magacda garsoorayaasha u sheegay oo u gudbiyay gudiga Maamulka garsoorka ee Gobolka arinta wax xal oo laga qabtay wax cadaynaya uma keenin. Isla markaana garsooraha 1aad ee Dacwada u ka gudbiyay Dacwada Fadhiga inunan eegin waa laga saaray. Garsooraha kalena inunan arinta eegin ayaa la xaqijiiyay sidaas darteed Codsaduhu xaalado la xaqijiiyay Codsaduhu arintiisa garsoorayaal aan hayn inuu yiraado si cadaalad leh igu eegi maayan saasna Dacwada meelkale ha la igu badalo wa codsi an la qaadan karin.

Galka Lambarkiisu yahay 36642 ee Codsadaha lagu soo eedeeyay fal dambiyeed cheeg (check) inkasta u ishortaag usoo dhawaystay gudoomiyihii Maxakamada ee hadda kahor aan anshax xumo ku oogay ayaa si sharci kabaxsan ishortaagaygii iga diiday u leeyahay isaga oo sabab ka dhigaya in gudoomiyuhu isaga oo wax yeelaya codsada inuu si sharciga ka baxsan ishortaag ku diiday arinta inay jirtoo wax cadayn ah oo lagu cadeeyay majirto. Iyadoo oo ay sidaa tahay galka gudoomiyuhu haddu eegayo haddu ka dareemo inuu dhexdhexaad ahayn Fadhiga hala iga badalo umbu dhawaysane in yiraado Maxakamada meel kale hala igu wareejiyo arinta sababi karta maaha.

Kor waxa ku xusan iyado sidayda ah, Codsaduhu Dacwada meel kale hala igu wareejiyo sababta kale u ku sheegay Maxakamada Sare ee Gobolka cid ay qaraabo yihiin Dacwadaan kusoo oogay ayaa si sharciga ka baxsan la iga diiday, heerarka kala duwan ee Maxakamadaha Cabashadayda waan u dhaweeyay Maxakamada Guud ee Federaalka Fadhiga Dibu Eegista galka Lambarkiisu yahay 164842 kuna taariikhaysan Tikimit 27, 2017 T.I. dooda u fadhigu hogaamiyay in Codsadaha khaladaad sharci laga galay iyo inuu Codsaduhu helo cadaalad xuqudiisa in meel laga dhacay intu cadeeyay ayuu go'aankiina sixitaan ku sameeyay taasoo Maxakamada Sare ee gobolku inaynan arintayda dhexdhexaad u eegayn cadaynaysa.

Habka khusaya Rafcaanka H.X.M.I. buuga 6aad Qodobka 320 iyo qodobyada kale ku xiga gaar ahaan Qodobka 337, 341, 343 iyo 348 sida ay dhigayaan waxaan ka fahmi karna Go'aanka Rafcaanka laga qaatay in la ansixiin karo, in ladib-u-habayn lagu samayn karo, in la burin karo, ama in barta ismaandhaafka loo qabto inay Maxakamadaii hore u eegtay tii oo tilmaam la sinayo dib loogu celiyo.

Codsaduhu Cabashada Maxakamada Guud ee Federaalka u gudbistay Go'aanka ay kasoo saartay ee galka Lambarkiisu yahay 164842 kuna tariikhaysan Tikimt 27, 2017 T.I. nuxurkiisuna yahay Codsadaha Maxakamada Guud ee Gobolka gudoomiyaheeda cida ay qaraabo yihiin ee diwaanka Jawaab Celiyaha 1aad iyado suuliga inay duumisay la cadeeyay wixi la duumiyay in la dhiso, kharashka loo baahan yahay inay bixiso iyo suuliga la oday inay furto tii oo la Go'aamiyay iyo islamrkaana Go'aanka wax dood iyo cadaymo lagu buriyay uunan jirin in Codsadaha sabataas dakhligi ka go'aay marku codsaday Go'aanka la ansixiyay natijada sharcigiisu waxa maxay tii oonan khusayn, Jawaab Celiyaha 1aad oo yidhii anigu Maxakamada masuul kama ihi Maxakamadaha Hoosena waxay ku gabagabayeen arin haboon maahin sida darteed Maxakamadaha Hoose doodi iyo hogaaminti khaladaadka ay ku sameeyeen

Codsadaha xuquq cadaalad inuu helo xuquqdiisa meel lagaga dhacay ayay Maxakamadu u aragtay waana in la saxo.

Maxakamada Sare gobolku Codsadaha duwaanka qofka 1aad oo Jawaab Celiyaha aha dooda ka dhexaysa inta ay soo sartay barta ismaan dhaafka intay doodsiiso inay go'aamiso. Iyadoo H.X.M.I. habka Rafcaanka dhigaya sida ku haboon heerarka kala duwan ee Maxakamadaha dooda lagu sameeyo Maxakamada Sare ee gobolku Go'aanka ay bixisay in dib-u-habayn lagu sameeyay ayaa muuqata, hase ahaate Codsaduhu sidu yidhi Maxakamada Sare gobolku arintiisa dhexdhexaad inaynan ka ahayn Go'aanka ay bixisay in la buriyay wax cadaynaya majiro. Sidaas darteed Cabashada usoo dhawaystay ee ah Dacwada meel kale in loogu warejiyo wax la qaadan karo maaha.

Dhinaca kale Jawaab Celiyaha Maxakamada Guud ee Deegaanka Jawaabtu bixiyay inay Maxakamada 12 garsoore in ka badan inay joogaan hadda garsoorka arinta hayyaana kuwu sheegayo garsoorka ka baxsan inuu yahay dooda usoo jeediyay dhanka Codsadaha laga ma dafirin sidaas awgeed Codsaduhu arintayda dhexdhexaad lagu eegimayo u leeyahay sabab lagu qaataa haddi la yidhahdaba way jirata arinta garsooraha eegaya in Fadhiga labadalo unbaa la codsan ee isla Maxakamada ayunba fadhi kale lagu eegi, ee Maxakamada Sare Gobolka dhamaantood garsoorayaasha jooga dhexdhexaad maaha inta la yiraado in Dacwada meel kale loo wareejiya waa arin Maxakamadaha wajibaad dastuurigu saarayo si madax banaan iyo si dhexdhexaad aba inay u garsooraan iyo kalsoonida umadu ku qabto wa arin si wayn wax yeelaysa sida awgeed in la aqbalo maaha.

Codsaduhu Guud ahaan in cabashadiisa meel kale loogu wareejiyo u sababaha ku sheegay wax sifa sharci ah ma leh islamrkaana wax cadayn oo la taaban karo laguma cadayn sidaas darteed Maxakamadaha Hoose Go'aanka codasadaha Cabashada ay ku

diideen wa sax in la yiraado wax khaladaad sharci oo aasaasi ooy galeen lama helin sababta darteed Go'aanka soo socda wa waxaan ku ansixinay cod dheeri ah.

GO'AAN

1. Iyadoo la cuskanayo sida uu dhigayo Qodobka 348 (1), waxaa la ansaxiyay Go'aamada kala ah:
   i. Maxakamada Guud ee Deegaanka Shucubta Koonfureed Go'aanka Lambarkiisa yahay 31815 lana qoray Maskaram 6, 2012 T.I. Go'aanka lagu bixiyay iyo waliba;
   ii. Go'aanka lagu ansixiyay ee Maxakamada Guud ee Deegaanka Shucuubta Koonfureed Lambarkiisu yahay 31696 lana qoray Taahsaas 1, 2012 T.I.
2. Fadhigan dooda dhinacyada kharashka ku baxay dhinacyadu ha isqabaan.
3. Tir 21, 2012 T.I. diwaankan xayiraadi in laga qaado ha loo qoro.

Duwaankani maadaama u go'aan helay waa la xidhay waana la celiyay .

Summad Galka: 160916

Taariikhda: Tahsaas 30, 2011 T.I.

Garsoorayaasha: - 1. Birhanu Amanaw

2. Baiwqat Balaay

3. Indaashaw Adaana

4. Hayluu Nagaash

5. Itmat Asafa

Codsade: Ato Boja Bayane

Jawaab Celiye: Xeer ilaalinta Deegaanka Oromiya

Galkan, baadhis ka dib waxaa laga soo saarau Go'aanka hoos ku xusan:

XUKUN

Cabashadan Dibu Eegistu waa Kiis Ciqaab ah. Jawaab Celiyaha hada ayaa Codsadaha hada Dacwadii u ku oogay Maxakamadaha Hoose nuxurkeedu ahaa Codsaduhu inuu ku xad gudbay Bayaanka Ilaalinta Tayada iyo Ganacsiga Bunka ah ee Deegaanka Oromiya soo saaray ee Tirsigiisu yahay 160/2002 Qodobadiisa 13 (2) iyo 19 (1) (2) (5) (6) iyo 23 (6). Codsadaha waxaa la qabtay isagoo Gaadhigiiska kuwada Rar Bun iyo Alaabo kaleisgu jira isaga oo aan fasax u haysan. Codsaduhu wuxuu si kutalagal ah, Taariikhdu markay ahayd 26/5/2010 T.I, Saacadduna qiiyaas ahaan 9:00 Fiidnimo, Galbeedka Gobolka Guji Degmada layidhahdo Galaana, Magaalada la dhaho Booree meesha loo yaqaano Keelaha, isago Bun Sharci Daro ah oo uu isagu leeyahay, Gaadhi Lambarkiisu yahay Koodh 3 -388518 A.A, Rar Lacag ahaan oo lagu qiiyaasay 6,3520 oo ka koobnaa 14 Kiintaal oo Bun ladhaqay lana nadiifiya Codsadaha iyo Dirawal aan wali la qaban la soo xidhay maadaama aanu wax fasax ah u haysan Bunka iyo Allaabta kale.

Maxakamadu waxay xaqiijisay in: Codsaduhu ahaa Eedaysanihii Eeda loo haystay; Dacwadu soo gaadhay; in uu fahmay Dacwada Xeer-Ilaalinta ee Maxakamadu u akhriday; in uu wax Is-hortaag ah ka qabo Eeda. Eedaysanuhu wuxuu sheegay in aanu fahmay Eeda loo akhriyay iyo in aanu wax Is-hortaag ah ka lahayn EEeda. Markii ay Maxakamadu waydiisay in uu galay Eeda Dambiga loo haystu wuxuu ku Jawaabay in aanu dambiga galin islamarkaana la qabtay Isaga, Dirawalka iyo Kirishboyga Gaadhiga oo u socday Magaalada Dilla iyadoo lagu Dacweeyay inuu waday Gaadhigu Bun Sharci Daro ah. Codsaduhu wuxuu sheegay in aanu ka warqaban wixii Gaadhiga ku Raraa.

Intaa kadib, Maxakamadu waxay dhagaysatay Maragyadii Xeer-ilaalintu so dhawaystay islamarkaana waxay Amar ku bixisay in Codsaduhu isdifaaco. Waxaa Galka ka muuqata in Codsaduhu fursada la siiyay ee ahayd in uu Maragyo isdifaac keensado uu ku Jawaabay ma haystoo, kadibna Maxakamadii qaadatay mowqifka ah in Markhaatiyo isdifaaco u keensada waa Xuquuq ee maaha Waajibaad, sidaasna kaga gudubtay isdifaaci, islamarkaana ay ku dhawaaqday Dambilenimadii kuna xukuntay Ciqaab dhan sadex (3) Sano Xadhig adag ah iyo Ganaax dhan 2,500 Birr.

Codasaduhuna isaga oo Go’aanka ku qanci waayay wuxuu Heerarka kala duwan ee Maxakamadaha Deegaanka, waxaanu sheegay in Cabashoyin uu u gudbistayna laga diiday arintaasina keentay in uu Cabashadan Dibu Eegista ugu soo dhawaystay.

Cabashadan Dibu Eegista ee Codsadaha markaan soo koobno waxay ahayd: Maxakamadaha Hoose in aan Qareen helo waysuura galin waayeen; Markaan Qareen Dawladeed Codsaday, Maxakamadaha oo aan Jawaab ka bixin ayay ka gudbeen; wakhti ku filan oo aan Dacwada kaga Jawaabo layma siin; Dacwada waxaa lagu dhagaystay Luuqad aana fahmayn wax Turjumaan ahna la iima qaban. Sidaas Daraadeed, Go’aanka qaabkaas lagu gaadhay waxay ka dhigan tahay Xuquuqdii Dastuuriga ee aan lahaa oo layga xayuubiya. Waxaa kaloo uu Codasduhu Codsigiis

Dibu Eegista ku xusay: Dacwada laygu soo Dacweeya iyo Dambiga laygu Eedeeyay isma waafaqsana; Anigu Gaadhiga ma wadin wax saaraana kama warqabin; Dirawalkii Gaadhigu wuu baxsaday wuuna dhuuntay, Anigana waxaa layga soo qabtay Gaadhiga agtiisa. Sidaas daraadeed in Dambiile laygu xukumo xaalada noocaas ahi ma haboona. Waxaan aaminsanahay in Go'aamada ay Maxakamadaha Hoose iyagoon fiirin arimaha aan Dibu Eegistan ku xusay ay leeyihiin Khaladaad Sharci oo Aas-aasi ah waxaanan codsanayaa in layga saxo.

Hadaba markaan baadhnay Cabashada Dibu Eegista Codsaduhu Gaadhiga isagu inuu leeyahay balse inuu Dirawal uu u dhibay inuu waday Dirawalkiina baxsaday way caddahay. Codsaduhu inuu yahay Ganacsade Bun ama Beeralay Bun soo saara ma cadda. Dhinaca kale Codsaduhu Gaadhigu in Bun Rarnaa lama cadayn. Islamarkaana in si sax loogu turjumay iyo Xuquuqdiisa isdifaaca in la oogaysiiyay madmadow ayaa ku jira, xaaladaa in Xuquuqdiisa isdifaac lagu dhaafo gaadhi aad lEedahay oo qudha dambilenimada lagaaga dhigo Xeer Ciqaabta Qodobkiisa 23 iyo Bayaanka la sheegay si aan iskula baadhno ayaa Fadhiga Dibu Eegista loo horkeenay keenay islamarkaana yeedhiitaan loo sameeyay Jawaab Celiyaha si doodiidiisa qoraal ugu soo gudbiyo.

Jawaabta Jawaab Celiyaha markaan soo koobno Codsaduhu inuu Gaadhiga laha isaga oo fasax haysan na Bunka lagu sheegay Dacwada inuu Alaab kale ku hoos qariyay sidaas na lagu qabtay dooda Codsaduhu leeyahay Gaadhigu inuu Bun saarna ma oogayn wax lagu qanci karaa maahin. Bunka habeenimo ayaa lararay alaabta kalena lagu hoos qariyay taasiina waxay ina tusaysa Codsaduhu in uu si kutalagal ah u sameeyay. Sida Bayaanku dhigayo maadaama aan Gaadhiga lee'ahay oo kaliya inaan fal dambiyeedka masuul ka ahay in laga dhigo ma haboona dooda u leeyahay in la aqbalaa ma haboona, slamarkaana Maxakamadu Dacwada inatay sii fiican u akhriday ayay marlabaad (mar 2^{aad}) ugu celisay ayuu sheegay. Takale Bayaanka dib loogu habeeyay Maxakamadaha Deegaanka u lambarkiisu yahay 141/200 Qodobkiisa 17 (2)

Maxakamaduhu waxay ku qasban yihiin inay u qabtaan Qareen difaaca Dacwada Xadhigeedu aan ka yarayn Shan Sano (5 sano) iyo Cidaan iyadu aan qabsan karay ama awoodi karayn Qareen. Hadaba Go'aanka Ciqaabta ee Codsadaha lagu riday isaga ayuu dan u yahay sidaas awgeedna Go'aamada Maxakamadaha Hoose waa in la ansixiiya ayuu ku dooday.

Hadaba geedi socodka arintani markaan soo koobno waa sida aan kor kusoo shegnay. Fadhiga Dibu Eegistu wuxuu arinta la isku maandhaafsan yahay u qaatay, iyadoo la qaadanayo Qodobabada arintan la xidhiidha, Go'aamada Maxakamadaha Hoose Xuquuqda codsadaha ma u ilaaliyeen mise uma ilaalin, baadhitaan kabacdina wuu Fadhiga Dibu Eegistu soo saaray sidan soo socota:

SidEedaba dadka la dacweeya waxay leeyihiin Xuquuq sharci oo ah inay helaan Garsoor Maxakamadeed oo Cadaalada ah (the right to fair trial). Hadaba Dacwada markii lagu soo oogay kadib muddo gaaban gudaheed in Maxakamada lahor geeyo oo Fadhi albaabadu u xidhan yihiin lagu dhagaysta sabab sharci oo lagu dhagaysta hadaynan jirin waa in Fadhi dadka u furan lagu dhagaystaa, waana Xuquuq Dastuuri ah sida ka muuqata Qodobka 20 (1) ee Dastuurka Itoobiya iyo dokumantiga Axdi-qarameedka heer Caalami ee Itoobiya ansixisay Qodobkiisa 14 (…….. *everyone shall be entitled to a fair and public hearing by a competent, independent and impartial tribunal established by law).* Sida u dhigayo Xuquuqda Dastuuriga ama Heshiisyada Caalamiga ah ee Itoobiya ansixisay Xuquuqaha lagu sheegay heerarka kala duwan ee Maxakamaduhu inya xurmeeyaan ooy ilaaliyaan inay masuuliyad ka saarantahay Qodobada 9 (4) iyo 13 (1) (2) ee Dastuurka Itoobiya ayaa caddaynaya

Dadka la dacweeyo faahfaahinta Dacwada in wakhti ku filan la siiyo islamrkaana ay iyada oo qoral ah helaani waa Xuquuq ay leeyihiin islamarkaana geedi socodka Maxakamada dadka lasoo dacweeyay waxay xaq u leeyihiin muddada dacwaddoodu socoto inaan loo arag dambileyaal illa inta danbigooda lagu caddeynayo

islamarkaana inaan lagu khasbin inay isku markhaati furan jyo caddayn kasto loo soo dhaweeyana inay arkaan Markhaatiyaashana ay wax waydiiyaan islamarkaana wixi isdifaac u noqonaya caddaymo iyo maragyaba in loo dhagaystoo in ay codsadaan Qareenkay doonaana ay wakiishaan hadaynan awoodin Qareen in ay qabsadan si aanay cadaalada waxyeelo usoo gaadhin Dawladu u qabato Qareen islamarkaan na Rafcaan ay qaadan karaan geedi socodka Maxakamada na hadaynan Luuqada garanayn kharashka Dawlada in Turjumaan loo gu qabto arintaas Qodobka 20aad ee Dastuurka ayaa si faahfaahsan u sheegaya islamarkaana Axdi-qarameedka Caalamiga ah ee kamid ah sharciga wadanka Qodobkiisa 14aad ayaa si faahfaahsan u sheegaya.

Dadka lagu Eedeyo Dacwad si ay isku difacan waa in ay fahmaan Dacwada hadii aanay luuqada Geedi socodka Maxakamada fahmi karin waa in loo turjuuma hadi ayinan Luuqada garaney loona suuragaliyo in ay qabsadan Qareen haddi ay awood waayena Dawladu ka bixisaa waa arin Xuquuq Dastuuri ah hadaba dadka aan garanayen Luuqada Maxakamadu ku shaqenaso waa in loo turjmo oo loo faafahiyo lona sheego in ay tahay Xuquuqe ay leeyihin

Hadaba dooda dhinacayda ee Maxakamada Hoose Codsadaha inuu Qareen qabsado looma suurtagalin Codsaduhu isaga oon garanayn afka ay Maxakamadu ku shaqenaysay bila turjuuman Go'aanka lagu riday wuxuu si cad uga hor-imanayo Xuquuqda Dastuuriga ah Jawaab Celiyaha wuxuu u sheegay Maxakamadan inay Codsadaha Maxakamada Hoose uu akhriyay Eeda laba jeer islamarkaana Bayaanka dib lagu aasaasy Maxakamada Deegaanka Oromia ee lambarkiisu yahay 141/200 Qodobkiisa 17 (2) sidaa u sheegayo Maxakamaduhu in ay waajib ku tahay in ay Qareen uu qabatan marka u gaadhi karo xukunku xadhig shan sano ka badan iyo haddi uuna awood uu lahaayen inuu qabsado Qareen uu dooda Jawaabceliyu iyo Go'aamada Maxakamada Hoose in Codsadaha lagu akhriyay Dacwada laba jeer balse ma sheegayso Codsadaha in loogu akhriyay Luuqada uu garanayay maadaama

Luuqada shaqada ee Maxakamada uuna garanayin. Hadaba Xuquuqda dadka la dacweeyo ee ah in turjuman loo qabto ee lagu sheegay Dastuurka iyo Xeerka Caalamka ee dalkeenu ansixiyay in loo ilaaliyay Codsadaha kama muuqdaan Go'aamada Maxakamada Hoose sidaas awgeed maadaamo Codsadaha aan loo qaban Turjumaan islamarkaana loo qaban Qareen lama dhihi karo Dacwada si ku haboon oo u isku difaacyay ayaa loo dhagastay. Sidaas daraadeed Go'aamada Maxakamada Hoose waxay balmarsantahay Xuquuqda Dastuuriga ee u lahaa Eedaysanuhu. Maadaama ku araganay **Khaladaad Sharci oo Aas-aasi ah,** waxaan ka soo saarnay Go'aanka Hoose ku xusan:

GO'AAN

1. Iyadoo la cuskanayo sida uu dhigayo Qodobka 195 (2) (t) ee HXCI, waxaa la buriyay dhamaan Go'aamada kala ah:

i. Go'aanka lambarkiisu yahay 03750 lana qoray 13/6/2010 kana soo baxay Deegaanka Oromiya Maxakamada Degmada Golaa;

ii. Go'aanka lambarkiisu yahay 00832 lana qoray 13/7/2010 ee ka soo baxay Maxakamada Sare ee Gobolka Galbeedka Guji; iyo

iii. Go'aanka lambarkiisu yahay 284002 lana qoray 21/9/2010 ee ka soo baxay Fadhiga Dibu Eegista ee Maxakamada Guud ee Deegaanka Oromiya.

2. Waxaan Go'aaminay in uu Jiray Khaladaad Sharci oo Aas-aasi oo baalmarsan Xuquuqda Eedaysanaha ee lagu xusay Qodobka 20 ee Dastuuriga Federaalka.

3. Iyadoo la raacayo Qodobka 195 (2) (t) (2) ee H.X.C.I., waa la buriyay Go'aanka Dambiilenimada iyo Ciqaabta ay kuriday Codsadahaee Maxakamada Degmada Golaa islamarkaana waxaa la farayaa in ay Dacwada dib u qaado iyadoo u qabanaysa Codsadaha Turjumaan. Waa in Codsaduhu Qareen qabsadaa hadii uu awoodo, hadiise aanu awoodin, waa in ay Maxakamadu Qareen ugu qabataa Codsadaha Lacagta Dawlada.

AMAR

Maadaama la buriyay Go’aankii Maxakamada, waxaa la Amrayaa Maxakamada Degmada Golaa in, 15 maalmood gudahood, laga bilaabo maalinta Galkani soo gaadho, in ay Kiiskan dib u firto. Waxaa kaloo Maxakamada Degmada Golaa la Amrayaa in ay dhawraan Xuquuqda Maxbuuska sida ugu haboona u hayaan.

Galkan maadaama la Go’aamiyay waa la xidhay Xasuus Dhawarkana lagu celiyay.

Go’aankan waxaa ku saxeexan shan garsoore oo la ogalayn in saxeexoodu muuqdo.

Summad Galka: 161062

Taariikhda: 26/04/2011 T.I.

Garsoorayaasha: 1. Teklit Yimsal

2. Teferi Gebru (Dr.)

3. Qana'a Qitaata

4. Tashome Shifaraaw

5. Sahay Mankir

Codsade: Ato Mahdi Sharif – Qaren Masfin Alamaayahu - way soo xaadireen.

Jawaab Celiyaha: Ato Shaafii Sharafa – masoo xaadirin.

Galkan, baadhis kadib waxaa laga soo saaray Go'aanka hoose ku xusan:

XUKUN

Dooda Galkani wuxuu ku saabsan yahay arin ay Go'aamiyeen Odayaal xigtaha oo baadhay 'in Kiiska baadhitaan haboon lagu sameeyay iyo in kale. Geedi socodka arinta ee Maxakamadaha Hoose markaan eegno Codsadaha hadda wuxu ahaa Dacwoode, Jawaab Celiyuhuna wuxu ahaa Celiyuhuna. Codsadaha ayaa Cabasho u dhawaystay Maxakamada Federaalka ee Darajada 1aad Galka lambarkiisu yahay 104286 la qoray Hidar 8, 2008 T.I. Dacwadiiisa markaan soo koobno qaybta Boole ee Magaalada Addis Ababa Degmada 11aad Guri lamarkiisu cusub yahay, lambarka Xujadiisuna tahay 1648 – 11/9/4/7 tahay oo uu Codsaduhu amaano ahaan ugu dhibtay inuu u maamulo Jawaab Celiyaha. Balse Jawaab Celiyuhu Gurigii loo gu dhibtay inuu maamulo ayuu magiciisa Xujad kusamaystay. Sidaas awgeed Maxakamada wuxu ka codsaday Jawaab Celiyaha Guriga laga saaro oo isaga lagu wareejiyo.

Jawaab Celiyuhu Jawaabtu Maxakamada u dhaweeyay wuxu ku sheegay is-hortaaga 1aad iyo siday xaqiiqadu ahayd markaan soo koobno wuxu yidhi arinta Odayaal xigto ahi intay baadheen ayay Go'aan kasoo saareen. Waxaa muuqata in uu Jawaab Celiyuhu ku dooday, maadaama kiiska ay Odayaal Xigto ahi horey u baadhay, mar labaad lama furi karo.

Maxakamadaha Hoose ee doodan qaaday, markay dooda dhinacyada baadheen kadib Codsadaha iyo Jawaab Celiyaha arintay ku doodayaan in ay Odayaal xigtihi Tikimt 20, 2008 T.I. Go'aan kasoo saareen, Go'aankaasoo ahaa in ay Guriga wada leeyihiin haday ku heeshiiyaan inay wada isticmaalaan, haday ku heeshiin waayaan na intay iibiyaan inay lacagta qeybsadaan. Codsaduhuna inay arintaas jirto arinta Odayaasha u dhibteen maanu dafirin balse wuxu ku doodayaa Go'aanka Odayaasha maanan saxeexin. Sidaas ayay Maxakamadaha Hoose dooda Codsaduhu sharci maahin intay yidhaadeen kadiideen. Codasaha oo Go'aankaas ku qanci waayay ayaa Rafcaan u soo gudbistay Maxakamada Sare ee Rafcaanka. Intaa kadib, Maxakamadu markay doodi dhinacyada dhagaysatay waxay ansixisay Go'aanki Maxakamada Hoose. Hadana Codsaduhu isaga oo ku qanci waayay Go'aankaas ayuu Maxakamada Guud ee Federaalka Fadhiga Dibu Eegista Cabasho uu ku dalbanayay in Go'aamadii Maxakamadaha Hoose laga saxo.

Cabashada codsadha ee ku taariikhaysan Hamle 6, 2010 T.I. markaan nuxurka Eeda eegnay wuxuu ku sheegay in Odayaashuu iyaga oon waxa la isku haysto banaanka soo dhigin islamarkaana cadeymo aan dhagaysan arinta inaan ogalaado Aabahay culays igu saaray. Sidaas awgeed, waxaan codsanayaa in Go'aanka la iga buriyo. Hadaba Cabashada Codsadaha Fadhiga xaqiinjinta Dibu Eegista 18/12/2010 T.I. Amarkay bixiyeen oo ahaa arinta lagu eegay Odayaashaa xigtada ah inay haboon tahay iyo in kale inta Jawaab Celiyaha yeedhitaan loo sameeyo in Fadhiga la hor geeyo. Jawaab Celiyuhu na Jawaabta ku taariikhaysan Tikimt 20, 2011 T.I. siduu ku sheegay

Odayaasha arinta markay baadheen ee ay Go'aan kasoo saareen kadib inuusan wax Rafcaan ah ka qaadan islamarkaana arinta inta si fiican loo baadhay maadaama Go'aan laga soo saaray Maxakamada wuxu ka cosaday Go'aanka Maxakamadaha Hoose inay ansixiso inay haboon tahay. Dhinaca kale Codsaduhu Jawaabta Jawaab celinta wuxu Maxakamada usoo dhaweeyay Hidar 13, 2011 T.I. inta kadib Maxakamadu si ay Go'aan cadaalad ah usoo saarto waxay Amartay Maxakamada Federaalka Darajada 1aad qaybta Yaka Galka lambarkiisu yahay 104286 inay usoo dhawayso waana loo soo dhaweeyay wayna aragtay.

Hadaba geedi socodka arintani soo martay markaan soo koobno waa sidaan kor kusoo sheegnay. Anaguna waxaan baadhany Amarada Maxakamadaha Hoose ay bixiyeen in khaladaad sharci oo Aasaasi ku jiraan iyo in kale.

Badhitaanka Galka aan ku samaynay Codsaduhu wuxu si adag ugu doodaya inkasta ooy ku heshiiyeen Jawaab Celiyaha in arinta odayaash u dhibtaan Go'aankoodana qaataan, hase ahaate odayaashu iyaga oo dhinacyada lahadlin Go'aanka ay gaadheen islamarkaana Codsaduhu Go'aank unan saxeexin sharci ahaan inuunan haboonayn. Jawaab Celiyuhu dhankiisa Go'aanka Odayaasha xigtada ahi ay gaadheen wax khalad ah inuusan lahayn ayuu ku dooday.

Sida Diiwaanka ka muuqata Codsadaha iyo Jawaab Celiyuhu Tikimit 20, 2008 T.I. waxay Odayaasha xigtada ah arinta u dhibteen wax doodi kama taagna. Islamarkaana dhinacyadu Odayaasha ay dorteen Go'aanka ay gaadheen Tikimit 20, 2008 T.I. ku sheegeen Guriga arint gun-dhiga u ah inuu yahay Guri ay wada leeyihiin, haday ku heeshiiyaan na inay kuwada noolaadaan, haday kuheeshiin waayaan labadan walaalo (ka yar iyo ka wayn) intay iibiyaan inay si isleeg u qaybsadaan in odayaashu cod buuxa sida ku Go'aamiyeen aya ka muuqata. Codsaduhuna inay sidaas tahay ma dafirin balse wuxu ku doodaya iyaga oo wax cadaymo eegin in Go'aankay gaadheen aanu sax ahayn.

Hadaba sida u dhigayo X.M.I. Qodobkiisa 3325 iyo Qodobada ku xigaaba sida ka muuqata dhinacyadu iyaga oo heeshiis ku ah way u dhiban karaan arintooda Odayaal xigto ah. Sidaas darteed Codsaduhu isaga oo raali ka ahaa kuna qanacsana odayaashu arinta u dhibtay islamarkaana Go'aanka ay gaadheen inuu si cusub dacwad usoo dhawaysta arin sharciga ku haboon ma'ahin. Codsaduhu Go'aanka odayaashu gaadheen hadu ku qanci waayo nidaamka sharcigu sida uu dhigayo inuu Rafcaan ka qaato ayay ahayd balse dacwad cusub inuu furo ma haboona.

Hadaba is-hortaagi 1aad ee Maxakamada loo dhawaystay Amarka ay ka soo saartay sida u dhigayo Qodobka 244 (2) (D) ee H.X.M.I. way ku saxantahay wax khaladaad sharci ah oo ay gashayna majiro. Codsaduhu Guriga dooda gun-dhiga u ah arintiisa Go'aanka ay bixiyeen Odayaasha xigtadu inuu khalad ku sheego sax maaha sida u dhigayo Qodobka 350 iyo Qodobada ku xiga ee H.X.M.I. Inuu Rafcaanka Go'aan ka qaatay wax cadaynayaana majiro.

Sidaas daraadeed, Go'aanka Odayaashu waa ansax shuruudo sharcigu sheeginna laguma diidi karo. Codsaduhu Go'aanka odayaashu inuu Rafcaan ahaan ka qaato ayay ahayd balse inuu sabab kadhigo Go'aanka ma saxeexin sidaas darteedna dacwad cusub so dhawaysto wax sharci ah oo taageeraya majiro. Hadaba asbaabta sare ku xusan awgeed, waxaa la ogaamiyay in aanay wax khaladaad sharci oo aas-aasi ahi ku jirn Go'aamada.

GO'AAN

1. Waxaa la ansaxiyaya Go'aamada kala ah
   i. Amarka lagu bixiyay Go'aanka Maxakamada Darajada 1aad ee Federaalka Galka lambarkiisu yahay 104286 lana qoray 3/5/2009 T.I.; iyo
   ii. Go'aanka Maxakamada Sare ee Federaalka Galka lambarkiisu yahay 182345 lana qoray 13/10/2010 T.I.
2. Kharashkii iyo khasaaraha ee Dacwadani keensatay dhinacyadu ha isqabaan.

3. Wax xayiraad ah haday jirto in laga qaado ha loo qoro Diiwaanada Maxakamadaha Hoosena ha loo celiyo.

   Galkan maadaama u Go’aan helay ha lagu celiyo Xasuus Dhawrka
   Go’aankan waxa la akhriyay
   Go’aankan waxaa ku saxeexan shan Garsoore oo aan saxeexooda la ogalayn in la muujiyo.

Summad Galka: 161736

Taariikhda: Ginbot 29, 2011 T.I.

Garsoorayaasha: 1. Teklit Yimsal

2. Teferi Gebru (Dr.)

3. Qana'a Qitaata

4. Tashome Shifaraaw

5. Sahay Mankir

Codsade: Ato Tachaana Kaasaa

Jawaab Celiyaha: – 1aad Ato Baahra Haftuu

2aad Ato Hagoos Haftuu

3aad Ato Warkuu Adiisuu

Galkan inta la baadhay ayaa Go'aanka hoos ku xusan ka soo saarnayy

XUKUN

Arinta Galkani waxay khusaysa dib-u-habayn dacwad, dooduna waxay ku bilabantay Codsadaha hadda ayaa Jawaab Celiyaha 1aad iyo 2aad ayaa ku dacweeyay Maxakamada Sare ee Gobolka Galbeed ee Deegaanka Tigre-ga FadhigEeda Humara.

Sida ka muuqata Diiwaanada Maxakamadaha Hoose Codsadaha hadda ayaa Jawaab Celiyahaha ee magacisa la yidhado Worku Adiis iyo kuwa kale ee Jawaab Celiyeyaasha hal qoraal (dokumantiya) oo heeshiis ah lacag kuwada siiyay sidaana Maxakamada kaga codsaday inuu kusoo darsado Eedaysnaha 3aad inuu Dacwada dib usoo habaysto Maxakamaduna way ka oogalaatay laakin Codsaduhu Dacwada u dib usoo habaystay ee ku taariikhaysan 28/3/2010 T.I. Dacwada udib usoo habaystay

wuxu ka badalay Dacwadiii hore u nuqurkeedu ahaa in habka dagadag ah loogu eego sababto ahayd lacag u amaahiyay balse Dacwada u dib usoo habaysto wuxu ku sheegay si sharciga ka baxsan in hanti lagu qaatay hadaba Maxakamadu markay eegtay Dacwada cusub ee dib usoo habayay way ka diiday, Amarna waxay ku bixisay taariikhdu markii ay ahayd 18/05/2010 in Dacwadii hore kaliya lagu soo daro qof 3aad. Codsaduhu wuxu yidhi Dacwadayda dib baan usoo habaystay oon usoo dhawaystay sida wax kabaxsan na uma soo habaysan karo. Dacwadiii horeena doodeedii masi wadayo. Maxakamaduna iyadoo arinta ka dulaysa Codsaduhun balanti loo qabtay na u fulin waayay sida u dhigayo Qodobka 199 (2) ee H.X.M.I. Maxakamadu amar ayay ku bixisay in la xidho Galka.

Haddaba Codsaduhu isaga oo arinta ku qanci waayay ayuu Maxakamada Guud ee Deegaanka Tigre- Rafcaanka iyo Fadhiga Dibu Eegista Cabasho u gudbistay balse labada Fadhiba way ka diideen. Sidaas ayuu Cabashadan Maxakamada Guud ee Federaalka Fadhiga Dibu Eegista ugu soo dhawaystay. Haddaba Fadhiga xaqiijinta Dibu Eegista marku baadhay Cabashada Codsadaha ee Dacwada inuu dib-u-habaysto uga dhigay markii cidii khusaysay ay u fasaxday kadib Codsaduhu Dacwadiii arintu inay tahay Xuquuq sharci ah inay waafaqsantahay iyo in kale si loo fahmoo sababtii Dacwada maadaama u badalay nidaamka doodaa lagu hogaamiyo Maxakamadaha ee wadankeena Maxakamadauhu iyaga oo iskood ka duulaya si cadaalad loo helo iyo Xuquuqaha Dastuuriga arimaaha ka eegaan waa inay adeeg ku haboon bixiyaan mise jihadii markii hore dacwadu u taalay maadan fulin inta layidhado sida u dhigayo Qodobka 199 (2) ee H.X.M.I. in arinta halkaas lagu joojiyo ama lagu xidho miya? Haddaba si arintan Go’aan looga gaadho, Fadhiga Dibu Eegistaa loo gudbiyay, Jawaab Celiyeyaasha waxaa la Amray inay Jawaab qoraalka kasoo. Sidaasna waxay dhinacyadu isku dhaafsadeen dood qoraal ah.

Nuxurka kiiska marka la soo kobo waa isda sare ku xusan. Haddaba Cabashada Fadhiga Dibu Eegista wuxuu banaanka soo dhigay waxa dhinacyadu isku haystaan oo ah “Amarka ay Maxakamada Hoose Galka ku Xidhay Sharciga Ma Waafqsan yahay mise ma Waafaqsana’? Markii aan baadhitaan ku samaynay Kiiska waxaa ka sooo baxday sidan soo socota:

Sidaan kor ku soo sheegnay Maxakamadaha Hoose Codsadaha maadaama balnti looqabtay u fulin waayay in Galka la xidho ayay amar ku bixisay. Dacwada hore u so dhawaystay sababteedu ahayd amaah (dayn) isaga oon badalayn inuu ku soo darsado Eedaysanaha 3aad sidaas na Dacwada inuu ku soo habaysto la amray laakin Codsaduhu Dacwada saan usoo habaystay mooye si kabaxsan Dacwada dib uma soo habaynsan karo Dacwadiii hore doodeediin mawadayo ayuu yidhi, haddaba Maxakamadu inay ka Go’aan gaadho Dacwadiii dib loo soo habayay Maxakamadaha Hoose ay diideen ma sharci bay ahayd? Galka in la xidhaa may haboonayd mise ma haboonayn?

Sababta inuu Dacwada dib usoo habaysto loogu ogalaaday Jawaab Celiyaha 3aad oo la yidhado Worku Adiis iyo kuwa kale ee Jawaab Celiyeyaasha ah maadaama heeshiis hal warqad kuwada qoran lacag ku siiyay Eedaysanaha 3aad inuu Dacwada kusoo darso ayay ahayd codsiga Maxakamada uu u gaystay. Amarka Maxakamaduna inay ka oogalaatay ayay cadaynaya inta kadib Codsaduhu Dacwada u dib usoo habaystay Dacwadiii daynka wuxu u badalay Dacwada si sharci daro ah xoolihiisi looga qaatay ama looga faa’iidaystay. Maxakamadu inuu Dacwadai hore uun Eedaysanaha kusoo daro Amarkeedii wuxu yidhi sida si ka baxsan uma soo habaysan karayo sidaas awgeed dib u habaynta Dacwada codsiga Garsoorka ee Dacwada sababta u ah in la badali iyo in kale inaan eegno ayaa muuhim noqotay

Sida u dhigayo Qodobka 91 (1) ee H.X.M.I. Maxakamadu inta aynan Go’aanka ka soo saarin xilli kasta oo ay u aragto inay haboontahay dhinacyadu dacwadooda inay dib u habayn ku sameeyaan way u fasixi karta sidaas awgeed Xuquuqdan dhinacyada la

siiyay inay Dacwada dib u habayn ku samaystaan ama dooda badalaan waa markay si faahfaahsan ama cadaalad sax ah in la gaadho wax ka caawinayso. Nuqulka luqada Ingriiska: -

"The court may at any time before judgment allow either party to alter or amend his pleading ……. and all such amendments shall be made as may be necessary for the purpose of determining the real questions in dispute".

Qodobka sidaan ka fahmayno dhinacyadu inay dacawada dib u habayn ku sameeyaan ama dooda badalaan arinta dacwadu ku saabsantahay arintad Dacwada sii ficiican u faahfaahiso ama Go'aan cadaalad si loo gaadho marka Maxakamadu muuhiim u aragto weeye sidaas darteed in Dacwada dib u habayn lagu sameeyo ama dooda la badaloo waxa loo fasaxa dooda dhinacyada markay muuhiim u noqoto *(for the purpose of determining the real questions in dispute)* weeye.

Haddaba arintan aan hayno Codsaduhu Dacwadiii horee u Garsoorka ka codsaday lacag dayn (amaah) in loo soo celiyo ayay ahayd. Sababta codsiga dib u habaynta ku sheegay na waxay ahayd Jawaab Celiyaha 3aad ee la yidhahdo Worku Adiis iyo kuwa kale ee Jawaab Celiyeyaasha ah maadaama heeshiis hal waraaq kuwada qoran lacag kuwada siiyay sii Eedaysanaha 3^{aad} ugu soo darsado ayay ahayd, haddi amaahda (daynta) la dafirana arinta dooda dhinacyadu waxay noqonaysa *(the real questions in dispute)* dayn (amaah) mu jira mise ma jiro? Sidaas awgeed dib u habaynta Dacwada ama wax kabadal-ka arinta daynta (amaahda) si ficiican u faahfaahinayso ama cadaalad in la gaadho ay caawinayso laakin Dacwada dib loo habeyay ee Codsaduhu soo dhawaystay sababta Dacwada ee dayn (amaah) ahayd wuxu u badalay dacwad si sharciga ka baxsan looga faa'iidaystay. Arintan-na sabab sharci ee lagu yidhahdo Dacwadiii hore ayay sii ficiican u faahfaahinaysa ama cadaalad in la gaadho ayay caawinaysa ma jirto.

Sidaas darteed nidaamka dooda lagu hogaamiyo wadankeena dib u habaynta Dacwada isla arinta uun sii ficiican u faahfaahinayso ama cadaalad si loo gaadho muuhiim u tahay oo kaliya. Codsaduhu Dacwada hore ee dayntuu sababta u tahay inuu ku badaloo Dacwada si sharciga ka baxsan looga faa'iidaysto usoo dhawaystay habka xeerka u dhigayo ee Dacwada in dib loogu habeeyo ay tahay ma waafaqsana sidaas awgeed Go'aamada Maxakamadaha Hoose ee ku diideen Dacwada dib loo soo habeeyay wax lagu dhaliloo inuu ku jiro umaanan arag. Dhinaca kale Dacwada inuu dib usoo habaysto dhinicii loo fasaxay hadday soo dhawaysan waayaan Dacwaday dib u soo habeeyeen ama dooda ay soo badaleen inay Xuquuqdoodu ka lumaysoo natijaduna noqon in Dacwadiii hore doodeedii la wado sida u dhigayo qodabka 91 (2) ee H.X.M.I. ayaan ka faahmi karna.

Haddaba arintan aan hayno Codsaduhu sida sharcigu u dhigayo ayuu Dacwadiiisa inuu dib u habayn kusumeeyo ayuu ku codsan karaa haddu sidaa ku soo habeeysan waayo na Dacwadii horena inuusan si wadayn cadeeyay sidaas awgeed Maxakamadu sabab ama dhib Codsadaha katimid awgeed Galka inay xidhdhaa si waafaqsan habka xeerka lagu hago ee wax khaladaad ooy gashay majiro.

Fadhiga dib u egistu baadhintaanka wuxu ku sheegay sababta Maxakamaduhu iyaga iskood ka duulaya waxay qayb libax ka qaataan sidi loo hirgalin lahaa habka sharciga sida ku haboon een sharcigu qeexin taaso ah qaacidada caddaaladda dabiciga (*principle of natural justice*) inaay sida ugu haboon u raacaan. Garsoorku marka u dooda hogaaminayo kaalintiisu habka sharciga iyo qaacidada dabiciga inuu raaco inuu wax ku go'aamiyo arintaana habka lagu hogaaminaya in lagu xaqijiyo in helo Xuquuqin caddaaladda ah inta waxa ka baxsan in sabab Xuquuq lagu xad gudba inaynan jirin. Haddaba Guud ahaan Maxakamada Sare ee Gobolku arinta sida sharciga ee ay u hoogaamisay amarkana uga soo saartay Maxakamadaha Sare sababaha ay ku

qaadaan waayaan majirto. Sidaas daraadeed, waxaa laga soo saaray kiiskan Go'aanka soo socda:

GO'AAN

1. Iyadoo la raacayo Qodobka 348 (1) ee H.X.M.I, waxaa la nasaxiyay Amarada kala ah:
   i. Amarka ka soo baxay Maxakamadaha Sare ee Gobolka Galbeedka Deegaanka Tigreega Fadhigeeda Humaraa Galka lambarkiisu yahay 14280 lana qoray 22/5/2010 T.I;
   ii. Amarka ka soo baxay Maxakamada Guud ee Deegaanka Tigree-ga Fadhiga Rafcaanka Galka lambarkiisu yahay 104354 lana qoray 17/8/2010 T.I. iyo;
   iii. Amarka ka soo baxay Maxakamadaha Guud ee Deegaanka Tigreega Fadhiga Dibu Eegista Galka lambarkiisu yahay 107559 lana qoray 25/10/2010 T.I.
2. Dhinacyadu kaharashka iyo khasaaraha Dacwada ha is qaban.
3. Galkan waa la xidhay Xasuus Dhawrkana waa lagu lagu celiyay.
4. Go'aankan waxaa ku saxeexan sadex Garsoore oo aan la ogolayn in saxeexooda la muujiyo.

Fikir Ka Duwan

Anaga oo magacdayadu lambarada 3^{aad} iyo 5^{aad} Go'aanka kor lagu soo sheegay ee codka aqlabiyada lagu ansixiiyay sababta aan uga fikir duwan nahay sida soo socota ayaan usoo dhigayna.

Maxakamadaha Hoose Go'aankooda sida aan ka fahannay Codsadaha hadda (u ahaa Dacwoode) Dacwadiii 1^{aad} uu soo dhawaystay heeshiis dayn (amaah) ku salaysan Jawaab Celiyaha 1^{aad} iyo 2^{aad} (oo ahaa dacwaysanayaal) in lacagti looga qaado ayuu Garsoorka waydistay laakin Codsadaha hadda Dacwada in dib habayn ku samaysto u kuna soo daro Jawaab Celiyaha 3^{aad} (oo ahaa dacwaysanaha 3^{aad}) maadaama Jawaab Celiyeyaasha kale iyo isaguba inay lacagta bixiiyaan masuuliyad ay saarnayd isaga oo

sida caddaynaya Dacwada na dib usoo habaysto kuna soo daro Jawaab Celiyaha 3aad ayuu codsaday Maxakamada Hoosena Codsadaha hadda cabashadiisi ahayd inuu Dacwada dib usoo habaysto Fadhigii ay yeelatay 18/5/2010 T.I. ayaa amar oogalaashaha lagu siiyay laakin Maxakamadu Codsadaha hadda Dacwada u dib usoo habaystay iyo tii hore isku mid ma'aha intay tidhi ayay ka diiday. Haddu Codsaduhu doono Dacwadiiisii hore ha wato ayay amar ku bixisay. Codsaduhu Dacwadiiisii hore inuu nan sii wadayn maadaama u cadeeyay sida u dhigaya Qodobka 199 (1) ee H.X.M.I. inay Galka sida ku xidhay ayaa ka muuqda Go'aanka hadaba Fadhigan cod dheeri ah wuxu ku go'aamiyay Dacwada u dib usoo habaystay Codsaduhu sida u dhiga Qodobka 91 (1) H.X.M.I. lama aqbali karo sidaasna waxay ku ansixiyeen Go'aankii Maxakamada Hoose.

Haddaba anagu baadhista arintan Maxakamada Hoose Codsadaha hadda isaga oo heeshiiskii daynta ka duulaya in lacagtiisii lasiiyo Jawaab Celiyeyaasha 1aad iyo 2aad Dacwada u ku oogay intuu soo habaystay ayuu Jawaaba Celiyaha 3aad ee hadda kusoo daray sida u dhigayo Qodobka 91 (1) ee H.X.M.I. Dacwadiii in u dib usoo habaysto loo fasaxay ayuu ku soo dhawaystay. Maxakamada Sare ee Amarka ay bixisay Codsaduhu intuu Dacwada dib usoo habaysto u kusoo daro Jawaab Celiyaha 3aad sidaas lacagtiisa ku codsan karo ayay u fasaxday. Balse marku Dacwadiii soo habaystay sababta Dacwada cusub tii hore lamid ma'aha intay tidhi ayay ka diiday. Haddaba waxay mar fasaxday haddana inay diidoo sharci ku haboon oo u diidaya majiro.

Maxakamada Hoose in Codsaduhu Dacwada dib usoo habaysto u fasaxday kadibna iskeed inay amarkii ka noqoto ay tidhahdo Dacwadiii u dib usoo habaystay kama aqbalyo waxa weeye amarkay iyaduu bixisay inay si sharciga ka baxsan u diidaa sharci ku haboon majiro sidaas awgeed Maxakamada Hoose Codsadaha hadda Dacwada inuu soo habaysto sababta ay uga oogalaatay marka hore inuu Dacwada soo

habaysto amar markay siisay kadib dacwadu soo habaystayna ay tidhaahdo kamaa aqbalayo ooy tidhi haddaad doonaysid Dacwadaadii hore sii wado nidam sharci oo sheegaya majiro.

Sidaan oogsoonahay sida u dhigayo Qodobka 91 (1) ee H.X.M.I. Maxakamaduhu intaynan Go'aanka gaadhin inta ka horeysa xililkasta ooy u arkaan inay haboontahay dhinacyadu in ay dacwadooda dib u habayn kusoo samaystaan doodana badalaan way u fasixii karta haddaba Xuquuqda nocan ee la siiyay dhinacyada in dacwadooda dib u habayn ku soo sameeyaan si arinta u faahfaahiyaan ama caddaalad sax ah in la helo markay muuhiim u tahay.

Haddaba Maxakamadu arintan markay fasaxaysoo khasaaraha ku haboon way go'aamin karta. Dhinac marku dacwad soo dhawaysto haddu arko arin muuhiim ah Dacwada inay ka hadhay u ku oogaaday geedi socodka dhexdiisa Dacwada wuxu Xuquuq u leeyahay in u codsado in la siiyoo fursad u Dacwada dib u habayn kusoo samaysto. Haddaba Qodobkani xalada unan ku oogalaanayn in Dacwada dib habayn lagu sameeyo waa markay dib u habaynta dacwadu barta ismaan-dhaafkla dooda aynan saamayn ku yeelanayn isla Qodobkan nuqulkiisa Ingriiska *"The amendment of pleading shall not be allowed when the amendment is not necessary for the purpose of determining the real questions in dispute"* saasay sheegaysaa.

Taasina waxa weeye Maxakamaduu geedi socod caddaalad inay gaadho inay muuhiim u tahay u aragto waa inay Cabashada dib u habaynta Dacwada oogalaato. Haddaba Qodobkani sida u dhigayo khaladaadka codsiga Dacwada ka yimaada haddii Xuquuqda dhinacyada wax uu u dhimayo Maxakamaduna Dacwada si haboon haddii dib u habayn loogu sameeyo aynaa dhinaca kale Xuquuqda wax yeelayn waliba khasaara dib u dhaca ku imanayaa loo go'aamiyo sidana Dacwada dib u habayn inta lagu sameeyo dooda loo wado waa caadi. Laakin intaas wixi ka baxsan hal dhinac Dacwada inuu dib u habayn ku samaysto isagoo sabab ku filan sheegaya sharciguna

inta Go'aan lagadhayo inta ka horeysa in dib u habayn lagu samayn karo u sheegayo haddaba Qodobkan si cadadkiisa ka baxsan oo cidhiidhiya inta loo turjumo Dacwada inaan dib u habayn lagu samayn, Dacwadiii dib u habaynta lagu soo smeyayna dhinac la iska dhigo. Dhinacyadu Xuquuqaha Dastuuriga ah iyo Xuquuqaha aasaasiga inay helaan sabab haboon oo loogu diidi karaa majirto.

Sidaas awgeed markaan usoo noqono arintan ay hayno Codsadaha hadda arinta Jawaab Celiyaha 3aad inta loogu daro codsiga in lacagtiisa la siiyo ah ee Dacwada inuu soo habaysto intay Maxakamadu ka oogalaatay kadibna inay tidhaahdo Dacwadiii hore wuxu Codsaduhu ku soo codsaday heeshiis dayn ayuu aha tan u hadda dib u soo habaystay na wa dacwad ka faa'iidaysii si aan haboonayn ah. Sidaas darteed Dacwada dib loo soo habeeyay ay tii hore ka duwantahay lama aqbali karo intay tidhi haddaad doonaysoo codsadow dacwaddaadii hore uun si wado, Codsaduhuna inunan Dacwadiii horee inuu si wato inunan rabin u sheegay sidaas na Dacwadiii ku xidhay ayaan ka fahannay Dacwada.

Haddab arintan dooda barta ismaan-dhaafku Codsadaha hadda Jawaab Celiyeyaasha lacgtu leeyahay waan ku leeyahay ayay khusaysa, Codsaduhu markii hore Jawaab Celiyeyaasha 1aad iyo 2aad ayuu dacwad heeshiis dayn ah ku oogay hasayeeshe Jawaab Celiyaha 3aad marka Dacwada lagu daro ka faa'iidaysii si aan haboonayn inta laga dhigay Dacwada ayaa sheegay sidaa awgeed Codsaduhu lacagtu Jawaab celiyayaash ka doonayo inay jirto inuu cadaymoo ku caddaysto masuuliyadda isaga leh. Haba ahaate Xuquuqdan marku codsanayo Dacwadiiisi hore khaladaad ka dhacay inuu saxo u dib u habayn ku sameeyo kana dhigo ka faa'iidaysi si aan haboonayn, Jawaab celiyayaashuna Dacwada dib loo habayay intay soo dhowaadan inay ka doodaan, dib u dhaca ku dhacay doodana in khasaare la siiyo inta kadib Xuquuqda wax waxyeelo soo gaadhaysa majirto. Codsadaha hadda sababta dooda u ah in lacagtiisi Jawaab celiyayaashu siiyaan codsi ku haboon inuu Dacwada dib u habayn kusoo samaysto si

loo helo caddaalad sax ah ama barta ismaan-dhaafka dooda si loo soo saaro. Haddaba sida u dhigayo Qodobka 91 (1) ee H.X.M.I. sida ku xusan isaga oo buuxinaya sidaas darteed Maxakamadaha Hoose Codsaduhu Dacwada u dib usoo habaystay uu u dhoawaystay intay ka oogalaadaan Jawaab Celiyeyaasha inay dood haboon u qabtaan haddi khasaare jiro na kharash ku haboon inay u amraan iyaga oo sidaas samaynayya dhincayada sharciga ku haboon ee dooda intay dhagaystaan inay Xuquuqahoda xaqijiyaan iyagoo baadhitaan haboon samaynaya sidaasna Go'aan ku haboon uga soo saaraan. Laakin waxay ahayd in ay Maxakamadaha Hoose doodsiiyaan dhinacyda markii Codsaduhu waxkabadlaka dacwada keensaday.

Summad Galka: 165775

Taariikhda: Yakaatit 29, 2011 T.I.

Garsoorayaasha: 1. Salamon Arada

2. Birhanu Amanaw

3. Baiwqat Balaay

4. Haaylu Nagaash

5. Itmat Asafa

Codsade: Ato Tashoma Gorfee dhaaxle Maqdas Tashome

Jawaab Celiyaha: Waysaro Fasasach Wandmangn Dhaaxale Taasaw Tashoma

Baadhis kadib Galkan waxa laga soo saaray Go'aanka hoos ku xusan:

XUKUN

Cabashadan Dibu Eegista waxa gun-dhig u ah arin khusaysa xukun fulin. Doodii ay dhinacyadu ku yeesheen Maxakamada Hoose Jawaab Celiyaha hada ayaa xukun site ahaa halka u Codsadaha hada ahaa xukun lagu fuliye. Codsadaha hada ayaa u dhawaystay Cabasho Fadhiga xukun fulinta ee Maxakamada Hoose iyada oo marka hore la isku dayin in Guriga laftiisa in labo (2) qaybiyo in la yidhahdo Guriga inta la xaraasho lacagta ha loo qaybiyo maadaama aynan sharciga waafaqsanayn inta xaraashka la joojiyo in Gurigu sidu yahahy labo (2) loo qaybiyo ayuu Maxakamada Hoose ka codsaday islamarkaana Fadhi u hoogaamiyay fulintu Cabashada Codsadaha intu baadhay ayuu yidhi Go'aanka ay Maxakamadu gaadhay iyo Amarka ay ka soo saartay iyo qaabka fulinta loo wado wax cadayn ah oo sheegaya in ay is khilaafsan-yihiin maadaama unan soo dhawaysan sabab ay Maxakamadu xaraashka ay ku joojiso

majiro intay tidhi cabashadii Codsadaha ka diiday islamarkaana Codsaduhu Amarka ku qanci waayay ayuu Maxakamada Sare ee Federaalka Fadhiga Rafcaan Cabasho u gudbistay balse sida u dhigayo Qodobka 337 ee H.X.M.I. Maxakamadu way ka diiday cabashadii islamarkaana isaga oo ku qanci waayay amarkaas ayu Cabashada Dibu Eegista soo dhawaystay.

Nuxurka Cabashada Codsadaha ee Dibu Eegista markaan soo koobno Codsadaha iyo Jawaab Celiyuhu hantida dhaxalka si isleeg ayay u leeyihiin. Qaybinta marka la eegana waxa xalal kale la raadin karaa Guriga Go'aanka laga gaadhay marka unan qaybsamayn balse Guriga oo la qaybin karayo inay yidhahdaan xaraash ha lagu iibiyo Xuquuqda codsadah ayay wax yeelaysa. Qaybta maamulka Magaalada mashruca wakhtiga kala guurka waraaqda ka soo baxday 12/1/2010 T.I. awaamirta ku qeexan lambarkeedu yahay 12/2006 wuxu ku cadeeyay in Guriga labo (2) loo qaybin karo. Sida haboon iyadoo saa loo qaybin karayo in la qaato xalka u dambeeya oo ah in la xaraasho wa arin aan haboonayn. Hadii Guriga la xaraasho qimihiisu waxyar ayuu noqonaya taasina inaanan Guriga isticmaalin ayay sababaysa. Sidaas awgeed inta Guriga xaraashka laga daayo in labo (2) qaybiyo in loo go'aamiyo ayuu codsaday.

Hadaba Cabashada Codsadaha markaan baadhnay Guriga in labo (2) loo qaybin karo iyo inkale ee ku saabsan iyo agaasinka fulinta ee cabshada loo dhawaystay iyo awaamirta lambarkeedu yahay 12/2006 sida ay sheegaysoo in labo (2) qaybin karo iyada oon laga sal-gaadhin Guriga in xaraash lagu iibiyo in la go'aamiya inay waafaqsantaha Go'aankii asalka ahaa iyo in kale si loo xaqiijiyo ayaan amarnay in Fadhigan lagu eego islamarkaana Jawaab Celiyaha yeedhitaan loo sameeyay ayaan dhinacyadu in dood qoraal ah ku doodaan ayaan samaynay.

Jawaabta Jawaab Celiyaha markaan soo koobno Gurigu inusan qaybsami karayn qaybta maamulka Magaalada ee khusaysa Guriyaha bila xujada ah intay Injineer u direen ayay soo xaqiijiyeen sababta Gurigu uusan qaybsami karayn waxay ku

sheegeen Gurigu dhinac inuu Guriga wayn u ka samaysanyahay bulukeet iyo biro tayo leh, halka guryaha kale yihiin geed and dhoobo islamarkaana ay gaboobeen oona dumis u dhowyihiin, arintaas cadaynteedana guryaaha bila xujada ah cida ay khusaysoo siday sheegeen guryaha waxa laga sameeyay agabka laga sameeyay inaynan surogalinayn in labo (2) loo qaybiyo islamarkaana dhinacyadu ku heeshin waayeen inay qaybsadaan sidaas darteed ayaa loo amray in xaraash lagu iibiyo awaamirta lambarkeedu yahay 12/2006 waa awaamir khusaysa gacan ku haynta guryaha ee ma'ahin awaamir khusaysa Guri dhaxal qaybintiisa. Guriga maalinti xaraashka lagu iibiyay oo ka bilaabmaysa Nahaase 28, 2010 T.I. Go'aankaas waxa loogu go'aamiyay Codsadaha in la siiyo lacag dulsaar ah oo dhan 100 kiba 9 taaso laga jarayo Jawaab Celiyaha. Hadaba Cabashada Codsaduhu maadaama aynan sharciga waafaqsanayn in laga diido ayaa haboon ayuu yidhi. Codsaduhuna Jawaabtiisi Jawaab Celiyaha wuxu ku si xojiiyay cabashadiisi Dibu Eegista.

Hadaba geedi socodka arintu waa sidaa kor kusoo sheegnay. Anaguna inaan xaqiijino barta ismaandhaafka dooda dhinacyada Go'aanka gun-dhiga u ah Cabashada dib-u-eegista anago la eegayna Qodobada sharci ee khuseeyaa arinta sida hoos ku xusan u baadhnay.

Guriga doodu ka taagantahay qayb waxa leh Tashome Gorfe qaybta kalena ay leedahay Marxuumad Taanaaye Tashoma, Marxuumad Taanaaye Tashoma qaybteedi waxa dhaxlay wasaro Fasasach Wandmangn saasaa Go'aanka ka muuqata. Hadab doodan galkiisa Ato Tashoma Gorfe iyo Fasasach Wandmangn labaduba maadaama ay dhinteen dhanka Codsadaha Maqdas Tashoma dhanka Jawaab Celiyaha Taasaw Tashoma inay dhaxlayaasha yihiin dooduna sida ku socotay ayaa ka muuqda Diiwaanka Maxakamadaha Hoose. Hadaba codsaha hada Maxakamada Hoose Fulinta ee Cabashada u dhowaystay xalka 1^{aad} Gurigu isaga oo labo (2) inuu u qaybsamayo

aan la eegin in la yidhahdo xaraash ha lagu iibiyo maadaama aynan ahayn sharci inta xaraashka la joojiyo in Guriga la qaybiyo ayuu codsaday.

Codsaduhu isaga oo cabashadiisa qaabkas usoo dhawaystay balse agasiinka xukun fulintu Guriga in la qaybin karo iyo inkale inay soo xaqiijiyaan qaybta maamulka Magaalada xafiiska mashruca kala guurku Jawaabta ay siiyeen ee ku taariikhaysan 12/1/2010 T.I. waxay ku sheegeen Gurigu maadaama xujad lahayn sidaas darteed qaybta guryaha bila xujadaha ah ayay arintu khusaysa sidaas awgeed inaynan iyaguu Guriga qaybin karayn ayay cadeeyeen. Laakin awaamirta lambarkeedu 12/2006 sida ay dhigayso in la qaybin karo ayay Jawaabta ku cadeeyeen. Sidaas darteed agaasinka xukun fulintu isaga oo ka duulaya Jawaabta qaybta maamulka Magaalada mashruca kala guurka ah ayay amreen qaybta qaabilsan guryaha bila xujada ah inay Guriga sidiisa ugu qaybiiyaan, hadaba amarka cidii loo gudbiyay qabta maamulka guryaha bila xujada ah iyaguna Jawaabta ay bixiyeen taariikhdu markay ahayd 21/6/2010 T.I. waxay ku sheegeen inay Gurigii soo arkeen, agabka Gurigu kasamaysanyahay maadaama u ka duduwan yahay in la qaybiyo ay ku adkaatay. Hadaba agaasiinka xukun fulintu dhinacyada oon heeshiis ahayn Guriga in xaraash laga bilaabayo lacag dhan 32,1,279.13 in lagu iibiyo ayuu amray sidaas awgeed na Gurigii doodu ka taagnayd inta xaraash loo bandhigay Codsadaha iyo Jawaab Celiyuhuba inuu xaraashku la hirgaliyo saxeexoda ku cadeeyeen marwo Raheel Mogas shaqsiga la yidhaada inuu 8,850,000 oo Birr inay ku guulaysatay xaraashkii lacagtina ay u xaraysay Maxakamada Federaalka ee Darajada 1^{aad} Diiwaanka fulinta iyo Diiwaanka agaasiinka xukun fulinta laga fahmay.

Hadaba hantida dhaxalka qaybinteeda cida ay khusaysa intay kari karto waa inay sideeda u qaybisoo laakin hadaynan qaybsamayn islamarkaana dhinacyadu ku heeshiin waayaan in xaraash lagu iibiyo waxa sheegaya Qodobada xeerka dhaxalka ee sharciga madaniga. Dhinaca kale nidaamka lagu iibinaya hadunan haboonayn ama

khayaano ku jirto in la buriyo ama in la joojiyo Cabasho waa la soo dhawaysan kara sida u dhigayo Qodobka 445 ee H.X.M.I.

Hadaba arintan aan hayno Codsadaha iyo Jawaab Celiyuhuba mid kastaba dhaxalbay hantidani kusoo gaadhay sidaas darteed qaybta maamulka Magaalada ee mashruca kala guurka ah inuu Gurigu xujad lahayn sidaas awgeedna qaybta qaabilsan guryaha bila xujada ah arinyu khusayso dhinacooda na saas aynan ku qaybin karin ayay sheegeen laakin awaamirta lambarkeedu yahay 12/2006 sida ay dhigaysoo in la qaybin karo ayay cadeeyeen sidaas darteed na agaasiinka xukin fulintu isaga oo ka duulaya Jawaabtaas inuu amray qaybta qaabilsan guryaha bila xujada ah inay Guriga qaybiso lagu amray. Cidii la amray inta Guriga ay tagtay ayay soo aragtay Gurigu wuxu kasamysanyahay inaan Guriga la qaybin karin sidaas na Jawaab ku soo bixiyeen islamarkaana dhinacyadu inay ku heeshiin waayeen inay Guriga qaybsadaan. Sidaas awgeed Guriga in la xaraasho amar lagu bixiyay Codsadaha iyo Jawaab Celiyuhuba xaraashka in la hirgaliyo saxeexoda ay ku cadeeyeen sidaasina marwo Raahel Mogas ay ku guulaysatay lacag dhan 6,850,000 Br (lix milyan sideed boqol iyo konton kun oo Birr). lacagtiina ay xaraysay ayaa muuqata.

Hadabbba Cabashadan Codsadaha ee Dibu Eegista oo khusaysaa dood qaybin Guri intaanan loo gudbin xal kale Guriga la go'aamiyay hadii labo (2) loo qaybin karayo in xaraash lagu iibiya inay Xuquuqdiisa wax u dhimaysoo ayuu ku dooday balse qabta maamulka magaaalada u qaabilsan mashruca kala guurka waxay cadeeyeen Gurigu inuu bila xujad yahay sidaas darteedna arintu ay khusayso qaybta (desk-ga) u xilsaaran guryaha bila xujada ah, sidaasna inaynan kukala qaybin karayn ayay sheegeen laakin awaamirta lambarkeedu yahay 12/2006 sida ay dhigaysoo in la qaybin karo.

Hadaba anagoo Jawaabtaas ka duulayna agaasinka xukun fulintu ee maamulka magaaladu wuxu amray guryaha bila xujada ah cida u qaabilsan maamulka Magaalada

inay Guriga labo (2) u qaybiyaan. Hasayeeshe qaybti amarka loo gudbiyay ee maamulka Magaalada ee u xilsaaran guryaha bila xujada ah markay Gurigi arkeen waxa u soo baxday inaan la qaybin karayn waxayna sabab ku sheegeen agabka Guriga laga dhisay inuunan qaybin noqonayn sidaas wageed inanynan qaybin kararyn u sheegeen agaasinkii fulinta ee amray. Agaasinka fulintuna itu dhinacyada u yeedhay ayuu ka codasay in inay ku heeshiiyaan, balse marku arkay inaynan ku heeshiinayn ayuu amray in Guriga xaraash la gu iibiyo islamarkaana Codsadaha iyo Jawaab Celiyuhuba saxeexoda ku xaqiijiyeen in Guriga la xaraash. Sidaa awgeed ayaa Guriga lagu iibiyay 6,850,000 oo Birr (lix milyan 157ided boqol iyo konton kun oo Birr). Sida u dhigayo Qodobka 445 ee H.X.M.I. geedi socodka xaraashka wax khayaana ah ama aan haboonayn laguma arag sidaas darted Cabashada Codsadaha ee Go'aanka Maxakamadaha Hoose ay ka diideen wax khaladaad sharci oo aasaasi ah kumaanan arag sababtaa awgeed waxan kasoo saarnay Go'aankan hoos ku xusan:

GO'AAN

1. Iyadoo la raacayo sida uu dhigayo Qodobka 348 (1) ee HXMI, waxaa la ansaxiaya:
   i. Amarka lagu bixiyay Go'aanka lambarkiisu yahay 250862 lana qoray Hamle 24, 2010 T.I. kana soo baxay Maxakamada Federaalka ee Darajada 1^{aad};
   ii. Go'aanka lambarkiisu yahay 219963 lana qoray Hidaar 10, 2011 T.I. ee lagu ansixiyay Go'aanki Maxakamada Darajada 1aad.
2. Waxaa la Amray in laga qaado xayiraadii la saaray Hidaar 20, 2011 T.I.
3. Kharashkii iyo khasaarahii Dacwadani ha isqabaan ayaan go'aaminay

AMAR

Galka lamarkiisu yahay 250862 ee ka soo baxay Maxakamada Federaalka Darajada 1aad iyo agaasinka fulinta Galka lambarkiisu yahay 29549 Diiwaanada xaga laga soo qaaday ha lagu celiyo.

Diiwaankani maadaama u Go'aan helay waa la xidhay xasuus dhawrkana ayaa lagu celiyay.

Go'aankan waxaa ku yaala saxeex shan Garsoore oo ay reeban tahay in la muujiyaa.

Summad Galka: 166205

Taariikhda: 29/9/2011 T.I.

Garsoorayaasha: - 1. Teklit Yimsal

2. Teferi Gebru (Dr.)

3. Qana'a Qitaata

4. Tashome Shifaraaw

5. Sahay Mankir

Codsade: G/Iyasuus Muluneh – wuu soo dhawaaday

Jawaab Celiyayaal: 1aad Ato Walde Abute – masoo dhawaanin

2aad Wasaro Adanech Dula – wuu soo dhawaaday

Galkan, baadhis kabacdi, waxaa laga soo saaray Go'aanka hoos ku qoran laga soo saaray

XUKUN

Galkan wuxuu khuseeya dood Guri wuxuna ka bilaabmay Deegaanka Shucubta Konfureed ee Itoobiya Magaalada Bosana Maxakamada Darajada 1aad Codsadaha hadda oo Maxakamada Hoose ka ahaa Dacwoode iyo Jawaab Celiyaha 1aad oo Dacwoode ka ahaa Maxakamada Hoose, Jawaab Celiyaha 2aad Maxakamada Hoose soo dhexgale kaga dooday. Codsadaha Maxakamada Hoose Dacwada uu dhawaystay markaan soo kobno 21kii bishi 8 Go'aanka kazoo baxay oo ku salaysna cadaymoo been abuura Jawaab Celiyaha 1aad u soo dhawaystay ayaa lagaga qaatay 48 kare meter oo dhulkiisa kamid ahaa. Haba ahaate cadaymaha u soo dhawaystay Jawaab Celiyaha 1aad ee Go'aanka gundhiga u ahaa waxay ahaayeen been abuur islamarkaana hadda kahor Maxakamadu dambilenimo intay ayay ku Ciqaabtay 4 sano iyo shan bilood oo

xadhig ah sidaas darteed Go'aanka inta laga buriyo Guriga u ku dhistayna laga duumiyo dhulka lagu wareejiyo islamarkaana Xuquuqda mag-dhow-da na loo dhowro codsiga u ka codsaday Maxakamada Hoose sidaas ayaa muuqata.

Jawaab Celiyaha 1aad wuxu ku Jawaabay arintu maadaamaa ay Go'aan heshay mar 2aad ma haboona islamarkaana Go'aanka Ciqaabta ee Maxakamadu bixisay sharciga madaniga wax xidhidhi ah lama leh sidaas darteed inay Maxakamadu ka diido ayu ku dooday. Jawaab Celiyaha 2aad na dhankiisa wuxu ku dooday 500 oo kare meter oo dhulkan doodu ka taagantahay kamid yahay inuu ka iibsaday Jawaab Celiyaha 1aad sidaasna soo dhexgale ku yahay, Maxakamadu cabashadiisi intay ka oogalaatay ayay amartay inuu dooda qayb ka noqdo.

Qaabka aan soo sheegnay doodii Maxakamada Hoose waxa gun-dhig waxa u ahaa dhulka Jawaab Celiyaha 2aad u ka iibsaday Jawaab Celiyaha 1aad sidaas darteed Dacwadiii Codsadaha Maxakamadu Go'aan dhinac iskaga dhigtay ama ay ka diiday ayay soo saartay. Codsaduhuna isga oo Go'aanka ku qanci waayay ayuu Maxakamada Sare ee Gobolka iyo Maxakamada guud ee Deegaanka Fadhiga Dibu Eegista cabashadii Rafcaanka iyo Dibu Eegista uu u dhawaystay maadaama laga diiday ayuu Cabashadan codsiga Dibu Eegista ee Maxakamada guud ee Federaalka usoo dhawaystay isaga oo ka codsanay Go'aamada iyo amarada Maxakamadaha Hoose in laga saxo.

23/3/2011 T.I. Codsaduhu Cabashada uu u soo dhawaystay Fadhiga Dibu Eegista Go'aanadii Maxakamadaha Hoose iyo Amaradii in laga buriyo ayuu codsaday. Markuu baadhay Fadhiga xaqijinta dib-u-egistu wuxu go'aamiyay in Cabashadada la eego islamarkaana Jawaab Celiyeyaasha Jawaabtay keeneen ay ku codsadeen in Go'aankii hore uun loo ansixiyo islamarkaana Jawaabta Celiyeyaasha Codsaduhu

Jawaab ka soo bixiyay. Hadaba geedi socodka Galkan ee Maxakamadaha Hoose waa sida aan kor kusoo sheegnay. Hadaba anaguna Go'aamada iyo amarada Maxakamadaha Hoose ay bixiyeen inay leeyihiin khaladaad sharci iyo in kale ayaan sidan hoos ku xusan usoo baadhnay.

Markaan baadhnay Diiwaanka sidaan ka fahamnay Cabashada Codsadaha waxa weeye Go'aanka cadaymaha been abuurka lagu gaadhay in laga buriyo 161arted161 saabsana, Maxakamadaha Hoosena codsiga garsoor ee laga codsaday dabcigisa iyaga oon faahmin dhulka doodu ka taagantahay Jawaab Celiyaha 2aad inuu ka iibsaday Jawaab Celiyaha 1aad sidaas 161arted wax Codsadaha loo celinayaa inuunan jirin ayaa muuqata go'aamadooda. Dacwada Codsaduhu Maxakamadaha Hoose u dhawaystay sidaan ka fahamnay Jawaab Celiyaha 2aad iyo Codsaduhu dooda dhexmartay Go'aanka laga soo- saaray inuu gun-dhig u ahaa dokumanti been abuura ah lagu saleyay weeye. Sidaas awgeedna Maxakamadaha Hoose Go'aankaas in ay dib u eegaan inuu Codsaduhu u dhawaystay ayaan ka fahamnay. Hadaba, Cabashada la soo dhawaystay sida ku haboon in Galka loo xidho iyada oo ahayd in si cusub Go'aan looga soo-saara inay sharci daro ahayd ayaan u aragnay. Jawaab Celiyaha 2aad codsiga Xuquuqdisu Galka la yiri waa la xidhay sharcinimadiisa in lala eego ayay ahayd balse sabab soo dhex-gale u ku dooda majirto sidaas awgeed codsiga Codsadaha sida u dhigayo Qodobka 6aad ee H.X.M.I in lagu eego ahayd in codsiga Go'aanka la buriyo nidaam sharci ku ma haboona. Islamarkaana Maxakamadaha Hoose halkay Dacwada ka diidi lahaayeen Dacwada Codsadaha inay si cusub u qaadaan iyaga oo Go'aanka heerarka kala duwan ee Maxakamadaha Hoose ay ansixiyeen arintaas na in ay khaladaad sharci ee Maxakamaduhu galeen ayay muujinaysa. Sidaas awgeedna waa in la buriyo. Sababaaha awgeed Go'aanka soo-socda ayaan gaadhnay.

GO'AAN

1. Waxaa waxba kama jiraan laga dhigay Go'aamadii iyo Amaradii ka soo baxay:
   - **i.** Maxakamada Darajada 1aad ee Magaalada Hosaana ee Deegaanka Shucubta onfureed Galka lambarkiisu yahay 23099 lana qoray 20/4/2010 T.I.; iyo
   - **ii.** Maxakamada Sare ee Gobolka Galka lambarkiisu yahay 17695 lana qoray 18/5/2010 T.I. iyo waliba
   - **iii.** Maxakamada Guud ee Deegaanka Shucubta Konfureed Fadhiga Dibu Eegista Galka lambarkiisu yahay 156 lana qoray 9/1/2011 T.I.
2. Waxaa la go'aamiaya in Codsadaha Dacwadiiisa codsiga u soo dhawaystay in mar 2aad loo eego.
3. Waxaa la Go'aamiyay ma jiro wax u diidaya ma jiro in Jawaab Celiyuhu Dacwad furto.
4. Waxaa la Go'aamiya in qofkastaa kharashkiisii isagu qabo.
5. Waxaa la Amray in Nuqulkan Go'aankan Maxakamadaha ha loo gudbiyo.

Galkan waa la xidhay Xasuus Dhawrkana lagu celiyay.

Go'aankan waxaa kuyaal saxeexa shan Garsoore oo aan la ogolayn in la akhrisan karo.